IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA
الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 12aad Muqdisho 1 Jenayo 1984 L. 1

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 1 ee 1 Jen. 1984, Oggolaansho ha Miisaaniyadda ku-la-galka ee sannadka 1984. BOG. 2

SHARCI L. 2 ee 7 Jen. 1984, Isbeddelka Zaad ee Miisaaniyadda 1992. » 4

SHARCI L. 3 ee8 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci L. 5 ee 2da Febraayo 1980). » 6

SHARCI L. 4 ee 9 Jen. 1984. Oggolaanshaha Xisaabxirka Miisaaniyadda 1982. » 7

SHARCI L. 5 ee 9 Jen. 1984, Oggolaansho Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maalgelinta oo dhexmaray J.D.S. iyo J/yadda Federaaliga ah ee Jarmalka. » 8

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI L. 6 ee 9 Jan. 1984, Wax ka beddelid sharci L. 5 ee 11.12.1968 iyo Sharci L. 3 ee 10.1.68. kuna saabsan tacriifada Furdada maamulka iyo tirada. » 9

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER SHARCI L. 1 ee 1 Jen. 1984, Fasax Qalab ka keenid dibedda, oo ku meel gaara. » 10

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 9 Jen. 1984. Meel-marinta Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelinta oo dhexmaray JDS iyo J/yadda Federaaliga ah ee Jarmalka. » 13

DECREE N. 1 of 9 Jen. 1984, Instrument of Ratification. » 14

XEER Sharci L. 2 ee 7 Jen. 1984, Canshuurta Gadidda. » 15

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA

QAYBTA SADDEXAAD

SOMALI BOTTLING COMPANY HARGE YSA U YEERID » 21

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6.12.83, Lumid Buug Keyd L. 5690 ku qoran Maxamed Cali Maxamuud » 22

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 30.8.83, Lumid Jeeg War. L.560538 ku qoran Axmed Furre Ubaxle » 23

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 1 taariikh 1 Jen. 1984, Oggolaanshaha Miisaaniyadda ku-tala-galka ee sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo uruuriso dakhliga iyo in ay bixiso kharashka ku qoran miisaaniyadda halkan ku lifaaqan iyadoo la raacayo Xeerka habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka ku saabsan Madaxyada miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood u leh Golaha Wasiirrada.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada Madax-xige waliba ee Miisaaniyadda Dawladda Dhexe waxaa awood u leh Wasiirka Wasaarad waliba.

Kala wareejinta ceynkan oo kale ah ee miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood u leh Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Goboika.

Qod. 3aad

1. Miisaaniyadda loogu talo galay Mashruucyada horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya mashruuc horumarineed.

2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay in uu keyd ka dhigo haddii loo baahdo dhammaan ama

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1984, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.1.1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 2 taariikh 7 Jen· 1984, Isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1982·

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1982, sida ka muuqato lifaaqa A ee Sharcigan.

Qod· 2aad

Sharcigan horay ayuu ka dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

LIFAAQA «A»

DAKHLIGA

MADAX—XIGE	TILMAAN	Qiyaasta hore	Isbeddelka	Qiyaasta Cusub
1. 1. 1.	Canshuurta keenidda Alaabta	1.200.000.000/=	600.000.000/=	1.800.000.000=/
1. 1. 2.	Canshuurta Diridda Alaabta	34.000.000/=	200.000.000/=	234.000.000/=
1. 1. 4.	Diiwaangelinta	64.000.000/=	100.000.000/=	164.000.000/=
4. 1. 1.	Ganaaxa	8.000.000/=	63.397.000/=	71.397.000/=
		1.306.000.000/=	963.397.000/=	2.269.397.000/=

Sharci lambar 3 taariikh 8 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci lambar 5 ee 2da Febraayo 1980).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qolobka 11aad, Sharciga lambar 5 ee 2da Febraayo 1980, waxaa loo beddelay sida soo socota:

1. Sitayaasha Shahaadada Dugsiga Sare ama wax u dhigma, waxay Shaqada Dawladda ku gelayaan tartan imtixaan.

2. Tartanka waxaa ka qeyb geli kara qofkii soo maray Dugsiga Tababarka ee Xalane, soona gutay waajibaadka Shaqada Qaranka ama Hawsha Difaaca Qaranka.

3. Imtixaanka tartanka ahi waxaa maamulayo Guddiga ku tilmaaman Qod. 14aad ee Sharcigan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

Dhaqan galka Sharcigani wuxuu ka billaabanayaa 1da Luulyo 1983, waxaana lagu soo saarayaa F'aafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 4 taariikh 9 Jen. 1984, Oggolaanshaha Xisaabaadka Miisaaniyadda 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab-xirka Miisaaniyadda Dawladda 1982 oo ah sida ku tifaftiran lifaaqa (A).

Qod. 2aad

Sharcigan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 5 taariikh 9 Jen. 1984, Oggolaanshaha Heshiis Wax wada qabsi xagga dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maalgelin oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

MADAmWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiiska wax wada qabsiga xagga dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maalgelin oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Boon ee Dalka Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, taariikhdu markay ahayd 27 Nofembar 1981.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharciga isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6 taariikh 9 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharci lambar 5 ee 11.12.1968 iyo Sharci lambar 3 ee 10.1.78. kuna saabsan tacriifada Furdada maamulka iyo tirada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qalabka caafimaadka ee ku tixan codadka 90.17 ilaa 90.20 ee tacriifada Furdada, waa laga dhaafay canshuurta keenidda iyo tan maamulka iyo tirada.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeer-sharci lamabr 1 ee 1da Jennaayo 1984: Fasax qalab ka keenid dibedda oo ku meel gaara.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dactuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka sharci lambar 4 ee 30ka Setember 1981. kuna saabsan joojinta wax ku keenidda habka Faranka Faluutada iyo beddelaayadii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Jiilaalka adag ee nagu soo fool leh;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Dawlad iyo Dadweynaba la iska kaashado sidii looga gaashaaman lahaa cawaaqibta roob yarida oo dhibaato dhaqaale iyo mid bulshadeed xambaarsan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay dow tahay in fursad la siiyo hantida gaar ahaaneed oo ay ku gudato dowrkeeda bulshadeed ee dastuuriga ah, xagga kala qayb qaadashada Dawladda ka hortagga dhibaatada roob la'aanta ee Gobollada JDS intooda badani ka jirto;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in tillaabadaas si degdeg ah loo hirgeliyo, loona maro fulinteeda waddada sharciga ah ee ugu dhaqso badan;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

TIXGELIYEYNA: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka sharci ee soo socda:

ka Faranka Faluutada, waxaa si ku meel gaar ah oon caadi ahayn loo fasaxay in ICTIMAAD LA'AAN lagu keeno Dalka Baabuurro Booyada ama Xamuul ah.

Qod. 2aad

Baabuurta la keeni karo waxaa u yar LANR-ROVER.

Qod. 3aad

Waxaa reebban in la keeno BASAS, nooc kasta ha ahaadeene, iyo gawaarida xamuulka ee yaryar, sida «XAAJIYARDA» iyo wixii la mid ah.

Qod. 4aad

1. Waxaa kale oo la fasaxay in si ku meel gaar ah oon caadi ahayn ICTIMAAD LA'AAN Dalka lagu keeno RAASHIN.

2. Raashinka la keeni karaa waxa uu yahay: Bur, Bariis, Saliid, Sonkor, Caanaha Budada ah iyo Caleen Shaah.

Qod. 5aad

Muddada badeecadaha ku tilmaaman Qodobbada 1 iyo 2 ee Xeerkan sharci lagu keeni karo Dalka waa saddex bilood oo ka billaabata 1da Jennaayo 1984, kuna dhammaata 31ka Maarso 1984.

Qod. 6aad

Badeecaddii laga soo dejiyo dekadaha Dalka 31ka Maarso 1984ta kadib, waxaa loo aqoonsanayaa in ay sharci darro ku soo gashay Dalka waxaana la wareegeysa Dawladda iyadoon ka bixineynin wax qiime celin ah.

Qod. 7aad

Dawladda, hay'adaheeda iyo Wakaaladaha Madax

Qod. 8aad

Badeecadaha Xeerkan sharci uu tilmaamay waxaa lagu canshuurayaa tacriifada iyo nidaamka uu qorayo Sharciga Kastanka ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Kod. 9aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan galayaa 1da Jannaayo 1984, waxaa lagu soo saarayaa Faafin Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda waxaana loo gudbinayaa iyadoo la raacayo Qod. 69aad ee Dastuurka, Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 1da Jennaayo 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre

Xeerka Madaxweynaha JDS, lambar 1 taariikh 9 Jen. 1984, Meel-marinta Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelinta oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 5 taariikh 9.1.84 oo Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelin oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Boon ee Dalka Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, taariikhdu markay ahayd 27 Nofembar 1981.

Qod. 2aad

Heshiiskaas wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel-marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Mugdisho, 9 Jen. 1984

DECSEE No. 1 of 9 Jan. 1984, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: Artiule 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of S.D.R.;

HAVING SEEN: Law No. 5 of 9.1.84 on the base of which the People's Assembly has approved Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this AGREEMENT;

HEREBY PROMULGATES

Article I

The Agreement between the Somali Democratic Republic and The Federal Republic of Germany for the encouragement and protection of private investiments, signed at Bonn on 27 November 1981, IS HEREBY RATIFIED.

Article II

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic and it's Implementation Will effeca upon the echange of instru ment of ratification.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 9 Jan. 1984

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

Xeer Sharci lambar 2 taariikh 7 Jen. 1984, Canshuurta Gadidda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la helo ilo lagu kobciyo dakhliga Miisaaniyadda Qaranka si ay Dawladdu ugu hesho awood ay ku taabbo-geliso mas'uuliyadaheeda ballaaran ee dhaqaale, nabadgelyo, Difaac, Bulsho iyo Siyaasadda;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda deg degga ah ee canshuur abuuridda;

TIXGELIYEYNA: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la abuuray canshuurta gadidda oo ku waajibaysa:

1. Keenidda badeecadda;
2. Ganacsiga Jumlada;
3. Qaansheegtada Hoteelka;
4. Badeecadda ay soo saaraan Warshadaha.

Qod. 2aad

Haddii qodobada sharcigan ayan si kale u sheegin macnacyada soo socda, waxaa loola jeedaa micnaha mid walba ku hor qoran:

b) Keene waa qofka ama Shirkadda dibadda alaab ka keena;

t) Ganacsade jumlo waa qof kasta oo ah dabiici ama qaanuuni, rayid ama Dawlad, oo sameeya ganacsi jumlo;

j) Ganacsi jumlo waa gadidda aan ku soconin qofka ugu dambeeya ee si toos ah u isticmaalaya badee-

x) Warshad waa makiinado iyo qalab meel ku rakiban looguna tala galay inay alaab ceyriin ama la farsameeyay bedlelaan ama ay sameeyaan farsamo aan isbedel keeneynin hase ahaatee kordhineysa qiima ha alaabada cayriin;

kh) Warshadle waa qofka leh warshadda, ha ahaado dabiici ama qaanuuni, rayid ama Dawlad.

Qod. 3aad

Canshuurta gadidda waxaa bixinayo soo dejiyaha, gataha ama jiiftaha Hoteelka.

Qod. 4aad

1. Tacriifada canshuurta gadidda waa 5% qiimaha badeecadu ku soo degtay ee canshuurta Furdada lagu daro, lagu kala gatay ama qiimaha qaansheegta hoteelka.

2. Qaansheegatooyinka ay ku waajibto canshuurta gadidda, waa ka deeysan yihiin canshuurta boolada, ee ku xusan qodobka 7aad ee Sharciga lambar 6 ee 7.12.66.

Qod. 5aad

Canshuurta gadidda waxay waajibaysaa mar allaale markii badeecada soo degto ama uu dhaco wax is dhaafsiga badeecada ama hawsha, haddii aan la kala qaadan qiimaha wax is dhaafsiga kolay ku tahay.

Qod. 6aad

1. Canshuurta waxaa lagu uruurinayaa boolo u gaar ah oo lagu dhejinaayo qaansheegtooyinka ku xusan qodobka 9aad ee sharcigan.

2. Hase ahaatee canshuurta gadidda ee ku waajibta soo dejinta waxaa lacag ahaan loola qaadanayaa canshuurta Furdada.

3. Teeda kale, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda waa ruqsayn karaa in canshuurtaas Xafiisyada furdooyinka iyo canshuurraha dadban ay lacag ahaan u qab-

Qod· 7aad

1· Boolada ku xusan qodobka sare waxaa soo saarayso Wasaaradda Maaliyadda midiiba wuxuu u qaybsamaa labo, waxayna leeyihiin midab kala duwan iyo lambar kow (1) iyo labo (2) qaybta ama lambarka koowaad waxaa lagu dhejinayaa asliga ama qaansheegta uu qaadanayo canshuur bixiyaha, kan labaadna waxaa lagu dhejinayaa nuqulka ama qaansheegtadu haraysa qofka bixinaayo qaansheegta·

2· Cabirka, qaabka iyo muuqaalka boolada waxaa lugu gooynayaa Xeerka Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

3. Habka gadidda iyo u qaybinta Dadweynaha iyo Hay'adaha Dawladda iyo helid la'aanta boolada waxaa loo raacayaa Sharci lambar 6 ee 7·12·66·

Qod· 8aad

1. Urubinta iyo maamulka Canshuurta gadidda waxaa u xil saaran Furdooyinka iyo Xafiiska Canshuurta Berriga ee dadban, iyo laamaha Canshuuraha ee Gobollada iyo Degmooyinka.

2. Ilaalinta iyo hubinta ku xad-gudubyada canshuurtaan waxaa u xil saaran Xafiisyada ku xusan faqradda sare, Booliska ilaalinta canshuuraha iyo guud ahaan Ciidamada Nabadgelyada iyo Xafiisyada Dawladda·

Qod· 9aad

1. Ganacsadaha jumlada, Warshadlaha, Hoteelaha waa in ay sameeyaan qaansheegto markasta oo cid badeeco ka iibiyaan ama hoteelka qof jiifto, hubiyaana in qaansheegtaas lagu dhajiyay boolo u dhiganta 5% ee:

b) Qiimaha badeecada la kala iibsaday;

t) Qaansheegta Hoteelka·

2. Xagga soo dejinta, canshuurta waxaa lagu cabbirayaa 5% iyadoo lagu dhufanayo qiimaha furdada

3. Qansheegtooyinka waa inay u lambareeysan yihiin si is daba taxan, iyadoo ka bilaabanayo kow (1) sanad walba iyo taariikhda.

Qod. 10aad

1. Ganacsadaha jumlada, soo dejiyaha iyo Warshadlaha, haddii ay badeeco u gudbiyaan rugtooda ee tafaariiqeed waxaa waajib ku ah inay isu sameeyaan qaansheegto, canshuurtana ku bixiyaan habka iyo nidaamka ku qoran qodobka 9aad.

2. Sidaasoo kale, dadkaasi waa inay canshuurta ku bixiyaan isu samaynta qaansheegto wixii tafaariiq ugu gadaan xaruntooda ganacsiga ama Warshadeed.

Qod. 11aad

Qofka qaansheegti bixinayo waxaa waajib ku ah in boolada qaansheegta lagu dhajinaayay uu shabadeeyaa ama istilaab muuqata ku sammadeeyaa.

Qod. 12aad

1. Warshadle kasta, ha ahaado rayar ama Dawlad, waxaa waajib ku ah inuu sameeyo buug lagu qoro:

b) Wax soo saarka Warshadda;

t) Bakhaar soo gelidda iyo bixidda badeecadda.

2. Buuggaas waa in loo qoraa, keediyaa, loona shabadeeyaa habka iyo nidaamka ay qorayaan shuruucda Waddanka u degsan.

Qod. 13aad

Lama hordhigi karo, lagamana qaban karo Maxkamad ama Xafiis Dawlad qaansheegto ay ku waajibtay canshuurta gadidda, haddii aan laga bixin canshuurtaas.

Qod. 14aad

Qof kasta oo Sharcigaan ama mid kale ku khasbaayo inuu sameeyo buug xisaabeed ama qaansheegto waxaa khasab ku ah in uu u soo bandhigo markasta oo ay waydiistaan Saraakiisha iyo Ciidamada ku shaqada leh

Qod. 15aad

1. Qof kasta ee gudan waaya waajibaadyada ku saabsan samaynta ama isu saamaynta qaansheegto iyo haynta buugaagta ku xusan qodobka 10aad, wuxuu galayaa gef ciqaabtiisu tahay ganaax qiyaastiisu tahay Sh. So. 60.000/= ilaa Sh.So, 240·000=/.

2. Bixin la'aanta canshuurta ama bixinta tiro ka yar intii waajibtay waxaa la saarayaa ganaax caddadiisu tahay 20 ilaa 60 jeer canshuurtii baaqatay.

3. Qof kasta ee fulin waaya waajibaadka ku xusan qodobka 14aad ee sharcigan, haddii falka uusan keenaynin dembi ka culus wuxuu mutaysanayaa ganaax u dhexeeya Sh.So. 50.000/= ilaa Sh.So, 200' 000/=

Qod. 16aad

Qof kasta ee lagu helo in uu ku qoray qaansheegto ama buug xisaabeed qiima ka hooseeya kan dhabta ah asaga oo ula jeedadiisu tahay inuu la baxsado canshuurta gadidda, wuxuu mutaysanayaa ganaax dhan Sh.So. 500 ilaa Sh.So. 2.000/= halkii qaansheegto ama qoraal.

Qod. 17aad

Been abuuridda iyo laba goor isticmaalka boolada canshuurta gadidda, ka sokow ciqaabaha uu qorayo Xeerka Ciqaabta wuxuu mutaysanayaa ganaaxa ku xusan qodobka 15aad faqraddiisa labaad.

Qod. 18aad

1. Inkastoo fulin La'aanta qodobada sharcigaan ay keenayso ganaax, waxaa dheer in qofkasta markasta ay waajib ku tahay bixinta canshuurtii ku baaqatay.

2. Xafiiska canshuuraha dadban, kaddib markuu ka qaado canshuurtii iyo ganaaxii ku waajibay, waa in uu ku dhuftaa qaansheegta shaabad muujinaysa in qaanuunka la waafajiyay qaansheegtaas.

Qod. 19aad

Dhinaca saxiixa ama qaata qaansheegto aan sharcigaan waafaqsaneen wuxuu wax ka qaadayaa masuuuliyadda ka dhalanayso ku xad-gudubka sharcigaan.

Qod. 20aad

biyaha, shidaalka iyo waxyaabaha ka soo baxa beeraha Dalka, Xoolaha iyo wixii dibadda loo dhoofiyo.

2. Waxaa kale ee canshuurta gadidda ka daysan badeecooyinka iyo qalabka uu keensado qof ama hay'ad laga dhaafay ama ka daysan canshuurta keenidda, badeecooyinka iyo qalabka si ku meel gaar ah loo soo dejiyay.

Qod. 21aad

Xuquuqda Dawladda ee ku saabsan soo xaraynta canshuurta gadidda iyo ganaaxyada la xiriira, waxay ku gubanayaan 10 sanadood oo ka bilaabanaysa taariikhda canshuurtu waajibtay.

Hase ahaatee, gubashada xuquuqda Dawladda marnaba ma xalaalaynayso in dokumentiga canshuurta ku waajibtay la isticmaalo iyadoon canshuurta la bixin.

Qod. 22aad

Hubinta ku xad-gudubyada qodobada sharcigaan, dacwooyinka ka dhalanaaya iyo maamulkooda waxaa loo raacayaa sharci lam. 21 ee 1.8.66. Sidoo kale. khasab ku qaadidda canshuurta gadidda iyo ganaaxyada la xiriira waxaa loo raacayaa habka sharciga canshuurta toosan. sharci lambar 5 ee 5.1.66.

Qod. 23aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waxaa awood loo siiyay inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Maamulka iyo fulinta Sharcigan.

Qod. 24aad

Waxaa la buriyay qodobada 17, 18 iyo 19 ee sharciga lambar 6 ee 7.12.66. keliya xagga Warshadaha iyo ganacsadayaasha kale ay ku waajibti canshuurta gadidda.

Qod. 25aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga. si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 7 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA

YEERID

Waxaa Saamileyda Shirkadda «Somali Bottling Company» ee Hargeysa la wargelinaya in maalinta 31ka Maarso 1984kii. Saacadduna tahay 4ta gelinka dambe, Xaruntа Shirkadda ee Hargeysa lagu qaban doono Shiweynaha Sannadlaha sidii looga arrinsado xaajadaha kala ah:

1. Oggolaanshaha Miisaaniyadda Sannadka 1983kii
2. Doorashada Guddiga Maamulka.
3. Wixii kaloo la soo jeediyo.

Shirkaasi hadduu maalintaasi ansixi waayo waxaa marlabaad Saamileyda loo baaqaya in Shirweynahaas lagu qaban doono maalinta 9aad ee bisha Abriil 1984kii isla meesha iyo saacadda kor lagu soo tilmaamay.

SOMALI BOTTLING COMPANY
Guddoomiyaha iyo Maamulaha Idman
(Maxamuud Axmed Maxamed Wiliq Wiliq)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kod ku qoran

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar kiisu ahaa 5690 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 10.000 uu iska lahaa Faxamed Cali Maxamuud oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeel Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: Qol. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 5690 oo ku qoran magaca Maxamel Cali Maxamuud ayna ku jirto lacag lhan Sh.So. 10.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Maxamed Cali Maxamuud Buuga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maa lmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 6.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJEEDDO FAAFIN JEEG LUMAY

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

IYADDOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Cad deyn Jeeg Lumay

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69,D,L. (9.9.65 Lumid Jeega War. ee Lamb. yahay 560538 kuna qoran yahay Axmed Furre Ubaxale kuna qorantahay lacag dhan Sh.So. 50.000.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas War. ee kor ku xu san Jaalle Axmed Furre Ubaxale markii ay ka soo wareegto muddo 20 maalmood laguna shaaciyo Faa finta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega cusub ee la sameyn doono Gacanta laga saaro Jaalle Axmed Furre Ubaxale iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

(Dr. Cabduraxmaan Sh. Maxamed)
Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

(Xaliimo X. Cabdi Aadan) (Tnzania)
Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.

30.8.83.

FAAFINTA RASMIGA
الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 12aad Muqdisho 30 Jennayo 1984 L. 1 R 1

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1-1-84 Lumid Buug Keyd L. 321 ku qoran Maxamed Faarax Xersi L. 1 BOG. 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3-1-84, Lumid Buug Keyd L. 23122 ku qoran Cusmaan Macallin Yuusuf L. 2 » 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3-1-84, J. War. L. 662438 ku qoran Cali Cawil Tarabi L. 3 » 31

Wakaaladda M. Qaranka

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4.1.84, Lumid J. War. L. 640464 ku qoran Cabdi Cabdulaahi Caabi L. 4 » 32

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.1.84. Lumid Buug Keyd L. 2245 ku qoran Maxamed Cali Xasan L. 5 » 33

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.1.84, Lumid Buug Keyd L. 8369 ku qo ran Binti Xaaji Maki Abuukar L. 6 » 34

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.1.84, Lumid Buug Keyd L. 7216 ku qo ran Maxamed Xaashi Guuleed L. 7 » 35

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.1.84, Lumid Buug Keyd L. 2807 ku qo ran Maxamed Negeeye Abtidoon L. 8 » 26

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.81.84, Lumid Buug Keyd L. 398 ku qo ran Cali Maxamed Hilowle L. 9 » 37

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.11.84, Lumid Buug Keyd L. 21504 ku qoran Xasan Axmed Rooble L. 10 » 38

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 10.1.84, Lumid J. War. L. 2168832 ku qo ran Ibraahim Geedi Shadoor L. 11 » 39

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11.1.84, Lumid Buug Keyd L. 12309 ku qoran Axmed Mac/n Aw Max/d L. 12 » 40

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11.1.84. Lumid Buug Keyd L. 2167 ku qo ran Maxamed Axmed Hilole L. 13 » 41

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11.1.84, Lumid Buug Keyd L. 20785 ku qoran Ciise Cumar Weheliye L. 14 » 42

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11-1-84, Lumid B. K. L. 23873 ku qoran Abuukar Calas Faarax L. 15 » 43

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11.1.84. Lumid Buug Keyd L. 7061 ku qo ran Cabdi Maxamed Xuseen L. 16 » 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12.1.84, Lumid Buug Keyd L. 73 ku qo ran Sheekh Cali Axmed Muudey L. 17 » 45

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11-1-84, Lumid Buug Keyd L. 3468 ku qoran Maxamed Cabdi Nuur L. 18 » 46

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.1.84, Lumid Buug Keyd L. 8346 ku qoran Abkow Sh. Axmed Muudey L. 19 » 47

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16-1-84, Lumid Buug Keyd L. 7722 ku qo ran Maxamed Ibraahim Cismaan L. 20 » 48

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.1-84, Lumid Buug Keyd L. 2247 ku qoran Cali Sheekh Maxamed L. 21 » 49

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 10-1-84, Lumid Buug Keyd L. 24124 ku qoran Cabdulaahi Celle Cilmi L. 22 » 50

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11-1.84, Lumid Buug Keyd L. 578 ku qo ran Qaasim Cabdi Gaboobe L. 23 » 51

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16-1-84, Lumid Buug Keyd L. 13933 ku qoran Khaliif Sheekh Maxamed L. 24 » 52

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.1-84, Lumid Buug Keyd L. 2238/83 ku qoran Aamina Xaaji Hilowle L. 25 » 53

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19-1-84, Lumid Buug Keyd L. 15714 ku » 54

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21-1-84, Lumid Buug Keyd L- 24340 ku qoran Muxyadiin Xaashi Cosoble L. 27 » 55

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21-1-84, Lumid Buug Keyd L. 23669 ku qoran Cabdi Xaashi Cosoble L- 28

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.1-84, Lumid Jeeg War. L. 70903 ku qoran Xaaji Cali Axmed L- 29 » 57

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21-1-84, Lumid Jeeg War. L- 70599 ku qoran Xaaji Cali Axmed L. 30 » 58

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21-1-84- Lumid Jeeg War. L. 70606 ku qoran Xaaji Cali Axmed L- 31 » g9

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25.1.84, Lumid Jeeg War. L- 689429 ku qoran Maxamed Cabdullaahi L- 32 » 60

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25-1-84, Lumid Jeeg War. L. 577419 ku qoran Cabdullaahi Cismaaciil L. 33 » 61

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25-1-84- Lumid Jeeg War. L- 646900 ku qoran Sheekh Cusmaan Maallin L- 34 » 62

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25.1-84, Lumid Jeeg War. L- 710556 ku qoran Yuusuf Axmed Cigaal L. 35 » 63

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12-1-84, Lumid Buug Keyd L- 14889 ku qoran Maxamed Axmed Cusmaan L. 36 » 64

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22-1.84, Lumid Jeeg War. L- 582218 ku qoran Ciise Nuur Faarax L- 37 » 65

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo lambar kiisu ahaa 321 lagana soo saaray Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna qoran lacag dhan Sh.So. 12.800 uu iska lahaa Maxa med Faarax Xersi sida ku cad warqadda lambark eedu yahay 00445 taariikhdeedu ——— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wa/jir.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amnortamento) Buug Keyd Lamb. 321 oo ku qoran magaca Maxamed Faarax Xersi ay na ku jirto Sh.So. 12.800

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir u bedelo Buuga Keydka ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmcod maali nta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 1.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 1

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 23122 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 72.195 uu iska lahaa Cusmaan Macallin Yuusuf sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 008 taariikhdeedu 3.1.84 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 23122 oo ku qoran magaca Cusmaan Macallin Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 72,195

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho. 3.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 2

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 662438 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 14.500 uu iska lahaa Cali Cawil Tarabi sida ku cad warqadda lambarkeedu 000063 taariikhdu 3.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 662438 oo ku qoran Cali Cawil Tarabi ayna ku jirto Sh.So 14.500.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Cali Cawil Tarabi ee kor ku xusan maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maan laha Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee .D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 3.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 3

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 640464 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qoran lacag dhan Sh.So. 38,800 uu iska lahaa Cabdi Cabdulaahi Caabi sida ku cad warqadda lambarkee du 0107 taariikhdu 4.1.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9,9,65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 640464 oo ku qoran Cabdi Cabdulaahi Caabi ayna ku jiro Sh.So. 38.800.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso u bedelo Cabdi Cabdulaahi Caabi ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is horgaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 4

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 2245 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 3.000 uu iska lahaa Maxamed Cali Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay ——— taariikhdeedu 3.1.84 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 2245 oo ku qoran magaca Maxamed Cali Xasan ayna ku jirto Sh.So. 3.000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir u bedelo Buug Keyd ee kor ku tiimaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 5.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Mas'

L. 5

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 8369 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 105.280 uu iska lahaa Binti Xaaji Meki Abuukar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ———taariikhdeedu 8.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 8369 oo ku qoran magaca Binti Xaaji Maki Abuukar ay na ku jirto Sh.So. 105.280

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho. 8.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANA...
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 6

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 7216 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 8.918.40 uu iska lahaa Maxamed Xaashi Guuleed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25640 taariikhdeedu ——— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 7216 oo ku qoran magaca Maxamed Xaashi Guuleed ay na ku jirto Sh.So. 8.918.40.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaam an una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegtomuddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag l ga keenin.

Muqdisho. 8.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 7

M[illegible]KKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Bug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 2807 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 30.400 uu iska lahaa Maxam ed Weheliye Abtidoon sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 000006 taariikhdeedu 8.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wad/r.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuga K. Lamb. 2807 oo ku qoran magaca Axmed Negeeye Abtidon ayna ku jirto Sh.So. 30.400.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho. 8.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 8

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Bug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 398 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 127.329, uu iska lahaa Cali Warsame Hilowle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25631 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuga K. Lamb. 398 oo ku qoran magaca Cali Warsame Hilowle ayna ku jirto Sh.So. 127.329.95

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaam an una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Bo'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho- 8.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 9

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:
HADDUU ARKAY: In Bug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 21504 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 1.496,00 uu iska lahaa Xasan Axmed Rooble sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0028 taariikhdeedu 8.1.84 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaalieed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuga K. Lamb. 21504 oo ku qoran magaca Xasan Axmed Rooble ayna ku jirtoy Sh.So. 1.496,00

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keyd ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Bug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 12309 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo raan lacag dhan Sh.So. 2.322 uu iska lahaa Axmed Macallin Aw Maxamed sida ku cad warqadda la mbarkeedu yahay 0054 taariikhdeedu 10.1.84 ee Ba nkiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuga K. Lamb. 12309 oo ku qoran magaca Axmed Macallin Aw Ma/ed

MAXKAMADDaa GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2167 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 3.416.52 uu iska lahaa Maxamed Axmed Hilowle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0060 taariikhdeedu 11.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 2167 oo ku qoran magaca Maxamed Axmed Hilowle ay na ku jirto Sh.So. 3.416,52

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ku soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faa'iinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga kenin

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 13

MAXKAMADDaa GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In Buug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 20785 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta L. Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 13.560 uu iska lahaa Ciise Cumar Weheliye sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 0059 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 20785 oo ku qoran magaca Ciise Cumar Wehliye ayna ku jirto Sh.So. 13.560

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga as ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 14

MAXKAMADDaa GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In Bug K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 23873 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 11.185 uu iska lahaa Abuukar Calas Faarax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0049 taariikhdeedu 10.1.84 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 23873 oo ku qoran magaca Abuukar Calas Faarax ayna ku jirto Sh.So. 11.185

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka sco wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hotaag laga keenin

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 15

MAXKAMADDaa GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 7081 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 99.246 uu iska lahaa Cabdi Maxamed Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25638 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta laad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 7081 oo ku qoran magaca Cabdi Maxamed Xuseen ayna ku jirto Sh.So. 99.246.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareego muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabauo Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 16

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 73 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo iyo Kedka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 18.730,79 uu iska lahaa Sh. Cali Axmed Muudey sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 25646 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEF

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. [illegible] magaca Sheekh Cali Axmed ayna ku jirto Sh.So. 18.730,79,

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 12.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 17

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 3468 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 4.417,37 uu iska lahaa Maxamed Cabdi Nuur sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25636 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEF

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 3468 oo ku qoran magaca Maxamed Cabdi Nuur ayna ku jirto Sh.So. 4.417,37

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yaran 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 18

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 8346 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 102.111.11 uu iska lahaa Abkoow Sh. Axmed Muudey sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 25666 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEF

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 8346 oo ku qoran magaca Abkoow Sh. Axmed Muudey ayna ku jirto Sh.So. 102.111,11

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Auqdisho, 16.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 19

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo iambarkiisu ahaa 7722 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 170.736.29 uu iska lahaa Maxamed Ibraahim Cismaan sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25845 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad

WUXUU XEERIYEF

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 7722 oo ku qoran magaca Maxamed Ibraahim Cismaan ayna ku jirto Sh.So. 170.736,29

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin,

Auqdisho, 16.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2247 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xaruntа kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 3.014 uu iska lahaa Cali Sh. Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 0016 taariikhdeedu 17.1.84 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xaruntа.

WUXUU KEENAYEE

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 2247 oo ku qoran magaca Cali Sheekh Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 3.014

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xaruntа u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin.

Muqdisho, 17.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 21

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 24124 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 49,764 uu iska lahaa Cabdu laahi Geelle Cilmi sida ku cad warqadda lambark eedu yahay 0041 taariikhdeedu 9.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xa/ta.

WUXUU XEERIYEF

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 24124 oo ku qoran magaca Cabdulaahi Geelle Cilmi ay na ku jirto Sh.So. 49.764

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin,

Muqdisho, 10.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 22

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 578 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 58,284,55 uu iska lahaa Qaasim Cabdi Gaboobe sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25652 taariikhdeedu —— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 578 oo ku qoran magaca Qaasim **Cabdi Gaboobe** ay ku jirto Sh.So. 58,284,55

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed [illegible] Keyd **ee kor ku** t una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wa reegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 11.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 23

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 13933 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 274,786 uu iska lahaa Khaliif Sh. Maxamed Cali sida ku cad warqadda lambark eedu yahay 0086 taariikhdeedu 14.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xar/ta

WUXUU XETRIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 13933 oo ku qoran magaca Khaliif Sh. Maxamed Cali ayna ku jirto Sh.So. 274.786

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga kenin

Muqdisho, 16.1.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 24

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2238/83 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 52.680 uu iska lahaa Aami na X. Hilowle Axmed sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 00139 taariikhdeedu 18.1.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad

WUXUU XETRIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 2238/83 oo ku qoran magaca Aamina X. Hilowle ayna ku jirto Sh.So. 52.680.

WUXUU FASAXAY

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 514116 oo ku qoran Saalax Saalim Saciid ayna ku jirto Sh.So. 40.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii in ta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 19.5.84.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 140

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Buugga Kaydka Lam· 2581, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qorneyd lacag dhan Sh·So· 7·020/= (Toddoba Kun iyo Labaatan Shilin) uuna lahaa Max'ed Nuur Muuse sida ku cad warqadda Taariikhdeedu tahay 19·5·84, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka;

HADDUU ARKAY: Qod·69 Sharciga Lam· 2 ee 9·9·65·

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Kaydka Lam· 2581 kuna qoran Maxamed Nuur Muuse ayna ku jirto Lacag dhan Sh·So· 7·020/= (Toddoba Kun iyo Labaatan Shilin)·

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedesho Maxamed Nuur Muuse Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin·

Marka· 20·5·1984

GUDD· MAX· GOBOLKA SH/HOOSE
(Maxamed Keynaan Warsame)

L· 141

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambar kiisu ahaa 371933 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho ku na qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Ciise Faahiye Samantar sida ku cad warqadda lam barkeedu 005477 taariikhdu 21.5.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 371933 oo ku qoran Ciise Faahiye Samantar ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka karayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 142

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 114 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 4000 uu iska lahaa Maxamed Xa san Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 0000635 taariikhdeedu 22.5.84 ee Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Labaad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuoo Keyd Lam. 114 oo ku qoran magaca Maxamed Xasan Axmed ayna ku jirto Sh.So. 4000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u bedelo B.K. ee Kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii in ta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 22.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 143

DAWLADDA HOOSE EE MUBDISHO
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Boobo Faqay uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 1dii Jen. 1983 uu ku weydiistay Gabal dhul Daw ladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkii suna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1.200/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHII [illegible]DA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga. Dhul Lamb. 84 W.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 51 W.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 63 W. 74 W.

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho. 25 Mag. 1983

L. 144

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG KA DIB:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu ss qortay Jaalle Jaalle Cabdikariim Maxamuud Cilmi oo Taariikhdiisu tahay 22.5.1984 oo uu ku caddeeyey in uu ka Lumay Jeeg Wareega L. 279961 la qoray 13.5.1984 ayna ku qorrayd Lacag dhan Sh. So. 20.000 (Labaatankun) Shilin, uuna ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeedee Laanta Gaalkacyo;

MARKUU ARKAY: Warqadda L. 1708 ee 24.5.1984 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed Laanta Gaalkacyo ayna ku caddeeyeen in uu Jeeggaas ka qaatay;

MARKU UARKAY: Xeer-Sharci L.2 Qod. 69aad soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda Jeegga L. 279961 ee 13.5.1984 ayna ku qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 20.000 (Labaatankun) uuna lahaa Cabdikariim Maxamuud Cilmi.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Ninkaas Jeeg Cusub ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto 15 Maalmood haddii aan cid kale la sheegan, waana in Jeegga Cusug oo la sameyn doono isaga Gacanta laga saaro amase cid wakaalad Sharci ah ka sidata, iyadoo la sugayo muddada 15ka maalmood ah oo aan kor ku soo sheegnay.

Gaalkacyo, 26.5.1984

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 145

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo Lambarkiisu ahaa 405062 lagana soo saaray Banggia Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Qaali Aadan Wacays sida ku cad warqadda lambarkeedu 005615 taariikhdu 24.5.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J.Wareega Lam. 405062 oo ku qoran Qaali Aadan Waceys ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u badalo J.Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.5.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 146

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 493 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeeeed Laanta Wadajir kuna qoran lacag dhan Sh.So. 23.200/= uu iska lahaa Ibraahim Gacal Wardheere sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000127 taariikhdeedu 27.5.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 493 oo ku qoran magaca Ibraahim Gacal Wardheere ayna ku jirto Sh.So. 23,200/=

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir u badalo Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 27.5.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 147

IIB MA GALO

FAAFINTÁ RÁSMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Juunyo 1984 L. 6

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasuaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 Maajo 1984, Oggolaan sho Meel marin Heshiis dhex maray BOG. J.D.S. iyo Bankiga horumarinta Afrika 385

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 20 ee 9 Maajo 1984, Meel marin heshiis am aaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika. »

DECREE N. 20 on 9 May 1984. Instrument of ratification »

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 21 ee 3 Maajo 1984, magacaabid Sarkaal loo wakiishay kharajka Miisaaniyadda Sannadka 1984— » 388

XEER SHARCI L. 4 ee 18 Maajo Dib u ha beynta Sharciga L. 4 ee 13 Abriil 1983, kuna saabsan Joojinta Qaadka » 389

XEER SHARCI L. 5 ee 18 Maajo 1984, Dam biyada Mukhaadaraadka. » 394

XEER SHARCI L. 6 ee 18 Maajo 1984, Baa bi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 396

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 637807 ku qoran Maxamed Cabdi Cab/maan L. 148 » 398

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 22.5.84 Lumid B. K. L. 21551 ku qoran Saciida Weheliye Siyaad L. 152 » 399

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.5.84, Lumid Buug Keyd L. 8671 ku qoran Aasiya Shariif Maki L. 149 » 400

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 30.5.84, Lumid Buug Keyd L. 29181 ku qoran Macallin Axmed Max/med L. 150 » 401

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER 30.5.84 Lumid Jeeg War: L. 21245 ku Cali Ibraahim Maxamuud y51 » 402

SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muq-

SATIONAL BOTTLING COMPANY -S.P.A. Shirkad Saamiley ah — Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 3.600.000,- » 404

HORSEED — S.P.A. Shirkad Saamiley ah Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra' asumaal la wada bixiyey Sh.So.1.000.000 » 405

RUGTA GARGAARKA BEERAHA, Shir kad Saamiley ah. Saldhiggeedu tahay Muqdisho, Ra'ausaal la wada bixiyey Sh.So. 4.000.000, » 406

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONE AGRICOLE — S.I.P.A. Saldhiggeedu ya hay Shalambot J.D.Soomaaliya, Ra'au maalkeeduna yahay Sh.So.8.112.000, » 407

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL — S.S.L. Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaalkeeduna yahay Sh. So— 1.100.000, » 408

INDUSTRIA GARTARIE SOMALE — IN.C.A.S. — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh. So. 45.000.000, » 409

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 20 ee 9 M a a j o 1 9 8 4 Oggolaan-sho meel marin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga

sh Meel marin Heshiis dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika ee lagu daboolayay Kordhisiima da qiimaha Sarrifka qalaad iyo kordhisiimada qeyb ka mid ah Sarrifka gudaha ee Mashruuca Fidinta iyo Ta babarada hannaanka Maamulxa Beeraha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUGUU SOO SAARAYAA Sharciga Soo Socda

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska dhexmaray J.D.S. Iyo Bankiga Horumarinta Afrika ku na saabsan amaah Lacageed oo dhan U.A. 3.200.000 oo loogu tala galay Mashruuca Fidinta Beeraha.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday mgaalada Abdijan ee Dalka Ivory Cost, taariikhdu markay ahayd 24kii Maarso 1983.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan isa goo Lifaaq u ah.—

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiskan ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan. wu xuu leeyahay qiimo iyo astaan sharci la heer ah shar ciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintoo dda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S, waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuudiyadda.

Muqdisho. 9 Maarso 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD

XEER

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 20 taariikh 9 Maajo 1984 meel marin heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika ee lagu daboolayay Kordhisiimada qiimaha Sarrifka qalaad iyo Kordhisiimda qeyb ka mid ah Sarrifka gudaha ee Mashruuca Fidinta iyo Tababarrada HannankA Maa mulka Beeraha.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqradda 5aad iyo qod. 82aad faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 20 taariikh 9.5.84 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.—

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika, he shiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbdiijAn ee Dalka Ivory Cost, taariikhdu markay ahayd 24kii Maarso 1983.—

Qodobka 2aad

Heshiiskaas wuxuu dalka J.D.S. ku yeelanayaa as taan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel marinta.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saara yaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Mag. 1984.—

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DECREE NO. 20 of 18 Maj 1984 Instrifioation.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of Somali Democratic Republic.

Having Seen: The law no 20 of on the 9.5.84 base of which the peole-s Assembly has approved the Agree ment specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement—

HEREBY PROMULGATES

ARTICLE I

The supplementary loan Agreement between the Government of the Simali Democratic Republic and the African Development Fund for financing the increase in the foreingn exchange cost and part of the increase in the local cost of the Agricultural Extension and farm Management Training project, signed in Abidjan on 24th march 1983, is hereby ratified.

ARTICLE II

This Agreement shall have the force of a law in the Territory of Somali Democratio Republic, and it!s implementation will effect upon the exchange of instru ment of Ratification.

ARTICLE III

This Decree shall come into force immediatly and will be published in the Official Bulletin—

Mogadishu, 9 Mag. 1984

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.21 ee 3 Maajo 1984 Magacaabid Sarkcl loo wakiishay kharajka Miisaa niyadda Sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dekreetada sharciga ee soo baxay 29kii Disember 1961 Lr. 2 amarka maamulka Xi saabaadka.

ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20 Maarso 1965 L.13 Xeer nidaaminta & Abaabulidda Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriiray iyo wixii bedelaad gashay

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahan yahay Sar kaal Shaqaalle loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada J.D.S. iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca Agaasimayaasha Guud Xafiis yada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamay Sharcigii Lr. ahaa 1 ee 4.1.68ii, iyadoo uu siinaya Awood Maamulidda qardeysiga ku tala gelidda Kharajka Shaqo socodsiinta iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo kuna saabsan qeredada (Soo hormarin) la sameeyo, Oggolaashada Ruqsadda Dhoofka Safarrada Dibed da iyo gunnadaba.

D E K E R E E T A

Sarkaalka la yiraahdo J/le Maxamed Jaaji Cabdi (Fartaag) Darajo A4.2 Agaasimaha Guud ee Maamul ka Lacagta MJDS, waxaa loo magacaabay Sarkaal wakiileed Kharajka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacag ta MJDS, iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, laga bilaabo 1da Jannaayo 1984.

Dekereetadan waxay dhaqan geleysaa haddatan, islamarkaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.—

Waan Aaragnay ee Diiwaangelinnay.

Diiwaanka L. 1 bog. L. 21;

Muqdisho 5 Maajo 1984;

Hantidhowraha Guud;

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER-SHARCI lambar 4, taariikh 18 Mag. 1984:
Dib u habeynta Sharci lambar 4 ee 13ka Abriil 1983, kuna saabsan joojinta qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 4 ee 14ka Abrii le kuna saabsan joojinta qaadka iyo beddelaadya dii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Duruufaha iyo waayaha lala kulmay muddadii ka soo wareegtay dhaqan galka Sharciga joojinta qaadka;

MARKUU OGAADAY: In soo gelinta qaadka Dalka JDS iyo ganacsigiisa loo adeegsado tabo cusub oo abaabul qalab, hanti iyo dadba leh, ujeeddadoodu na tahay in la wiiqiyo himilada Ummadda iyo Daw ladda Soomaaliyeed ee ka badbaadinta Bulshada dhibaatooyinka dhaqan, dhaqaale, akhlaaq iyo guud ahaan bulshadeed ee qaadku leeyahay;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in dib loogu laabto Sharciga joojinta qaad ka, loona habeeyo qaab looga gudbi karo xakabya da ka soo baxay Sharcigii hore, isla markaasna looga hortegi karo xeeladaha iyo tabaha cusub ee la adeegsado;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah ee dib u habeyntani leedahay, sidaas darteedna ay lagama maarmaan noqotay in lagu soo saaro Xeer-Sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa dib u habeyn lagu sameeyey Sharci lambar 4 soona baxay 13kii Abriilo 1983 kuna saabsan joojin

ta qaadka, waxaana loo beddelay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda:-

Qod. 2aad

Waxaa la xaaraantimeeyey in Dalka JDS qaad la ga soo geliyo, Dalka gudihiisa lagu beero, lagu haysto ama lagu cuno.

Qod. 3aad

Qof kasta oo qaad Dalka dibedda ka soo geliya, ama gacan ka geysta soo gelintiisa, ama ka ganacsada ama dullaal ka noqda ganacsigiisa, waxaa lagu ciqaa bayaa:

— 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali;
— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 100.000 ilaa 200.000 shilin Soomaali, haddii qofku dembiga noocaas ahi horey u galay.

Qod. 4aad

1. Gaadiidka loo isticmaalay soo gelinta qaadka Dalka JDS, ama lagu helo Dalka gudihiisa isagoo sida qaad, waa lala wareegayaa, qaadkana waa la gubayaa.

2. La wareegidda gaadiidka waxaa shardi u ah in Milkiilaha ama qofka uga wakiilka ah gaadiidka uu ula kac ugu soo qaaday qaadka

Qod. 5aad

1. Qof kasta oo guriga uu deggan yahay ama ma suulka ka yahay laga helo qaad ama lagu cuno waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali, haddii ay caddaato inuu ogaa qaad kaas, raallina ka noqday.

2. Qofka guriga deggan waxaa loola jeedaa qofka masuulka ka ah guriga markii dembigu dhacayey, og golaadayna in qaad lagu haysto ama lagu cuno, wuxuu na noqon karaa milkiilaha guriga, kireystaha, ama qof kasta oo si kasta masuul uga ah guriga.

3. Guriga waxaa loola jeedaa hoyga hurdada, mee laha ganacsiga ama meel kasta oo qof ama dad u gaar ah.

Qod. 6aad

1. Waxaa reebban in qaad Dalka gudihiisa lagu beero.

2. Qof kasta oo qaad ku beera Dalka gudihiisa ama kuwii horey ugu beernaa baabi'in waaya, waxaa lagu ciqaabayaa 3 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexeeya 50.000 ilaa 100.000 shilin Soomaali, iyo qaad ka oo la gubo.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo isagoo hays ta ama cunaya qaad, waxaa lagu ciqaabayaa:

— Hal ilaa 5 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 10.000 ilaa 50.000 shilin Soomaali;

— 3 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo ganaax u dhexee ya 30.000 ilaa 100.000, haddii dembiiluhu yahay qof horey loogu xukumay dembi noocaas ah.

Qod. 8aad

Qofka xabsi lagu xukumo dembi qaad dartiis, had dii xukunku yahay kii ugu horreeyey, wuxuu ciqaabta xigga ah ku beddelan karaa mid lacageed, iyadoo ilintiiba loo xisaabinayo 100 (boqol) shilin Soo maali.

Qod. 9aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Shar cigan ee suuragal ka dhiga am afududeeya ama ku kaca fal ah in qaad la soo geliyo Dalka, laga ganacsa do, lagu beero, lagu haysto, lagu cuno ama si kastaba u gaba xilka ka saaran qabashada fal dembiyeedya daas, wuxuu muteysanayaa ciqaabta uu dhigayo qo dobka ku saabsan fal dembiyeedka uu qaban waayey.

Qod. 10aad

Xukunka ku dhaca, dembi qaad dartiis, Shaqaala ha Qaranka ee Reyidka ah iyo kuwa Ciidammada Qa labka Sida, wuxuu xukunsanaha u keenayaa:

— Xiriirka shaqo oo xaq la'aan go'a;
— Xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka oo ka lunta.

Qod.11 aad

1. Lacagaha ka soo xerooda ganaaxyada iyo xabsi beddeleshada, boqolkiiba soddon (30%) waxaa loo bixi nayaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaa sida soo so cota:

— Soo sheegayaasha 10%;
— Soo qabtayaasha 7%;
— Baarayaasha 3%;
— Shaqaalaha Maxkamadda dacwadda qaaday 5%;
— Sanduuqa Horumarinta Degmada 5%;

2. Soo sheegayaasha dembiga waa in qaybtiisa loo hormariyaa, lana siiyaa marka dembiilaha xukunku ku dhaco. Hormariska waxaa bixineysa Wasaaradda Maaliyadda.

3. Kooxaha kale, qaybaha ku soo aada waxay ka qaadanayaan lacagta soo xeroot.

4. Haddii soo-sheege uusan jirin, soo qabtaha ama soo qabtayaasha waxay yeelanayaan boqolkiiba (10%).

Qod. 12aad

1. La dagaallanka iyo dabar goynta qaadka waa waajib saaran Dawladda iyo Dadweynaha Soomaali yeed.

2. Qaranku magdhow ka bixin maayo dhibaatada iyo khasaaraha la soo gudboonaada qofka isku daya ama is hortaaga Ciidan gudanaya waajibaadkiisa shar ciga ah ee ka hortagga iyo gacan ku dhigidda dambi yada qaadka.

Qod. 13aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharci gan ku tilmaaman waxaa awood u leh Maxkamadda

Badbaadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaa dada ee Gobolka.

Qod. 14aad

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjee da ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 15aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah JDS, isla markaana waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XETR-SHARCI Lam. 5 ee 18 Mag. 1984, Dembiyada Mukhaadaraadka:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la ad keeyo ciqaabta u dhigan dembiyada mukhaada raadka;

MARKUU GAROWSADAY: Baahida loo qabo in la dabargooyo waxyaalaha maskaxda dooriya oo ad duunweynuhu u guntaday la dagaallankooda, waa jibna ay tahay in JDS ay qaaddo tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo dabargoyntooda;

MARKUU DHEGAYSTAY: Golah aWasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Xaaladaha Sharcigu bannaynayo marka laga reebo. qof kasta oo sameeya, soo saara ama soo geliya dalka JDS, ama ka ganacsada, ama siiya (somministra) ama u keena qof kale waxyaabaha maskaxda doo riya (mukhaadaraad), waxa lagu ciqaabayaa 10 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 50.000/= oo ganaax ah.

2. Ciqaabta waa la kordhinayaa haddii waxyaaba ha kor ku tilmaaman ee maskaxda dooriya laga iibiyo ama gacanta loo geliyo qof da'diisu ka yar tahay 18 sa no, ama xagga maskaxda wax u dhiman yihiin ama qof ka mid ah dadka mukhaadaraadka isticmaalkiisa caadaystay.

Qod. 2aad

1. Qof kasta ee oggolaada isagoon ka qayb gelin fa lalka ku tilmaaman qodobka hore, in meel caam ah ama khaas ah ay ku kumaan dad ujeeddadoodu tahay in waxyaabaha maskaxda dooriya ay ku cunaan ama ku isticmaalaan, waxaa lagu ciqaabaaa 5 sano oo xarig

2. Qof kasta oo gala meelaha ku tilmaaman faqrad da hore ee qodobkan, si uu waxyaabaha maskaxda dooriya u isticmaalo, waxaa lagu ciqaabayaa 3 sano oo xarig ah iyo So.Shs. 20.000/= oo ganaax ah.

Qod. 3aad

Qaadista dacwadaha ciqaabta ee mukhaadaraadka waxaa lagu wareejiyey awoodda Maxkamadda Bad baadada Dalka iyo Laamaha Maxkamadda Badbaadada ee Gobollada.

Qod. 4aad

Dacwadaha hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah ee aan weli la qaadin iyo kuwa u rahman go'aanka, waxaa lagu soo wareejinayaa Maxkamadda Badbaada da ee deegaan ahaan awoodda u leh.

Qod. 5aad

Xukunsanayaasha dembiyada mukhaadaraadka ee rafcaanlayaasha ah waxay xaq u leeyihiin inay ka tanaasulaan rafcaankooda, haddii aan dacwaddooda xukun ama go'aan loo rahmin, waxayna dhammaysa nayaan ciqaabtii horey loogu xukumay.

Qod. 6aad

Dhanka ciqaabta, eedaysanayaasha u xiran ama loo haysto dembi ka mid ah dembiyada mukhaadaraad ka dhaqan galka Xeer-sharcigan ka hor, waxaa loo raa cayaa ciqaabaha ku tilmaaman Xeerka ciqaabta iyo shuruucda kale ee horey u jirtay.

Qod. 7aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalin ta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana loo gudbi nayaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu rago.

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Sharci lambar 6, taariikh 18 Mag. 1984, Baabi'in ta Wakaaladda Horumarinta Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 5 ee 17ka Dishembar 1980, kuna saabsan dhismaha Wa kaaladda Horumarinta Ganacsiga iyo Faleenka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay habboon tahay in horumarinta tacabka iyo wax soo saarka faleenka iyo ganacsigiisa loo habeeyo iskaashatooyin ka kooban dadka sida tooska ah ugu hawlan tacab kaas;

MARKUU TIGELIYEY: In tallaabadaasi ay keeney so xijileydu in ay ku xirmaan goobaha faleenku ka baxo oo haatan xannaano darro darteed ay muuqa to in ay billaabatay in ay ka soo guriin;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in, si ay aragtidaasu ku dhaqan gasho, la baabi'iyo Wakaaladda horey loogu dhisay horuma rinta iyo ganacsiga faleenka, hantideedana la wa reejiyo;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda degdegga ah ee arrintani leedahay, lagama maadmaanna loo arkay in hirgelinta go'aankan lagu soo saaro Xeer-sharci;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la baabi'iyey Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

Qod. 2aad

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaali yeed.

Qod. 3aad

Xijileyda waxaa loo abaabulayaa qaab iskaasha tooyin oo hoos yimaada Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaa shatooinka Soomaaliyeed.

Qod. 4aad

Waxaa la burriyey Sharciga tirsigiisu yahay 5 ee 17ka Dishember 1980 ee lagu dhisay Wakaaladda Horu marinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

Qod. 5aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynah aJDS, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.-

Muqdisho, 18 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH:—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 637807 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Baydhawo kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50,000 uu iska lahaa Maxa med Cabdi Cabdiraxmaan sida ku cad warqadda lambarkeedu 005428 taariikhdu 19.5.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Baydhawo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9,9,65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb, 637807 oo ku qoran Maxamed Cabdi Cabdiraxmaan ay na ku jirto Sh.So. 50,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Baydhawo u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wa reegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Saafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.5.84.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 151

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 21551 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 66.642 uu iska lahaa Saciida Weheliye Siyaad sida ku cad warqadda lambarkee yahay 01250 taariikhdeedu 21.5.84 ee Bankiga Gana

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 21551 oo ku qoran magaca Saciida Weheliye ayna ku jirto Sh.So. 66.642

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ko horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho, 22.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 152

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 8671 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 56.000 uu iska lahaa Aasiya Shariif Maki sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0353. taariikhdeedu 13.5.84 Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Koowaad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 8671 oo ku qoran magaca Aasiya Shariif Maki ayna ku jirto Sh.So. 56.000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Koowaad u bedelo Buuga Keyd ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho. 14.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 153

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 20181 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliy d laanta Xarunta kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 2088 uu iska lahaa Macallin Axmed Maxamed sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 01332 taariikhdeedu 29.g.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Xarunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 20181 oo ku qoran magaca Macalin Axmed Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 2.088

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin

Muqdisho, 30.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 154

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER BURCO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan J. Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L/Burco Tr. 29.5.84.

HADDUU ARKAY: Qod, 65.DL.9.9.65 Lumid Jeeg war. ee Lam. 21245 kuna qoran tahay Sh.So. 100.000 kuna qoran Cali Ibraahim Maxamed lagana sameeyey Laanta Burco Tr. 11.4.84.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas J/le Cabdulaahi Cumar Jaamac marka ay ka soo wareegto muddo 20 Casho ah laguna Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.—

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega Cusub ee la sameyndoono Gacanta laga saaro J/le Cabdulaahi Cumar Jaamac iyadoo la sugayo Mudada kor ku xusan.

Burco. 30.5.84.

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER
Yuusuf Xasan Cabdi

L. 155

SOMAL FRUIT — S.P.A. Saldhigga: Muqdisho, Ra'asù maalka Sh.So. 1.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda SOMAL FRUIT — S.P.A. wa xaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 9ka subaxni mo, haddii loo baahdo shirka waxaa mar labaad la qa ban doonaa 28ka Luulyo 1984, isla saacadda iyo mee sha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaa to arrimaha soo socda:

ARRIMAHA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaradda iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disem bar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Wax alla wixii kale oo falanqays uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli kara Saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

NATIONAL BOTTLING COMPANY — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho Ra' asumaal la wada bixiyey Sh.So. 3.600.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda NATIONAL BOTTLING COMPANY — S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muqdisho, kuna yaalla Jidka Leenin, saacadda 10ka subax nimo, maalinta 27ka Juunyo 1984, isu imaatinka Koo waad, haddii loo baahdo isu imaatin labaad, waxaa la qaban doonaa 12ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaradda iyo Faa'iidada la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xiriira.

3) Magacaabid Guddiga Maamulka iyo xaddidid tirada xubnaha Guddiga.

4) Magacaabid Guddiga Baarista.

5) Wax alla waxii falanqayn uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, Saamiley da ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

HORSEED — S.P.A. Shirkad Saamiley ah, Saldhiggee du yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 1.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda HORSEED — S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Saldhigga Shirkadda, saacadda 5ta galabnimo ee maalinta 28ka Juunyo 1984, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaaraha iyo Faa'iidada oo la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xiriira.

3) Ansaxidda ku biiridda Guddiga Maamulka OLI VETI Agostino oo beddelay FANTONI Silvano.

4) Beddelid hal Baare Rasmi ah.

Waxaa xaq u leh in ay ka soo qayb galaan Shirka Saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

RUGTA GARGAARKA BEERAHA, Shirkad Saamiley ah, Saldhiggeedu tahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 4.000.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda RUGTA GARGAARKA BEERAHA, S.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, Saldhigga Shirkad da maalinta 28ka Juunyo 1984 marka ay saacaddu ta hay 11ka subaxnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda;

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista ee Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go' aannada la xiriira.

2) Wax allaa waxii kale oo falanqayn u baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, saamileyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono fadhiga.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE S.I.P.A., Saldhiggeedu yahay Shalambot J. D. Soo maaliya, Ra'asumaalkeeduna yahay Sh.So.8.112.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOL) — S.I.P.A. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 12ka subaxnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 28ka Luulyo 1984, isla saacad iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna loo ga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Ansaxidda ku biiridda Guddiga Maamulka OLIVETI Agostino oo beddelay FANTONI Silvano.

3) Wax alla waxii arrimo kale oo falanqayn uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan Saamileyda ku qoran Diiwaanka Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL— S.S.L., Saldhig geedu yahay Muqdisho, Ra'asumaalkeedana ya hay Sh.So. 1.100.000,

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda BEER TACABKA LUUL — S.S.L. waxaa la isugu yeerayaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Muqdisho, maalin ta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 5ta ga labnimo, haddii loo baahdo Shirka waxaa mar labaad la qaban doonaa 28ka Luulyo 1984 isla saacadda iyo meesha kor ku xusan, si looga doodo, go'aanna looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista oo ku saabsan Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31ka Disembar 1983 iyo go'aannada la xiriira.

2) Ansixidda ku biiridda Guddiga Maamulka Oli veti Agostino oo beddelay Fantoni Silvano.

3) Wax alla waxii arrimo kale oo falanqays uu baahdo.

Waxaa Shirka ka soo qayb geli karaan, Saamileyda ku qoran Diiwaanka Saamileyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

INDUSTRIA GARTARIE SOMALE — IN.C.A.S., Shir kad Saamiley ah, Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Ra'asumaal la wada bixiyey Sh.So. 45.000.000.

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Saamileyda Shirkadda INDUSTRIE CARTARIE SOMALE — IN.C.A.S. — S.P.A, waxaa la isugu yeera yaa Shir Caadi ah oo lagu qaban doono Saldhigga Shir kadda ee Muqdisho, maalinta 28ka Juunyo 1984, marka ay saacaddu tahay 10ka subaxnimo; haddii loo baahdo Shirka mar labaad waxaa la qaban doonaa maalinta 28ka Luulyo 1984, isla saacadda iyo meesha kor ku xu san, si looga doodo, go'aanna looga qaato arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA FADHIGA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.

2) Miisaaniyadda iyo Xisaabta Khasaarada iyo Faa'iidada oo la xiray 31.12.1983 iyo go'aannada la xi riira.

3) Wax alla waxii kale oo falanqays uu baahdo.

Waxaa Shirka xaq u leh in ay ka soo qayb galaan Shirkadleyda ku qoran Buugga Shirkadleyda ilaa shan maalmood ka hor maalinta la qaban doono shirka.

GUDDIGA MAAMULKA

IIB MAGALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 19ka Juunyo 1984 L. 1 r 6

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 21 ee 30 Maajo 1984 Oggolaan sho Heshiis dhex maray J.D.S. iyo San duuqa Carbeed ee Horumarinta Dha qaalaha iyo Bulshada.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 22 ee 31 Maajo 1984, Billad Maar ah oo Haw lkarnimo ah lagu maamusay Jaalle ku Geeriyooday Goob Shaqo. » 412

XEER MAD XWEYNAHA J.D.S. L. 23 ee 31 Maajo 1984, meel marin Heshiis Dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Cara ta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo » 413

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

أتصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهوريـــة الدمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى — ٥١٤ — للمساهمة فيتمويل مشروع توسيع محطة كهرباء الجزيرة

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 24 ee Bulshada

1 Juunyo 1984 Isku shaandheynta Golaha Wasiirradda. » 414

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGA RSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE,

7.6.84, Lumdi Jeegag War. 062464 — 062465 ku qoran Maxamed Ciise Dhala Cadde. » 416

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

17.6.84, Lumid Jeeg. War. L. 19355 ku qoran Cabdiwali Maxamuud Sheekh Xuseen L. 156 » 417

QABTA KOOWAAD

S H A R C I

SHARCI lambar 21 taariikh 30 Maajo 1984: Oggolaan sho Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, laguna fulinayo ballaarinta Mashruuca Korontada Jasiira.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shaciga.

WUXUU SOO S ARAYAA: SHARCIGA SOO SOCDA

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiis dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada kuna saabsan Amaah lacag eed oo dhan K.D. 4.800.000 oo loogu tala galay ballaarin ta Mashruuca Korontada Jasiira.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaa lada Abuu—Dabi, taariikhdu markay ahayd 17 Abriil 84.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isa goo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Qodobada Heshiiskan ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah shar ciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha J.D.S. waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo heshiiskan sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 39 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABA D

X E E R

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER L. 22 Bilad Maar ah ooHawlkarnimo ah lagu Maamusay Jaalleyaal ku Geeriyooday Goob shaqo.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65 ee 9ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta.

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraalladii Guddiga Dhe xe ee Gurmadka Mashaariicda Horumarinta Q/nka.

MARKUU TIXGELIYEY: Geeridii ku timid Jaallayaa sha kala ah: Cabdicasiis Maxamed Xasan Cabdi, Dugsiga Sare ee Beeraha Afgooye,Cabdi Faarax Cali Muuse, Dugsiga Sare Beeraha Sablaale, Khad ro Nuur Maxamed Kediye Dugsiga Sare Sh. Cali Jawhar—Borame, iyo Cabdirashiid Bashiir Sh. Cali Dugsiga Sare Beled Weyne, ayagoo gudanaayo waa jibaadkii Gurmadka Mashaariicda Horumarinta Qaranka.

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku naf waayey Difaaca Hawlaha Qaranka, looga reebo raad raac wax ku ool ah.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalma rinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka Keliya

In lagu maamuso min Billad Maar Hawlkarnimo ah, Marxuumiinta ka tirsan Ciidanka G:M.H.Q. oo ku Geeriyooday ayagoo waajibaadkoodi gudanaada.

1. Cabdulcasiis Maxamed Xasan Cabdi, oo ku gee riyooday Weerarkii Diyaaradaha Xabashida ee Borame.

2. Cabdi Faarax Cali Muuse, oo ku geeriyooday Weerarkii Diyaaradaha Xabashida Boorame.

3. Khadro Nuur Maxamed Kadiye oo ku geeriyoo

4. Cabdirashiid Bashiir Sh. Cali oo ku geeriyoo day Shil Baabuur (Gaalkacyo)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madax weynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 31 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 23 taariikh 30 Maajo 1984 meel marin heshiis dhex maray J.D.S. Iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan ballaarinta Mashruuca Korontada Jasiira.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad Faqradda 5aad iyo Qod. 82aad faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 21 taa riikhdu 30.5.84 oo Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyey heshiiska dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaa laha iyo Bulshada, oo lagu kala saxiixday magaalada Abuu—Dabi taariikhdu markay ahayd 17ii Abriile 84, kuna saabsan Amaah lacageed loogu talo galay bal laarinta Mashruuca Korontada Jasiira.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٣٣ بتاريخ ٣٠ - ٦ - ١٩٨٤م
التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع توسيع محطة كهرباء الجزيرة

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على فقرة الخامسة من المادة ٦٧ من الدستور والمادة ٨٢، الفقرة الرابعة من نفس الدستور ..

وعلى القانون رقم ٢١ الصادر فى ٣٠ - ٦ — ١٩٨٤م والذى بموجبه وافقت اللجنة الدائمة لمجلس الشعب على الاتفاقية المبنية أعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر ..

يرسم
بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة في تمويل مشروع توسيع محطة كهرباء الجزيرة والموقع عليها فى مدينة أبو ظبى بتاريخ ١٧ أبريل ١٩٨٤م ..

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية وتكون سارية المفعول ابتداء من تاريخ تبادل وثائق التصديق..

المادة الثالثة

يعمل بهذا المرسوم ابتداء من تاريخ توقيعه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية.

رئيس الجمهورية
- محمد سياد برى —

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS L. 24 taariikh 1da Juun 1984, Isku shaandheynta Golaha Wasiirrada.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobbada 28, faqradda 7aad, 86 iyo 92 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga trisigiisu yahay 14, taariikh 3 Juun 1982. kuna saabsan Nidaamka Dawladda iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la isku shandheeyo Xubnaha Golaha Wasiirrada, lana magacaabo Wasiirro iyo Wasiirro ku xigeenno cusub;

MARKUU DHEGEYSTAY: Tixgeliyeyna go'aanka Gudiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe Xisbiga Hanti wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Laga billaabo 1da Juun 1984, Xildhibaannada soo socda waxaa lagu magacaabay xilka mid kasta maga iisa ku hor qoran:

1. Jaalle S/Guud Maxamed Cali Samatar Madaxweyne Ku-xigeenka 1aad ee JDS, Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga;
2. Jaalle S/Guuto Axmad Suleymaan Cabdalla, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
3. Jaalle G/Sare Axmad Maxamuud Faarax, Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha ;
4. Jaale S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil. Wasiirka Wasaaradda Warshadaha;
5. Jaalle S/Guuto Maxamed Sheekh Cusmaan, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;
6. Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf. Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha;

7. Jaalle G/Sare Maxamed Cumar Jees,
Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha;
8. Jaalle G/Sare Muuse Rabiile Good,
Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga;
9. Jaalle G/Sare Axmad Xasan Muuse,
Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guri yenta.
10. Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre,
Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
11. Jaalle Axmad Xabiib Axmad,
Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba;
12. Jaalle S/Guuto Bile Rafle Guuleed,
Wasiirka Wasaaradda Beeraha;
13. Jaalle Cabdiqaasim Salaad,
Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;
14. Jaalle Maxamed Cali Nuur.
Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
15. Jaalle G/Sare Mire Awaare Jaamac,
Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga;
16. Jaalle Maxamuud Saciid Maxamed,
Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska;
17. Jaalle Cabdullaahi Cosoble Siyaad,
Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta;
18. Jaalle Cabdiraxmaan Cabdulle Cusmaan,
Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta;
19. Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen,
Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare;
20. Jaalle Aadan Maxamel Cali,
Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga;
21. Jaalle Jaamac Gaas Macaawiye,
Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka;

Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranka;

23. Jaalle Yuusuf Xasan Cilmi Shuceyb,
Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka;

24. Jaalle Sheekh Xasan Cabdullaahi Faarax,
Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

25. Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle,
Wasiir Dawladeedka Madaxtooyada ee Arrimaha Bulshada;

26. Jaalle Cabdullaahi Axmed Caddow,
Wasiir Dawladeedka Madaxtooyada ee Arrimaha Dawladda;

27. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame,
Wasiir Dawladeedka Arrimaha Gudaha;

28. Jaalle Maxamed Cali Xaamid,
Wasiir Dawladeedka Arrimaha Dibedda;

29. Jaalle S/Guuto Axmed Sanal Cali,
Wasiir kuxigeenka Koowaad ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

30. Jaalle S/Guuto Aadan Cabdullaahi Nuur,
Wasiir kuxigeenka Labaad ee Wasaaradda Gaashaandhigga;

31. Jaalle Xasan Suudi Xirsi,
ku xigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

32. Jaalle Cabdirashiid Sheekh Axmed,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

33. Jaalle Faaduma Axmed Caalin,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Hiddaha iyo Taciinta Sare;

34. Jaalle Khaliif Muuse Samatar,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha;

35. Jaalle Dr. Maxamed Cali Xasan,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Caafimaadka;

36. Jaalle Inj. Maxamed Nuur Caliyow,

Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Warshadaha;

37. Jaalle Saleemaan Maxamed Aadan,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta;

38. JaalleMaxamed Xaashi Cigaal,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Ganacsiga;

39. Jaalle Maxamed Sheekh Mursal,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

40. Jaalle Shire Suudi Maxamuud,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Kalluumeysiga;

41. Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta;

42. Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Beeraha;

43. Jaalle Cali Saalax Cabdikariim,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Xannaanad aXoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

44. Jaalle Maxamed Yuusuf Axmed,
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga;

45. Jaalle Maxamed Faarax Ciise (Gaashaan);
Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa durbadiiba, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 1da Juun 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Daewadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 19355 lagana soo saaray Bangiga Ganacsgia iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Cabdiwali Maxamuud Sheekh Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu 3328 taariikhdu 17.6.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lam. 19355 oo ku qoran Cabdiwali Maxamuud Sheekh Xusee nayna ku jirto Sh.So. 100.000.

WUXUU FARAAYAA

HAVING SEEN: The Law no 27 of 7-7-84 on the base of which the People's Assembly has approved the Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investiment Bank.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Finance Contract between the Somali Democratic Republic and European Investment Bank, Concluded on 16th Jun 1984 in Luxembourg and Concerning the Afgoy Gas Delineation Project, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic and will implemented on the exchange of ratification instruments.

ARTICLE 3

This Decree shall enter into force upon signature by the President of SDR and shall be published in the Official Bulletin.—

Mogadishu, 7 Lug 1984.—

THE PRESIDENT OF THE SDR
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 28 taariikh 7 Luulyo 1984 meel marin heshiis amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqrada 5aad iyo qod 82aad faqradda 4aad ee Dastuurka.

MAKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 28 taariikh 7.7.84 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku til/man.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka Soo Socda.—

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday meel marinta heshiiska amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga IDA, oo lagu kala saxiixday magaalada Washinton taariikhdu markay ahayd 27.6.84, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Mashruuca Gaaska Afgooye.—

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa marka la is dhaaafsado warqadaha meel marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Lug. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DECREE N. 28 on 7 Jul. 84 Instrument of Ratification

THE PRESIDENT OF THE SDR

HAVING SEEN: Article 67, Paragraph 5 and Article 82, Paragraph 4, of the Constitution of the Somali Democratic Republic —

HAVING SEEN: The la wno 28 of 7.7.84 on the base of which the people's Assembly has approved the Development Credit Agreement between Somali Democratic Republic and International Defelopment Association.—

HAVIN CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement —

HEREBY PROMULGATES

The Following Decree:

ARTICLE 1

The Development Credit Agreement between Somali Democratic Republic and International Development Association, concluded on 27th Jun 1984 in Washington and concerning the Afgoy Gas Delineation Project, is hereby ratified.—

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of law in the Territory of the Somali Democratic Republic and will be implemented on the exchange of ratification instruments.—

ARTICLE 3

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the SDR and shall be Published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 7 Lug 1984.—

THE PRESIDENT OF THE SDR

Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 29 ee 17 Junyo 1984 Magacaabid Ku Sime Xeer Ilaaliye Guud.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D S.
MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsanaa dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhacay —

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Jaalle G/Dhexe Shariif Shiikhuna Maye, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee MBD.

Qod. 2aad

Ku Simaha wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh.So 1.109 (Kun iyo Boqol), Bishiiba, waxaana laga bixinaya Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta WJDS.

Qod 3aad

Dekereetada waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa F'aafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 17 Glu. 1984.—

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
DIIWAANKA LAM. 5 BOG. 148

Muqdisho, 2 Lug. 1984.

HANTI DHOWRAHA GUUD
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J.D S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 30 ee 18 Juunyo 1984

Magacaabid Garsoore (La-Taliye MBD).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsan dhismaha Maxkamad daBadbaadada Dalka, iyo bedelaadii ku dhacday.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Dhamme Cabdi Cilmi Xasan ee ka tirsan Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay inuu Garsoore La-taliye ah ka noqdo Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Xamar.

Qod. 2aad

Garsooruhu wuxuu yeelanayaa gunno dhan Sh.So. 800 Boqol Bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.

Qod 3aad

Dekereetadan waxay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
DIIWAANKA LAM. 5 BOG 140
Muqdisho, 2 Lug. 1984.
HANTI DHOWRAHA GUUD

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 18 Glu 1984.—

MADAXWEYNAHA J.D.S
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIGGA L. 3 ee 4

Juunyo 19844 Magacaabid Kaaliye.—

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida loo magacaabo Kaaliye Sharciyeysan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo Jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee C.Q.S.—

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad xub. 5aad Nidaamka Garsoorka Ciidammada.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

L/A/le X. 4605 Maxamed Maxamuud Axmed waxa loo magacaabay Kaaliyaha Maxkamadda Ciidammada Qalabka Sida ee Qaybta 60aad.

Qod. 2aad

Go'aankani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4.6.84.—

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA JDS.

SARREEYE GUUD

Maxamed Cali Samantar

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cusmaan Sheekh Ma xamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh-du ahayd 5-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar Gees Islaeg Addimihiisuna yihiin 20X20 ku-na fadhiya 400 MDH—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar-ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra-smiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi ka-raa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maa-linta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGA[illegible]IMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 243

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saciid Maxamed Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25.12.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X60 kuna fadhiya 1.200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul lam. 150-130-110-90

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 244

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in JAle Cusmaan Maxamed Hcerow iyo Madiina Calasow Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Max/ed X. Iikar iyo C.C

Galbeed Waxaa ka xiga: W. Shariif Calawi.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 245

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO.

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Sheekh Xasan Nuur uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 23-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rectangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta ugu soo qoro Buga Faafinta sl.arciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 246

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Saciid Maxamed Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 12-1-83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retta ngolare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: DhulLam. 4204-B 4205 B

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983.—

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 247

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO,

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamuud Axmed Shirwac uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Ret tangolare Addimihiisuna yihiin 20X10 kuna fadhiya 200

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buga Faafinta sharciga Rasmiga ah

Muqdisho, 5 Feb. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D. H. EE XAMAR.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan.

L. 248

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faaduma Cabdulaahi Cali maalintii taariikhdu ahayd 10.11.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh.— Looga qaaday dan Guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan sida ku cad warqadda ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan sidaa awgeed naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG.3.23,146 ee 13.2.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu Waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 227 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 223 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 226 B.

Marka, 2.6.84,—

Gudd. Maxkamadda Gobolka Sh. Hoose Marka
Maxamed Keynaan Warsame

L. 250

MAXKAMADDA GOBLKA SH. HOOSE MARKA

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUUU ARKAY: Buugga Keyd Lam. 1236/7 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Q/Yooley, kuna qorneyd Lacag dhan Sh.So. 15,900 ayna lahayd Faaduma Jumcaale Cumar Xasan, sida ku cad warqadda taar. Tahay 24,6,84 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed laanta Q/Yooley. —

HADDUU ARKAY: Qod. shaciga lam. 2 ee 9,9,65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 1236/7 kuna qoran Faaduma Jumcaale Cumar Xasan ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 15,900.—

WUXUU AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley u bedesho Faaduma Jumcaale Cumar Xasan, Buugga Keydka kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mud do aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax is hortaag ah.

Marka 27.6.84.—

Gudd. Maxkamadda G. Sh. Hoose

Maxamed Keynaan Warsame

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 236688 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh So. 30,000 uu iska lahaa Maxamed Abuukar Sh. Xuseen sida ku cad warqadda lam barkeedu 0001730 taariikhdu 21 7 84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci lam. 2 ee 1,9,65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lam. 236688 oo ku qoran Maxamed Abuukar Sh. Xuseen ayna ku jirto Sh.So. 30,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 22.7.84,—

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 251

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu

ahaa 528737 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh So. 50,000 uu iska lahaa Cabdu laahi Cumar Jaamac sida ku cad warqadda lambarkeedu 00560 taariikhdeedu 29.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lam. 528737 oo ku qoran Cabdulaahi Cumar Jaamac ayna ku jirto Sh.So. 50,000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 30.7.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 252

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Jeeg X/S Dhumay oo lambarkii su ahaa 362017 lagana soo saaray Warshadda Snai Biasa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 6.095 uu iska lahaa J/le Yuusuf Weheliye Bulaale sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay WSB 1-30-360/84 Taariikh 5.5.84.—

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharc ga Lam 2 ee 9 9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega X/S Lamb 362017 oo ku qoran magaca Yuusuf Weheliye Bulaale ayna ku jirto Sh.So. 6.095.

WUXUU FARAYAA

In Warshadda SNAI-BIASA Jeega X/S u bedelo J/le Yuusuf Weheliye Bulaale J/X ee kor ku ti'maaman una samceyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareego muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wa is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maaj.

MAXKAMADDA DEG. GOBOLKA BERBERA.

Ku: Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Muqdisho.
Og. Bankiga Ganacsiga iyo K. Soomaaliyeed L. Berbera
Garsooraha Maxkamadda Degmada Berbera.
MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

WUJUU OGAADAY: Waxa ay ku saabsantaha arkay na ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo maaliyeed laanta Berbera taariikhdiisu tahay 24.3.84 wuxuuna ogaaday in ay tahay Shaqadiisa.
HADDUI ARKAY: Qod. 69 D.L. 9,9,65 n, 2

WuxuuCadaynayaa Lumidda Jeega War. Lam. ya hay 583693 ee 10.3.84 kuna qoran tahay lacag dhan ShSo 32.800 Soomaali ah iskana lahaa Shariif Batuun Max'd.
Wuxuu Amrayaa in loo sameeyo Jeeg War. ee cus ub Ninka kor ku magacaaban 15 maalmood ka dib mar kii amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee da wladda.—

Waxaa la Codsanayaa In Jeega Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Shariif Batuun Maxamed ama qof isaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la su gaayo 15 maalmood ee kor ku qoran.

Berbera. 28.7.84

Carab Maxamed Cadow
Kaaliyaha Maxkadda Deg. Gobol
Garsooraha Maxkamadda Deg Gobolka Berbera.

— ggg —

Maxamed Axmed Wardheere

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDD. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 477552 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xaruntaa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Khadiija Cismaan Canshuur sida ku cad warqadda lambarkeedu 0001750 taariikhdeedu 23.7.84 ee Bankiga Gancsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lam 477552 oo ku qoran Khadiija Cismaan Canshuur ayna ku jirto Sh.So. 20.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.7.84

GUDD. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA BOB. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/LAMBAR 1-84 Taariikh 3.4,84

Cusbooneysiin Jeeg lumay Lambar 376579 ee taariikhdiisu tahay 3.3.84 lacagtiisuna dhan tahay 20,000 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa, kuna qoran Xuseen Maxamed Maxamuud.
Gudd. Maxkamadda Gobolka W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga Dalabka ku taariikhaysan 24kii Maarso 1984 ee uu soo qoray Xuseen Maxamed **Maxamuud, kuna aabsan in loo cusboonaysii** yo Jeega War. ee lambarkiisu ujeedada ku qoran tahay, lacagtiisuna anayd 20,000 oo kaliya.

MARKUU ARKAY: Cadaynta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa, lambarkeeduyahay 448 ee taariikhdeedu tahay 26-3,84, ee lagu Cadeeyey in taariikhdu markay ahayd 3-3,84, Xuseen Maxamed Maxamuud loo sameeyey Jeega War. ee sare ku qoran,

MARKUU Eegay Qodobada 69-70 ee Xeer lambar 2 soo na baxay 9,9,65

WUXUU: Go'aamiyey in la kansal gareeyo Jeega War. ee lambarkiisu yahay 376579 lacagtiisuna tahay 20,000 Gacantana laga saaro Xuseen Maxamed Maxamuud ama ciddii kale oo uu siiyo Wakaalad Rasmi ah 15 maalmood ka dib maalinta Go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J,D,S,

WAXAA LA FARAYAA MAAMULKA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa inuu ku dhejiyo Iridka Bankiga Nuqulada Go'aankan si ciddii dan ka lehi ay halkaas uga Eegato muddo 15 maalmood ah.—

Hargeysa, 2-4.84
Maxamuud Jaamac Cigaal
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa
Gudd. Maxkamadda Gobolka W/Galbeed ee Hargeysa
Ibraahim Faarax Maxamed

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisno 20ka Agoosto 1984 L. 1 r 8

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. kalkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 31 Luulyo 1984, Billad Maar oo Waddaninimo ah lagu Maamuusay J.L. Dhaqane Xaashi Nuur. BOG. 595

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 32 ee 29 Luulyo 1984, Xeer Nidaamiyaha Kulliyadda Culuunta Siyaasadda. » 556

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO 4.784 Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Nuur L. 259 » 612

DAWLADA HOOSE EE MUQDISHO, 4.7.84
Naado Dhul J/le Mire Awaare Jaamac
L. 260 » 613

DAWLADA HOOSE EE MUQDSHO, 29.7.84
Naado Dhul Jaalle Indhadeeq Cali
Maxamed L. 261 » 614

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.8.84,
Lumid Jeeg War. L. 51948 ku qoran
Cabdi Cusmaan Saciid L. 262 » 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Lumid Jeeg War. L. 573050 ku qoran
Xasan Saalax Ismaaciil L. 263 » 616

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Lumid Jeeg War. L. 573060 ku qoran
Xuseen Saalax Ismaaciil L. 264 » 617

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.8.84
Lumid Jeeg War. L. 319160 ku qoran
Cali Xaaji Faqoow L. 265 » 618

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 31.7.84,
Lumid Jeeg War. L. 405612 ku qoran
L. 266 » 619

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.8.84
Lumid Buug Kayd L. 7916 ku qoran
Shukri Raabi Aadan L. 267 » 620

Faafinta Rasmiga ah L. 1 r 7 19 Luulyo 1984. Bog. 505, magaca ku qoran Go'aanka waa in loo akhriyaa sida Hoos ku tilmaaman.

Maxamed Aadan Yuusuf

TIRTIRID NAADO DHUL

FAAFINTA RASMIGA AH L. 2 r 7 ee 31 Luulyo 1984. Bog. 549 ilaa 551, oo ay ku qoran yahiin Naado Dhul waa la tirtiray.—

QAYBTA KOWAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 31 Luulyo 1984, Billad Maar oo Waddaninimo ah lagu Maamuusay Jaalle Dhaqane Xaashi Nuur.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ... Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 6... ...9ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY: Codsiga ... ...oo qortay Jaalle Dhaqane;

MARKUU TIXGELIYAY: Hawlaha aad qiimaha ugu fadhiya Kacaaka uu muujiyey Jaalle Dhaqane Xaashi Nuur;

MARKUU AQOONSADAY: Inay lagamamaarmaan tahay in dadka ku shaqeeya Waddaninimo, kana qayb qaata difaaca dalka isagoo muujiyey niyadsami, Kacaannimo, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar Waddaninimo ah Jaalle Dhaqane Xaashi Nuur ahna halgamaa weyn hawl aad u qiimo leh u qabtay dalka.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha JDS, soo saxiixo.

Muqdisho, 31 Lug. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 32 taariikh 29 Luuyo 1984 Xeer Nidaamiyaha Kulliyadda Culuunta Siyaasadda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 48 ee 22.7.82;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in loo dejiyo Xeer-nidaamiye Sharciga lagu dhisay Kulliyadda Culuunta Siyaasadda;

MARKUU ARKAY: Talo soo jeedinta Golaha Dhexe XHKS;

MARKUU TIXGELIYAY: Talada Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-nidaamiyaha soo socda:

QEYBTA KOOWAAD

FASIRAAD

Qodobka 1aad

FAAHFAAHIN

Haddii aan si kale loogu macnayn Xeer-nidaamiyahan, erayada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida mid kasta ku hor qoran:-

XISBIGA: Xisbiga Hanti-wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

JAAMACADDA: Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed;

W A A X: Waxay la meel joogtaa marka la eego qaabka Jaamacadda Qeyb;

Q E Y B: Waxay la meel joogtaa marka la eego qaabka Jaamacadda Waax;

Ummadda Soomaaliyeed; lambar 72 ee 7da Sitembar 1977;

XEERKA JAAMACADDA: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 93 ee 7da Sitembar 1977;

QEYBTA LABAAD

XARUNTA ASTAANTA IYO ILAALINTA GUUD EE KULLIYADDA

Qodobka 2aad

XARUNTA KULLIYADDA

1. Xarunta Kulliyaddu waxay ahaan doontaa Muqdisho.

2. Kulliyaddu waxay ku lahaan kartaa Macaahid iyo dugsiyo meel kasta oo dalka ka mid ah, marka la dareemo in baahi loo qabo, awoodduna u oggolaato.

Qodobka 3aad

ASTAANTA IYO AFKA WAXBARASHO EE KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelanaysaa astaan caan ah oo loo ekeysiinayo sida uu gooyo Guddiga Kulliyaddu.

2. Afka rasmiga ee Waxbarashada Kulliyaddu waa afka Soomaaliga.

Qodobka 4aad

ILAALINTA GUUD EE KULLIYADDA

1. Ilaalinta Guud ee Kulliyadda waxaa yeelanaya Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS.

2. Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS wuxuu u wakiilan karaa xilka ka saaran Kulliyadda Culuunta Siyaasadda Hoggaanka Golaha Dhexe

Qodobka 5aad

MAAMULKA IYO WAXBARASHADA KULLIYADDA

1. Iyadoo wax loo dhimeyn tilmaamaha qodobka 4aad, waxbarashada Kulliyaddu waxay hoos imaaneysaa Jaamacadda.

2. Maamulka kale sida: hoyga, quudka iyo iwm wuxuu hoos imaanayaa Xisbiga.

QEYBTA SADDEXAAD

XUBNAHA KULLIYADDA

Qodobka 6aad

BUXNAHA KULLIYADDA

Dhismaha Guud ee Kulliyaddu wuxuu noqonayaa qaabka hoos ku qoran:-

b) Guddiga Kulliyadda;
t) Hormuud;
j) Hormuud ku-xigeen;
x) Waax;
kh) Qeyb.

Qodobka 7aad

GUDDIGA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban:-

b) Hormuudka Kulliyadda — Guddoomiye
t) Hormuud ku-xigeenka — X u b i n
j) Madaxda Waaxyaha »
x) Madaxda Qeybaha »
kh) Labo xubnood oo ka tirsan Shaqaalaha Waxbarashada oo sanad walba la soo doorto.
d) Kaaliyaha Diiwaan-hayaha oo Xoghaya ka ah shirka oo aan cod ku lahayn.

r) Kaaliyaha Buug Xannaaneeyaha.

s) Arday ka wakiil ah Guddiga ardayda Kulliyadda.

sh) Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Kulliyadda.

2. Haddii uu Hormuudku shirka ka maqnaado waxaa beddelaya Hormuud ku-xigeenka.
3. Haddii uu shirka ka maqnaado Kaaliyaha Diiwaanhayaha waxaa hawshiisa fulinaya Buug Xannaaneeyaha.

Qodobka 8aad

XILKA GUDDIGA KULLIYADDA

Xilka Guddiga Kulliyaddu waa:-

1. Fulinta siyaasadda Waxbarashada Kulliyadda iyo go'aannada Xisbiga iyo Dawladda.
2. Inuu qorsheeyo, soona diyaariyo qorshaha deeq waxbarasho iyo siminaarrada Macallimiinta Kulliyadda.
3. Inuu soo qorsheeyo Miisaaniyadda Kulliyadda ee sannadka.
4. Inuu dhiiri-geliyo horumarinta hawlaha cilmi baarista sida: buug-dejinta, tarjumidda, sahan cilmiyeedka, kharajyada looga baahan yahayna ku talo galo.
5. Inuu ka doodo, falanqeeyo wax ka beddelidda iyo wax ku daridda barnaamijka guud ee waxbarashada.

Qodobka 9aad

HORMUUDKA KULLIYADDA

1. Hormuudka Kulliyadda waxaa magacaaba, casila Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeystay talada Golaha Hoggaamada iyo soo jeedinta Hoggaanka

u xil saaran iyo Rektarka Jaamacadda.

2. Qofka jagadaas loo xil saarayo waa in laga xulaa Barfasoorrada, Barayaasha Sare iyo Barayaasha Kulliyadda, wuxuuna xilka haynayaa muddo labo sano ah oo loo cusbooneyn karo.

Qodobka 10aad

CASILAADDA HORMUUDKA

Hormuudka Kulliyadda waxaa laga qaadi karaa Xafiiskiisa haddii ay dhacaan arrimaha soo socda:-

a) Ku dhaqan xumo Xafiiseed;

b) Maxkamadda oo ku caddeysay jariimad uu galay;

c) Xilkiisa oo uu ka soo bixi waayo;

d) Dhimmirkiisa oo wax u dhimmaan, guddi takhaatiir ah oo arrimahaas ku shaqo lehna sidaas caddeeyo.

Qodobka 11aad

HAWLAHA HORMUUDKA KULLIYADDA

1. Hormuudka Kulliyadda oo mas'uul uga ah arrimaha Kulliyadda xag tacliimeed iyo xag maamul, Rektarka Jaamacadda iyo Hoggaanka u xil saaran ee Golaha Dhexe XHKS, waxay hawshiisu tahay, fulinta siyaasadda waxbarashada iyo siyaasadihii kale ee loo dejiyo Kulliyadda.

2. Hawshiisu waa kuwa ku tilmaaman qodobka 27aad ee Sharciga Jaamacadda.

3. Wuxuu Kulliyadda u masalaa isagoo mar kasta oggolaansho ka haysta Hoggaanka u xil-saaran ee Golaha Dhexe XHKS iyo Rektarka Jaamacadda arrimaha la xiriira heshiisyada Kulliyaddu dhinac ka tahay.

Qodobka 12aad

HORMUUD KU-XIGEENKA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay yeelaneysaa Hormuud Ku-xigeen, waxaana magacaaba Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeysta talada Golaha Hoggaamada iyo soo jeedinta Rektarka Jaamacadda iyo Hormuudka Kulliyadda.

2. Qofka loo magacaabayo xilkaas waa inuu leeyahay aqoon sare iyo waaya-aragnimo maamul.

Qodobka 13aad

KU-SIME HORMUUD

Haddii ay Hormuudka Kulliyadda ay la soo gudboonaato maqnaasho gaaban ama sabab kaloo iska hor-taagto hawshiisa caadiga ah, waxaa xilkiisa fulinaya Hormuud Ku-xigeenka.

Qodobka 14aad

MADAXDA WAAXYAHA IYO QEYBAHA

1. Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee waxbaridda waxaa magacaabaya Rektarka Jaamacadda oo dhegeystay ra'yiga Guddiga Kulliyadda.

2. Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee Maamulka waxaa magacaabaya Guddiga Qaabka, iyo Meeleynta ee Golaha Dhexe XHKS oo dhegeystay Ra'yiga Hoggaanka u xil-saaran ee Golaha Dhexe XHKS.

3. Dhammaan Waaxyaha Kulliyadda waxaa ka mas'uul noqonaya xubno ka mid ah Macallimiinta Kulliyadda.

QEYBTA AFARAAD

QAADASHADA ARDAYDA CUSUB EE KULLIYADDA

Qodobka 15aad

HABKA QAADASHADA ARDAYDA

1. Soo gelitaanka Kulliyadda waxaa soo qorsheeya, soona abaabula Guddiga Siyaasadda, isagoo dhegeystay talada Golaha Hoggaamada.

2. Dokumintiga ardayda cusub waa in la gaarsiiyaa bil ka hor bilawga sanad tacliimeedka diiwaanhayaha Guud ee Jaamacadda.

Qodobka 16aad

SHURUUDAHA GELIDDA KULLIYADDA

Shuruudaha gelidda Kulliyadda waa sida hoos ku qoran:-

1. Haysasho Shahaado Dugsi Sare ama mid u dhiganta;

2. Inuu yahay Soomaali;
3. Inuu yahay Xubin Xisbi ama Xubin Ururro Bulsho;

4. Inuu halgan taxana ah oo shan sano ka soo waday Xisbiga, Dawladda ama Ururrada Bulshada;
5. Inuusan ka yarayn labaatan sano;
6. Inuu caafimaad qabo, lixaadkiisuna dhan yahay;
7. Inuu heysto warqadda dhalashada iyo midda sugnaanta.

Qodobka 17aad

KA CAFIN SHURUUDAHA SOO GELIDDA KULLIYADDA

1. Kulliyaddu waxay qaadan kartaa arday shisheeye oo marnaba tiradoodu ka badnaan karin shan meelood meel tirada ardayda sanadkaas Kulliyadda loo qaadanayo.

2. Ardayda Shisheeyaha ah waa laga cafin karaa shuruudaha ku tilmaaman qodobka 17aad, marka laga reebo shahaadada dugsiga sare ama mid u dhiganta.

Qodobka 18aad

REEBBANAASHO BEDDAALASHO KULLIYADEED

Ardayga Kulliyadda waa ka reebban tahay inuu u beddesho Kulliyad kale.

Qodobka 19aad

SABABAHA XEENI KARA JIITANKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

Ardayna iskiis uma goyn karo waxbarashada Kulliyadda haddii ayna dhicin sababaha soo socda:-

b) Ka saarid xubinnimada Xisbiga iyo Urur Bulsho;

t) Jirro uu caddeeyo guddi dhakhaatiir ah oo waxbarashadiisa inuu sii wato umasaabaxayn.

j) Dhibaato qoys oo u suurto-gelineyn inuu sii wato waxbarashadiisa. Guddiga Kulliyadduna hubsaday, kana garaabay;

x) Wixii sababo lama filaan ah oo culayskooda loo arko inay joojin karaan waxbarashadiisa;

kh) Go'aanka ka joojinta waxbarashada ee xarfaha kor ku xusan waxaa wadajir u leh Hoggaanka Golaha Dhexe XHKS wakiishay iyo Rektarka Jaamacadda, go'aankuna waa kama dambeys.

QEYBTA SHANAAD
HABKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

Qodobka 20aad

HABKA WAXBARASHADA KULLIYADDA

1. Wixii ku saabsan sanad-tacliimeedka, habka imtixaanka, raacidda casharrada ee Kulliyadda waxaa lagu dhaqayaa sida ku tilmaaman qaybta shanaad ee Sharciga Jaamacadda.

2. Sidoo kale waxay qiimeynta shahaadada iyo sida loo maamulo ma-gudbayaasha imtixaanaadka kala mid tahay Kulliyadaha kale ee Jaamacadda.

Qodobka 21aad

IMTIXAANKA HORDHACA QALIN-JEBINTA

1. Kulliyadda waxaa u sii jiraya imtixaanka hordhaca ah qalin-jebinta (Preluarea) ilaa barnaamijka Waxbarashada dib loogu habeeyo, lana arko inaan loo baahnayn sii jiritaanka imtixaankaas.

2. Ardaygii aan gudbin imtixaanka hordhaca qalin-jebinta uma fariisan karo doodda qalin-jebinta.

3. Ardaygii ku dhaca doodda qalin-jebinta, Guddiga Kulliyadda ayaa u qabanaya muddo aan saddex bilood ka yarayn, kana badnayn lix bilood.

4. Ardaygii ku dhaca hordhaca qalin-jebinta (Preloureà) hal maaddo, waxaa la siinayaa muddo aan ka badnayn bil inuu ku soo diyaariyo maaddadaas.

5. Ardaygii labo maaddo ku dhaca imtixaanka hordhaca qalin-jebinta waxaa loo qabanayaa muddo dambe, ugu yaraan saddex bilood, ugu badnaanna xilliga kaas ku xiga dhammaadkiisa. Haddii marka dambe u suuro-gelin waydo inuu gudbo, wuxuu

dib ugu noqonayaa sanadka waxbarashada oo kaas ku xiga.

6. Haddii sanadka loo oggolaaday ardaygu ka faa'iideysan waayo inuu kaga gudbo imtixaankaas, waa laga joojinayaa waxbarashada Kulliyadda.

QEYBTA LIXAAD

ASLUUBTA ARDADA IYO SHAQAALAHA KULLIYADA

Qodobka 22aad

GUDDIGA ASLUUBTA EE KULLIYADDA

Ardada Kulliyadda waxaa tallaabo asluubeed ka qaadi kara Guddiga Kulliyadda oo noqonaya Guddiga Asluubta.

Qodobka 23aad

AWOODDA GUDDIGA ASLUUBTA EE KULLIYADDA

Guddiga Asluubta ee Kulliyaddu wuxuu ardada ka qaadi karaa tillaabooyinka asluubeed ee hoos ku qoran:-

b) Canaan qoraal ah;

t) Digniin qoraal ah;

j) Ka joojin waxbarashada Kulliyadda muddo aan ka badnayn xilli;

x) Magdhaw waxyeellada ardaygu u geysto hantida Kulliyadda;

kh) Ka joojin imtixaanka xilliga;

d) Ka joojin waxbarashada Kulliyadda muddo aan ka badnayn sanad tacliimeedka;

r) Ka raacdayn Kulliyadda.

Go'aankaas waxaa Rafcaan looga qaadan karaa Qaabka ku tilmaaman Xeerka Jaamacadda Guddiga Sare ee Maamulka Kulliyadda.

Qodobka 24aad

FALAAD-XUMIDA IYO CIQAABAHA

Guddiga Kulliyaddu wuxuu ciqaabaha ku xusan qodobka 23aad ee xeerka ugu qaadayaa ardayga sida hoos ku qoran, haddaan falaad-xumadiisu keenayn dembi ka culus:-

1. Ciqaabaha ku sheegan (b) iyo (t) ee qodobka 23aad, waxaa lagu qaadi karaa ardaygii:-

i) Casharrada ka maqnaada laba saac oo xiriir ah, sababa waafi ahna keeni waaya;

ii) Ka qeyb geli waaya hawlaha tacliinta la xiriira iyo kuwa kale ee Kulliyaddu qaban-qaabiso, lagana doonayo inuu ka qeyb qaato;

iii) Saacadaha cashar-qaadashada haddii uu soo qaato dhar aan ahayn kii Kulliyadda.

2. Ciqaabta ku sheegan xarafka (j) ee qodobka 23aad, waxaa lagu qaadi:-

b) Ardaygii muujiya caajisnimo cad;

t) Ku marti geliya Kulliyadda dad aan joogitaankooda oggoleyn Xeerka Kulliyadda iyo Jaamacadda u degsan;

j) Wareejiya, lumiya ama halleeya xaashiyaha rasmiga ah ee Kulliyadda ama Jaamacadda, isagoo lagu aaminay, ama si kale ku soo gaareen;

x) Abaabula, hoggaamiya ama ka qeyb gala dhaqdhaqaaq waxyeellaynaya nolosha tacliinta, ama tan bulshada ee Kulliyadda ama Jaamacadda oo dhan;

kh) Geli waaya imtixaanka isagoo keenin sabab waafi ah.

3. Magdhawga hantida Kulliyadda waxyeellada loo geysto waxaa la warsanayaa arday kasta oo dhibaato gaarsiiya qalab ka mid ah hantida Kulliyadda.

4. Ciqaabta ku sheegan xarafka (kh) ee qodobka 23aad waxaa lagu xukumi karaa ardaygii:-

i) Ka sco bixi waaya shuruudaha waxbarashada ee loo qarriray;

ii) Xada, qiyaana ama ku hela si aan sharci ahayn warqadaha imtixaanka.

5. Ciqaabta ku sheegan xarafka (d) ee qodobka 23aad, ee Xeerkan waxaa lagu qaadi karaa:-

i) Ardaygii ku gala imtixaanka magac aan ahayn kan ku sajilan imtixaanka;

ii) Dib u gala dambiyada ku sheegan xarafaha b, t, j, x, ee qodobka 23aad ee Xeerkan.

6. Ciqaabta ku sheegan xarafka (r) ee qodobka 23aad ee Xeerkan waxaa lagu qaadi karaa ardaygii:-

b) Maxkamadi go'aan kama dambeys ah ka gaarto jariimada uu galay awgeed, ciqaabteeduna ka yarayn saddex sano oo xarig ah;

t) Ku kaca fal ama falal Guddigu u aqoonsado inuu yahay fawaaxish (Scandal);

j) Ku kaca arrimo ka soo horjeeda ujeeddooyinka iyo himilooyinka Kulliyadda, si suganna loogu soo caddeeyo.

7. Ardaygii ku kaca fal ama falal Guddiga ugu muuqata inay yihiin dembiyo aan Xeerkani xusayn ama nidaam hoose u goyn ciqaab, waxaa lagu qaadi karaa ciqaabaadkii kale oo Guddiga ugula muuqato inay ku qalmaan dembiga ardaygu galay.

QEYBTA TODDOBAAD
HAWL-WADEENNADA KULLIYADDA

Qodobka 25aad

HAWL-HADEENNADA KULLIYADDA

Hawl-wadeennada Kulliyadda waxay ka kooban yihiin hawl-wadeennada waxbarashada, kuwa cilmi-baarista, hawl-wadeennada maamulka iyo dhammaan dadka kale ee hawlo joogto ah ka haya Kulliyadda.

Qodobka 26aad

MAGACAABIDDA HAWL-WADEENNADA MAAMUL-KA IYO WAXBARIDDA KULLIYADDA

Magacaabidda hawl-wadeennada Maamulka iyo kuwa waxbaridda ee Kulliyadda waxaa loo maamayaa habka u degsan Xisbiga iyo Jaamacadda.

Qodobka 27aad

MUSHAARKA IYO GUNNOOYINKA HAWL-WADEE-NNADA KULLIYADDA

1. Mushaarka iyo gunnooyinka hawl-wadeennada waxbaridda waxay waafaqsan yihiin Xeerka iyo Nidaamka u degsan Jaamacadda Ummadda.

2. Mushaarka iyo gunnooyinka hawl-wadeennada kale ee Kulliyadda waxay la mid yihiin hawl-wadeennada Xisbiga.

3. Hormuudka, Hormuud Ku-xigeenka, Madaxda Waaxyaha iyo Qeybaha ee Kulliyaddu waxay leeyihiin gunno xil ku siin (Monthly post allowance) bishiiba oo u dheer mushaarooyinka iyo gunnooyinka ay ku qaadan jireen jagooyinka waxbaridda ee ay ka shaqayn jireen magacaabidda ka hore.

4. Gunnooyinka ku xusan lambarka hore ee qodobkan waxay la mid yihiin kuwa Kulliyadaha kale ee Jaamacadda, waxayna ku cad yihiin Xeerka Jaamacadda.

Qodobka 28aad

SHAQAALAHA WAXBARIDDA

Hawl-wadeennada waxbaridda ee Kulliyadda waxaa loo yaqaan xubnaha soo socda:-

1. Hormuud;
2. Hormuud Ku-xigeen;
3. Madaxda Waaxyaha;
4. Madaxda Qeybaha (soo maray Macallinimada);
5. Macallimiinta casharrada ka bixi sa Kulliyadda;
6. C'd kasta oo loo xil-saaro hawlo cilmi-baaris;
7. Qof kasta oo loo dhiibo jago oo Guddiga Waxbaradu u aqoonsan yahay jago waxbarid (Academic Post).

Qodobka 29aad

JAGOOYINKA SHAQAALAHA WAXBAIIDDA

1. Jagooyinka hawl-wadeennada waxbaridda ee Kulliyaddu waxay noqonayaan sida soo socota:-
   a) Borofeesor (Profeesor)
   b) Bare Sare (Senior Lecturer)
   c) Bare (Lecturer)
   d) Bare Kaaliye (Assistanta Lealurer).
2. Shuruudaha magacaabidda, u beddelashada jago iyo dallacsiinta hawl-wadeennada waxbaridda oo ku xusan xubinta sare ee qodobkan waxaa la waafajinayaa Sharciga Jaamacadda Ummadda.

Qodobka 30aad

XULKA HAWL-WADEENNADA KULLIYADDA

Qofka loo qaadanayo, lagu wareejinayo ama loo

dallacsiinayo inuu macaamin ka noqdo Kulliyadda:-

b) Waa inuu haysataa shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;

t) Waa inuu oofiyaa shuruudaha waaya-aragnimo iyo kuwa kale oo looga baahdo sida ku cad sharciga Jaamacadda Ummadda.

Qodobka 31aad

MAGACAABIDDA, DALLACSIINTA SHAQAALAHA KULLIYADDA

1. Shaqaalaha waxbaridda magacaabiddooda, dallacsiintooda waxaa iska leh Rektarka Jaamacadda Ummadda, isagoo ka talo qaadanaya Hoggaanka Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS u wakiishay.

2. Magacaabidda iyo dallacsiinta shaqaalaha kale ee Kulliyadda waxaa iska leh Xisbiga.

3. Xisbigu wuxuu awood u leeyahay isagoo mar kasta tixgelinaya talada Rektarka Jaamacadda in qof ka mid ah Shaqaalaha waxbaridda ee Kulliyadda uu u magacaabo xil kale, hase yeeshee markii uu dib ugu soo laabto hawshiisi Kulliyaddu wuxuu kala qabsanayaa halkii uu kaga tegay.

Qodobka 32aad

ASLUUBTA SHAQAALAHA KULLIYADDA

1. Gefka ay galaan shaqaalaha waxbaridda ee Kulliyadda waxaa tallaabo ka qaadiddooda iska leh Rektarka Jaamacadda iyo Hoggaanka Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe XHKS u wakiishay.
2. Shaqaalaha kale waxaa tallaabo ka qaadiddooda iska leh Xisbiga oo dhegeystay ra'yiga Hormuudka Kulliyadda.

QEYBTA SIDDEEDAAD

MAALIYADDA KULLIYADDA

Qodobka 33aad

MIISAANIYADDA KULLIYADDA

Kulliyaddu waxay yeelaneysaa Miisaaniyad u gaar ah oo hoos timaadda maamulkeeda sanadkiiba. Miisaaniyadda waxaa soo diyaariya Guddiga Kulliyadda, waxaana oggolaada Guddiga Syaasadda, isagoo dhegeystay Golaha Hoggaamada.

Qodobka 34aad

ILAHA MAALIYADDA KULLIYADDA

Kulliyadda waxaa maaliyaddu ka soo geli kartaa:-

b) Miisaaniyad Xisbigu sanad walba u jaan-gooyo;
t) Deeq Jaamacadda Ummaddu u fidiso;
j) Deeq Xisbi kale, dawlad, wakaalado, Jaamacado iyo Machadyo ajnabi ah u fidiyaan, taasoo ku xirneyn shuruud.

QEYBTASAGAALAAD

QODOBBO KAMA DAMBEYS AH

Qodobka 35aad

ARRIMAHA WAXBARASHADA EE KULLIYADDA

Arrimaha waxbarasho oo aan si cad ugu xusnayn

Qodobka 36aad

DHAQAN — GAL

Xeer Nidaamiyahan waxaa lagu nidaaminayaa Sharciga iyo Xeerka Jaamacadda Ummadda.

Xeer Nidaamiyahani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Lug. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S,

NAADO DHUL

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Nuur Guuleed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 16-5-84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg #1/Wadajir Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimhiisuna yihiin 30X10 kuna fadhiya 300 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad
Koonfur Waxaa ka xiga: Dugsi

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad

Bari Waxaa ka xiga: Dhulkiisii Hore

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 4- Luulyo 1984—

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA EE D/HOOSE
Jeom- Maxamed Cabdi Cismaan

L- 259

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Mire Awaare Jaamac uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 9.4.84 uu kuweydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisu yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 30X30 kuna fadh'ya 900 M.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqsha ka dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 4. Luulyo 1984.—

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamed Cabdi Cismaan

L. 260

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Indhadeeq Cali Maxamed iyo Luul Maxamed Bare uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 19.3.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Jid ka Xamar Afgooye Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimmiisuna yihiin 170X150 kuna fadhiya 25,500 MDH.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Cabdulqadir M. Nuur

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 4. Luulyo 1984.—

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamed Cabdi Cismaan

L. 261

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. dhumay co lambarkiisu ahaa 51948 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= iskalahaa Jaalle Cabdi Cusmaan Saciid sida ku cad warqadda lambarkeedu 333 taariikhdeedu 14.8.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiiglay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XE)RIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega lam. 51948 oo ku qoran Jaalle Cabdi Cusmaan Saciid ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangig Ganacsiga iyo Keydka Laanta Wardhiiglay u badalo Cabdi Cusmaan Siciid Jeeg War. co kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.8.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 573050 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 20.000/= uu iska lahaa Xasan Saalax Ismaaciil sida ku iad warqadda Lamb. 0653 taariikhdeedu 16.8.84 ee Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed
Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 6x Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. lam. 573050 oo ku qoran Xasan Saalax Ismaacil ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Koowaad u badalo Jeeg War. lumay ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.8.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 263

MAXKAMADDA G. BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War dhumay oo lambarkiisu ahaa 573060 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 = oo iskalahaa Jaalle Xuseen Saalax Ismaaciil sida ku cad warqadda lambarkeedu 3653 taariikhdeedu 16-8.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Qodobka 69 iy. 3-9-65 lumid Jeeg-

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Dhumay lam. 573060 oo ku qoran Xuseen Saalax Ismaaciil ayna ku jirto Sh. So. 20.000 =.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Koowaad u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18-8.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 262

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 319160 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Jamaame kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20,000 uu iska lahaa Jaalle Cali Xaaji Faqoow sida ku cad warqadda lambarkeedu 009620 taariikhdeedu 18.8.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. lam. 319160 oo ku qoran Jaalle Cali Xaaji Faqoow ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAAYAA -

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xis-Guud u badalo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.8.84

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: FAAFIN JEEGGA WAREEGA L. 405612:

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeeg Lumay;

MARKUU ARKAY: Ogaysiista Bangiga Ganacsiga Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

Jeegga Wareega ee ku qoran Jaalle Caasha Aw Axmed Cigaal kuna qoran lacag dhan 20.000/=.

(WUXUU GO'AAMIYEY)

In loo Cusbooneysiiyo Jeegaas Wareega Jaallaha Caasha Aw Axmed Cigaal markay ka soo wareegto muddo 20 casho ah gudahood laguna sharciiyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

In Jeegga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Caasha Aw Axmed Cigaal, iyadoo la sugayo mudadda kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. TOGDHEER

(Dr. Cabduraxmaan Sh. Maxamed

(Xaliimo X. Cabdi Aadan) «Tanza'nia»

Kaaliyaha Max. G. Tog. Burco

Burco, 31.7.1984

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran
HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar kiisu ahaa 7916 laga soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 175.000.55/= oo iskalahaa Jaalle Shukri Raabi Aadan sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0644 taariikhdeedu na tahay 13.8.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 7916 oo ku qoran Magaca Shukri Raabi Aadan yana ku jirto Sh.So. 175.000,55/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad u badalo Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.8.84

GUDDOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG CAYRIGAABO
LUMID JEEG WAREEGA L. 386124

Guddoomiyaha Max/da Gobolka Sanaag Cayrigaabo

MARKUU ARKAY: Daewadda Kor ku qoran.

MARKUU ARKAY: In Jeeg Lumay oo Lambarkiisu yahay 386124 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Cayrigaabo, ee Gobolka Sanaag kuna qoran tahay lacag dhan 20.000 uuna lahaa Jaalle Cabdulaahi Aadan Max/ed sida ku cad Xaashida lambarkeedu yahay 000143 ee 30.7.84 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Gobolka Sanaag laanta Ceerigaabo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9,9.65.

WUXUU XEERIYEY SIDAN

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega lambarkiisu 386124 kuna qoran magaca Jaalle Cabdulaahi Aadan Maxamed ayna ku taal lacag dhan 20.000

Waxaana la ogolaaday in Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Ceerigaabo u bedelo J/le Cabdulaahi Aadan Maxamed Jeega kor ku qoran una sameeyo mid la mid ah markii ay ka soo waaegto muddo aan ka yar ayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D. Soomaaliya.

Ceerigaabo, 8 8.198.

Guddoomiyaha Max/da Gobolka Sanaag Cayrigaabo
Dr. Maxamuud Maxamed Ismaaciil

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE MARKA

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

2. Taliyaha Xabsigu waa inuu u fudu[illegible] eenka maxbuuska soo booqanaya tabaa[illegible] da, una siiyaa wakhti si uu ugala xaajoo[illegible] wixii arrimo ah ee la xiriira dacwaddiisa

3. Maxbuusku wuxuu ka arki kara hawlo kale oo uu u baahan yahay in sharc looga qabto. Aaragtidaasu waxay ku xiran

Qodobka 61aad
BOOQASHOOYINKA IYO WARQADAHA MAXAABIIS TA KALE.

Awoodda qod. 53aad iyo 54aad ee Xeer nidaamiyahan, lana xiriira booqashooyinka iyo qoritaanka waraaqadaha waxay saameynayaan kooxaha maxaabiista oo dhan, iyadoo lagu xirayo shuruudaha hoos ku xusan.

b) La haayayaasha hayntooda ay soo xalaalaysay hay'addii sharci ahaan awoodda u lahayd, Waxaa Taliyaha Xabsigu oggolaan karaa qoritaanka hal warqad iyo hal booqasho oo 15 daqiiqadood ah toddobaadkiiba mar.

t) La hayayaasha hayntooda aaney soo xalaaleyn hay'addii sharci ahaan awoodda u lahayd, waxaa booqashadooda qoraal ahaan ugu soo oggolaanaya madaxda Nabadsugidda Soomaaliyeed ama hay'addii kale ee awood sharci u leh qoritaanka ama helitaanka waraaqaha ee maxaabiista noocaas, waxaa baaris ahaan loogu dira yaa Nabadsugidda Soomaaliyeed, ama hay'addii kale ee sharci ahaan awood u leh, ka hor intaaney bixin ama gaarin gacanta Maxbuusku.

j) Maxbuuska garsugaha ah waxaa loo oggol yahay

1. qoritaanka hal xaashi oo uu u qorto qoyskiisa todobaadkiiba mar iyo hal uu u qorto qareenkiisa, hadduu sidaa warsado—

II) In uu todobaadkiiba mar arko xubno ka mid ah qoyskiisa ama saaxibadii, kuwaasoo sita xaashi oggolaasho uu soo saxiixay garsoore Maxkama da dacwadiisa gacanta ku haysay ama Xeer Ilaalinta sharci ahaan awoodda u leh.

x) Maxbuuskii loo soo xiro gabid bixin ganaax oo ka soo jeeda amar xukun lagaga doonayo in uu bixiyo, Waxaa Taliyaha Xabsigu awood u leeyahay in uu u oggolaado maxbuuskaas aragti saaxiibadii ama qoyskiisa maalin kasta todobaadka dhexdiisa saacadaha shaqada ama xiriir qoritaan warqadeed oo uu la yeesho xubna-

Qodobka 62aad
BOOQASHOOYINKA IYO QORITAANKA WARQADAHA MAXAABIISTA SHISHEEYAHA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu u oggolaado maxaabiista shisheeyaha ah in ay xiriir la yeeshaan ha'adaha Dibloomaasiga ah iyo Safaaradaha ka wakiilka ah Dalkooda.

Maxbuuska ka tirsan dawlad aan Jamhuuriyadda Dim. Soomaaliya wakiil ka fadhiyin iyo kan maganta ah ama aan dal lahayn (Rafugees and Starelees), Waxaa Taliyaha Xabsigu awood u leeyahay in uu u oggolaado in uu xiriir la yeesho hay'adaha Dibloomaasiga ah ee maamusha danaha Dawladiisa ama hay'ad kasta oo waddani ama caalami ah oo ay shaqadeedu tahay in ay ilaaliso ama dhawrto dadkaas oo kale.

3. Booqashooyinka iyo qoritaanka warqadaha la xiriira maxaabiista ku xusan xarafka 1aad iyo 2aad ee qodobkan, waxay ku xiran yihiin oggolaanshaha Taliyaha Guud ee Ciidanka.

Qodobka 63aad
BOOQASHOOYINKA XEER ILAALIYAHA KU XIGEENNADIISA IYO WAKIILADIISA

Xeer Ilaaliyaha Guud, Ku xigeennadiisa iyo Wakiilladiisuba waxay booqasho kormeer ah ku tegi karaan Xabsiyada, wixii ay ku soo arkaan xabsiyadaas ay soo booqdeen, waxay warbixin iyo tusaalo uga soo gudbina yaan Taliska Guud ee Ciidanka Asluubta. Culimaaudiinka aqoonsi ka haysta Wasaaradda Garsoorka, waxay booqasho ku tegi karaan xabsiga, iyagoo talo guud ka bixin kara hanuuninta iyo wacdiga Islaamka. Taliyaha Ciidanka Asluubta wuxuu u magacaabi karaa dad gaar ah oo aqoon u leh Diinta Islaamka Wacdiga iyo hanuuninta Maxaabiista.—

QAYBTA SAGAALAAD XIRIIRKA MAXKAMADAHA IYO XABSIYADA.

Qod. 64aad
KALA SAARIDDA MAXAABIISTA

qo· 23aad ee Xeerka, markii maxbuus garsuge ah ama la haye ah xukun ku dhaco, waa in Maxkamadda ama hay'adda xukuntay ama go'aanka gaartay soo raacisaa Jideeyaha xukunka oo laga helayo shuruudaha ku xusan qod. 41aad ee xeerka habka ciqaabta, maqnaashaha ama dib u dhaca jideeyuhu wuxuu maxbuuska muteysiinayaa in uu baaqi ku ahaado garsuganimada·

Qodobka 65aad
SIIDEYNTA MAXBUUS MAXKAMADDA HORTEEDA

Markii maxkamad ama hay'ad kale ee sharci ahaan awood u lihi go'aan ku gaarto in maxbuus Maxkamadda ama hay'adda horteeda lagu siidaayo, kaas oo ah xukunsane, Garsuge ama la haye, Maxkamaddii ama hay, addii siideysay waa in ay isla markiiba gaarsiisaa go' aanka xukunka xabsiga maxbuuskaa hayntiisa mas'uulka ka ahaa, si tabaabushaha la xiriira siideynta loo fuliyo, si deg deg ah·—

Qodobka 66aad
SOO HOR JOOJIN MAXBUUS MAX/DA HORTEEDA·

Sida ku xusan qod· 18aad ee Xeerka, markii Maxkamaddu wareysato in la hor keeno maxbuus, waxay Maxkamadda toos ugu diraysaa amar qoraal ah Tal/ha Xa bsiga maxbuuskaasi ku jiro· waxaana amarkaasi saxiixaya Guddoomiyaha Maxkamadda ama Garsoore ka tirsan Maxkamadda warsanayaa maxbuuska· Haddii qofka kaxaynaya aanu ahayn xubin ka tirsan Ciidanka Gacanta ku haya maxbuuska, waa in la xaqiijiyaa shuruudaha hoos ku xusan, kaddibna laga saxeexdaa qofkii kaxaynayay xilqaadka maxbuuska·

b) Xaashida aqoonsiga Ciidanka uu ka tirsan yahay

t) Magaciisa oo Saddexan·

j) Lambarkiisa·—

Timaamaha kor ku xusan waxaa lagu qorayaa diiwaanka iridda Xabsiga·—

Qodobka 67aad
WARGELINTA MAXBUUS AMAR MAXKAMADEED

la xiriira dacwadiisa ama tu uu marag ka yahay ama tu madani ah, waxaa Maxkamaddu toos ugu direysaa qaabkii wargelinta, Taliyaha Xabsiga Maxbuuska lagu hayo. Taliyaha Xabsiguna waa in uu isla markaaba gaarsiiyaa maxbuuska wargelintaa, kana saxiixo qaabka kaddibna u celiyaa qaabkii oo saxiixan Maxkamaddii soo dirtay.—

Qodobka 68aad
SUGIDDA EEDEYSANAHA XABSIGA GUDIHIISA

Markii loo baahdo sugnaasho eedeysane ku jira xabsiga in xubin ka tirsan Ciidanka Booliska ay fuliso hawshaa waxaa amar qoraal ah sidaa ku bixinaaya Garsoore ama Xeer Ilaaliye, xubinta Booliska ah ee hawshaa fulinaysa waxay awood u leedahay in ay booqasho ku tagto Xabsiga waqti munaasab ah oo ay hawshaas fuliso. Taliyaha Xabsiga waa in uu habeeyaa tabaabushaha la xiriira fulitaanka hawshaas.

QAYBTA TOBANAAD XABSI DHIMID

Qodobka 69aad
MUDDADA IYO XABSI DHIMIDDA XUKUNKA

1. Muddada Xukunaka xarigga Maxbuuku waxay bilaabanaysaa loogana tirinayaa maalintii qabsashada sida ku dhigan qod. 47 XCS.

2. Muddada Xukunka xarigga ee Maxbuusku oo ku cad sanado, bilo iyo maalmo waxay tahay bilaha iyo sanadaha kalandarka ah (Calender Months and Years)

3, Maxbuuska waa in la hayaa tan iyo maanta u dambeysa muddada uu ku Xukuman yahay.

4, Mar kasta oo Xukun Dil ah loo beddelo xarig, muddada Xukunku waxay ka bilaabaneysaa maalinta Qabashada,—

5. Mar kasta oo xukun Dil ah laga dhigo xabsi Daa'in ama Xukun sanad ah, muddada Xukunku waxaa

6. Marka maxbuus lagu Xukumo ganaax iyo xarig ama ganaax gadid xarag, wuxuu xa'bsi dhimid ku yeelanayaa qeybta Xukunka ganaaxa ama muddada uu xabsiga ugu jiro bixin la'aanta ganaaxaas.

7, Maxbuuska Xukuman ee waasha loona beddelo takhtarka maskaxda markii la xaqiijiyay waalidiisa wuxuu xaq u yeelanayaa Xabsi dhimid xarig muddada uu takhtarka ku jiro, Waxaana shardi ah in edebtiisa iyo shaqadiisu'ba ahaayeen kuwa fiican lana socda shuruudaha ku xusan lambarka 1aad ee qod. 57aad ee Xeerka muddadii ka horreeysay waalidiisa,

Qodobka 70aad
BILOWGA XABSI DHIMIDDA

Habka Xabsi dhimidda awgii, sida ku dhigan qod. 57aad ee Xeerka, taariikhda laga bilaabayaa Xisaabinta Xa'bsi dhimidda waa taariikhda qabashada Max/ska.

Qodobka 71aad
HABKA XABSI DHIMIDDA OO LOO MACNEEYO MAXBUUSKA—

Soogelitaanka Maxbuuska, Guddiga soo dhaweynta waa inuu ka dhaadhiciyaa habka muteysiga xabsi dhimidda. Markii uu maxbuusku habsamidda ku gefo lana siiyo ciqaab xa'bsi dhimid ka qaad waa in sidaa loo wargeliyaa Maxbuuska ay khuseyso.—

Qodobka 72aad
HABKA XABSI DHIMIDDA LOO MAAMULAAYO

Maxbuus kasta oo xukumani wuxuu yeelanayaa gal lagu muujinaayo muddada xukunka, xabsi dhimidda xarigga ee uu yeelan karo iyo xabsi dhimidda laga qaaday, haddey dhacdo. Waxaa kale oo galkaa lagu muujinayaa muddada bixitaanka ugu soo horreysa iyo muddada ugu dambeysa siideyntiisa, kuwaasoo kala ah

QAYBTA KOW IYO TOB/D SIIDEYNTA MAXABIISTA

Qodobka 73aad
SIIDEYNTA CAADIGA AH EE MAXAABIISTA

Sida ku xusan qod· 59aad ee Xeerka, maxbuuska ku xukuman muddo xarig ah waxaa lagu siideyn karaa oo kali ah·—

1. Markuu dhameysto mudadii xarigiisa loona tixgeliyey xabsi dhim:d sida ku xusan qod· 57aad ee Xeerkan·

2· Markay siideyso Maxkamadda Rafcaanka oo burisay xukunkii Maxkamadda hoose·

3· Cafis guud ama gaar ahaaneed oo lagu soo saaray si sharciga waafaqsan·—

Qodobka 74aad
KU SIIDEYN BALLAN QAAD SHARAF

1· Maxbuuska waa lagu siideyn karaa ballanqaad sharafta ee shaıuudaha ku xusan qod· 34aad ee xeerka·

2· Maxbuus kasta ee ku soo noqon waaya xabsiga marka uu dhamaysto muddadiisa ahayd ku siideynta ballanqaadka sharafta, marka la wargeliyo in uu soo noqdo sida ku xusan xarafka 1aad ee hore, wuxuu gelayaa dembi, marka lagu xukumana wuxuu muteysana yaa ciqaabtuu muteysan lahaa maxbuus fakaday· Maxbuuska noocaas ah waxaa lagu soo qaban karaa jideeyihii hore ee uu ku xirnaa·

3· Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu maxbuus kasta oo ballan qaad sharaf lagu siideeyey uu la yeesho xiriir mar alla markii ay la noqoto·

4· Maxbuuskii lagu siidaayo ballan qaad sharaf ee ka soo bixi waayay ama jebiya shuruudaha lagu xiray wuxuu gelayaa dembi marka lagu xukumana wuxuu mu teyysanayaa ciqaabta ku xusan qod· 55aad ee Xeerka·

Qodobka 75aad
GUDDIGA SIIDEYNTA

1· Waxaa Taliyuhu ka dhisayaa Xabsi kasta Gud

ban Taliyaha Xabsiga oo Guddoomiye ka ah iyo xubin kale oo Taliyuhu magacaabay.

2. Maxbuus kasta oo xukuman lix bilood markay ka hadhay siideyntiisa, Guddiga Siideynta waa inuu arkaa oo uu u soo gudbiyaa Taliyaha xogwaran 'buuxa oo ku saabsan maxbuuska kana kooban.

b) Caddeyn shaqadiisa iyo edebtiisa ah oo lagu ogaaday muddadii Xabsiga uu ku jiray.

t) Himilada uu ka leeyahay noloshiisa dam'be iyo aayatiinka noloshiisa dambe—

Qodobka 76aad
SOO JEEDIN DIB U FIIRIN XUKUN

1. Sida uu dhigayo qod. 58aad ee Xeerku, Taliyaha Xabsigu waa in uu warbixin qoraal ah ka soo bixiyaa Maxbuus kasta oo xukuman, xarigiisuna ka badan yahay 7 sano, markii uu dhammeeyo 4 sano, gaarayna ama lagu wado in uu gaaray cimrigiisu 60 sano.

2. Xog warankaasu waa inuu ka koobnaadaa.

b) Caddeyn la xiriirta shaqadiisa iyo asluubtiisa.

t) Caddeyn Sarkaalka Caafimaadka uu soo dhigay taas oo ka warameyso Caafimaadka Maxbuuska iyo in xabsi ku sii heyntiisa ama xarigiisu ay wax yeelaynayaan Caafimaadka maxbuuska iyo in kale.

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu u soo dirayaa xog waranka Taliyaha. Taliyuhuna kaddib markuu helo xog warankaas, wuxuu raacinayaa aragtidiisa wuxuuna u diray aaMadaxweynaha isagoo marinaya Wasiirka.

QAYBTA LABA IYO TOBNAAD FAKASHO

Qodobka 77aad
KA HORTAGGA FAKASHADA

Xubnaha Ciidanka waa in ay aad uga foojignaad-

kale ee fududeyn kara fakashada ee Xabsiga gudihiisa yaalla daryeelkeeda la hubiyo lana adkeeyo.

Qodobka 78aad

TILLAABOOYINKA LAGA QAADAYO FAKASHADA MARBAY DHADO.

Markii ay dhacdo fakasho maxbuus Taliyaha Xabsiga waa inuu:

b) Amraa in la baaro goobtii fakashadu ka dhacday iyo agagaarkeeda.

t) Waa in isla markiiba la diro koox ka tirsan Ciidanka oo raacdo ah, haday la noqotana hubiyaan.

j) Deg deg ugu diraa war gelin ku saabsan fakashadaas Taliyaha Ciidanka Asluubta, Qeybta Booliska Xeer Ilaaliyaha iyo Guddiga Degmada, isagoo si tifafti ran ugu sheegaya wax allaale wixii la xiriira maxbuuska sida, magaciisa oo saddexan, kan Hooyadiisa, dharkiisa, Da'diisa, midabkiisa, kan indhaha, timaha iyo wixii astaamo kale ah ee uu leeyahay.

x) Fura baaris dacwo, taas oo uu kaga gun gaarayo sababta keentay fakashada, ku meeleynaayana xilkii mas'uuliyaddafakashada.

kh) U diraa Taliyaha waqti munaasab ah xogwaran tifaftiran, kaas oo uu kaga waramayo sababta iyo sida fakashada ku dhacday kuna soo lifaaqaa go'aankii dacwadda fakashada.—

Qodobka79aad

Haynta Maxaabiista Fakata Qabashada Kaddib

Maxbuuskii hevn hore oo sharci ah ka fakaday ama isku dayay inuu ka fakado, soo gelitaankiisa dambe waa in loola dhaqmaa in uu yahay qof ay ka suurowda Xabsi jebin iyo fakashaba, haddii aanu la dhaqankaas ka dhaafin Taliyaha Xabsigu isagoo u cuskanaya sabab gaar ah, xubnaha Ciidanka ee loo xil saaray hayntiisana waa in ay si gaar ah uga feejignaadaan.

2. Iyadoo la tixgelinaayo daryeelka nabadgelyada

QEYBTA SADDEX IYO TOBNAAD LA DHAQANKA RA FCAANLEYDA, GARSUGAYAASHA IYO LA H/SHA.

Qodobka 80aad
RAFCAANLEYDA

1. Maxbuuska Rafcaanleyda ahi muddada uu sugayo go'aanka rafcaanka waxaa lagu haynayaa meel ka gaar ah maxaabiista kale ee xukuman. Haddiise aan xabsiga uu ku jiraa u habeysneyn ama ay la noqoto Taliyaha Xabsiga in aanay suura gal ahayn, wuxuu ka mid ahaanayaa maxaabiista Xukuman.

2. Marka maxbuuska rafcaanleyda ahi uu hor tago Maxkamadda, wuxuu labisanayaa hu'giisa caadiga ahaa, haddiise hu'giisa aanu ahayn mid u qalmo qofnimada, Taliyaha Xabsigu wuxuu siinayaa hu' ka duwan kan Maxaabiista.—

Qodobka 81aad
IS DHEX GALKA GARSUGAYAASHA IYO LA HAAYA YAASHA DHAWRAYA GO'AANKA XALAALAYNTA HAYNTOODA.

Maxaabiista Garsugayaasha iyo la hayayaasha dhawraya go'aanka xalaaleynta hayntooda isku meel ayaa lagu hayn karaa haddii aan Taliyuhu sabab kale awgeed amar ku bixin kala saaridooda. Maxaabiista noocaas ah, hayntooda ka gooni bay ahaaneysaa kuwa Xuxuman sida uu dhigayo qod. 23 xarafkiisa hore ee xeerkan.

Qodobka 82aad
MAXBUUSKA KU EEDEYSAN DILKA

1. Maxbuuska ku eedeysan Dil, haddii ay suuragal tahay, waxaa lagu haynayaa meel gaar ka ah, waxaana la siinayaa feejignaan buuxda. Hase ahaatee, dhaqankiisa kale sida cuntada, gogosha iyo dharka, wuxuu la mid ahaanayaa Garsugayaasha.

2. Maxbuuska ku eedeysan Dil, marnaba looma diri karo shaqo.—

ee Qaranka awgeed, maxbuus garsuge ah, ama la haye ah dhawraya go'aankii xalaaleynta hayntiisa, waa lagu Shaqeyn karaa.—

2. Marka ay shaqeeyaan maxaabiista noocaas ahi waxay yeelanayaan wax allaale wixii abaalgud ah ee uu siinayo Xeerka iyo Xeer nidaamiyahan maxaabiista Xukuman.—

Qodobka 84aad

H U G A

Markii hugga maxb ska garsugaha ahama la hayaha ahi aanu la socon dhawritaanka Caafimaadka Xabsiga, Sarkaalka Caafimaadku wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya daryeelidda Caafimaadka, inuu ku amro in la buufiyo ama la dhaqo huga maxbuuska, muddada dhiqitaanka ama buufiska waxaa maxbuuska la siinayaa kumeel gaar ahaan huga Xabsiga.

Qodobka 85aad

GARSUGAYAASHA IYO LA HAAYAYAASHA DHAWRAYA GO'AANKA XARIGOODA.

1. Garsugayaasha iyo la hayayaasha dhawraya Go'aanka Xalaaleynta xarigooda, ee aanu Sarkaalka cafimaadkuna ka reebin shaqada, waxay yeelanayaan cuntada loogu tala galay maxbuuska shaqeynaya oo b/da

2. Haddii Garsugaha ama la haayaha dhawraya go'aanka Xalaaleynta xarigiisa uu doorto in cunto looga keeno dibadda xaq uma yeelan karo cuntada Xabsiga.

QAYBTA AFAR IYO TOBNAAD MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN.—

Qodobka 86aad

T A K O O R I D D A

1. Maxbuus kasta oo Dil ku xukuman waxaa lagu haynayaa edegga daryeelka buuxa, waxaana illaalin Joogto ah ku haynaya Ciidanka ku filan habeen iyo Maalinba.—

2. Maxbuus kasta oo dil ku xukuman fulitaankii Dilkiisuna soo dhammaaday waxaa si joogto ah u ilaali naya xubno Ciidanka ka tirsan, oo aan tiradoodu ka yarayn seddex qof ugu yaraanna midkood uu yahay Sarkaal xigeen.—

3. Taliyaha Xabsiga waxaa si gaar ah loo xil saaraya in uu hubiyo daryeelka nabadgelyada maxbuuska Noocaas ah.—

Qodobka 87aad
QORITAANKA IYO HELITAANKA WARAAQAHA

1. Qoritaanka iyo helitaanka waraaqaha maxbuuska Dilka ku xukuman waxay ahaan doonaan sida soo socota, iyadoo mar kasta la tixgelinaya baahida cadaadiska la xiriira daryeelka nabadgelyada oo uu ku taliyo Taliyaha Xabsigu.—

b) Go'aanka xukunka dilka lagu xukumay kaddib Maxbuusku wuxuu u qoran karaa seddex warqadood qoyskiisa, saaxiibadiisa iyo Qareenkiisa. Kaddibna warqad todobaadkiiba.—

t) In uu waraaqo ka helo qoyskiisa, saaxiibadiisa iyo Qareenkiiba hadba sidii loogu soo diro.

2. Wax allaale wixii waraaqo ah ee u socda ama ka socda maxbuuska waxaa baaraya Taliyaha Xabsiga naf ahaantiisa ama xubin Sare. ee uu wakiishay. Warqad kasta oo waxaan la oggolayn ay ku qoran yihiin waa la joojinayaa.—

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu u maamulayaa waraaqaha u socda ama ka socda maxbuuska ku xukuman dil Buug gaar ah oo u habeysan sida soo socota:

b) Magaca iyo lambarka Maxbuuska.

t) Magaca iyo ciwaanka qofka warqaddu u socoto

j) Wixii warqaddaa ku qoran oo la soo koobay.

x) Wax alIaale wixii aan la oggolayn ee warqadaha ku qoran.—

kh) Taliaabadii warqaddaa laga qaaday.

Qodobka 88aad

BOOQASHOOYINKA MAXBUUSKA DILKA KU X/MAN

Iyadoo la tixgelinaayo qod. 38aad ee Xeerka iyo qaybta 8aad ee Xeer nidaamiyahan oo la xiriira booqashooyinka maxaabiista iyo iyadoo la raacayo adkeynta uu ku arrimiyo Taliyaha Xabsigu danta daryeelka nabadgelyada awgeed, booqashooyinka maxbuuska dilka ku xukuman waxay ahaan doonaan sida hoos ku xusan oo keli ah.

b) Sarkaalka Caafimaadka ee lagu xusay xarafka 1aad ee qodobka 38aad ee Xeerka, kaas oo ah Sarkaalka Caafimaadka ee Xabsiga, haddii loo baahdo wuxuu ta shi la yeelan karaa, oggolaashaha Taliyaha Xabsiga kaddib, takhtarkii kala ee uu uga baahdo daryeelka Caafimaadka Maxbuuska.

t) Hay'adaha Cadaaladda ka tirsan awoodana u leh booqashada maxbuuska Dilka ku xukuman, iyadoo hawsheeda gudaneysa, waa in ay soo weydiistaa Taliyaha Xabsiga booqashada noocaas ah, lamana oggolaan karo, kaddib markii go'aankii Dilka la oggolaado ee dhawrayo fulitaanka xukunkaas.—

j) Taliyaha Xabsigu wuxuu u oggolaan karaa maxbuuskii ku xukuman Dilka booqasho qareen ee ku xiran shuruudaha soo socda:

I) Booqasho la xiriirta Dacwadda.

II) Qareenka oo soo warsaday booqashada ugu yaraan laba saac ka hor.

III) Booqashaduna waa in ay ahaataa saacadaha Xabsigu shaqaynayo.

x) Caddeymo qoraal ah oo maxbuusku sameeyey ama xuusasha (notes) uu qaatay qareenku waxaa la

kuwa la xiriira dacwadda maxbuuska oo aan si kale loo gu talo gelin haddey tahay wargeysyada ama dad kale Taliyaha Xabsigu uma oggolaan karo qareenka la bixitaanka caddeymaha iyo xususaha haddii aanu ku qancin ulajeeddada.—

kh) Taliyaha Xabsigu wuxuu u oggolaan karaa maxbuuska Dilka ku xukuman inay soo booqdaan xaaskiisa iyo caruurtiisa qaan gaarka ah iyo Waalidiintiisa haddii ay la socdaan, waxayna booqashooyinkaas ku xiran yihiin shuruudaha soo socda:

b) Maxbuuska ku xukuman Dil lama soo booqan karo toddobaadka ugu horreeya xariggiisa iyo toddobaadka ugu dambeeya ka hor filtaanka Dilka.

t) Laba qof wax ka badan isku mar ma booqan karaan maxbuska.—

j) Muddada booqashadu waxay ku eg tahay 20 Daqiiqadood.—

Qodobka 89aad
J I M I C S I

Maxbuus kasta oo dil ku xukuman waxaa xerada uu ku yaal edegga lagu hayo ku qaadanayaa Jimicsi hal saac ah, maalin kasta, haddii sidaa wax ka hor yimaadaa jirin, wuxuuna qaadanayaa jimicsiga isagoo ay ilaalinayaan ciidan ka kooban ugu yaraan seddex xubnood oo midkood yahay Sarkaal xigeen.

Qodobka 90aad
K U T U B

Maxbuuskii ku xukuman dil waxaa loo oggolaanayaa Kutub Diini ah, kuwo Idiyoolojiyadeed iyo kuwo suugaan ah, haddii uu warsado Taliyaha Xabsiga.

Qodobka 91aad
CUNNO GAAR AH HABEENKA KA HORREYSA FULITAANKA DILKA.

Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu siiyo maxbuuskaas dilka ku xukuman cunno gaar ah oo uu doortay habeenka ka horreysa fulitaanka Dilka.

Qodobka 92aad

D A R D A A R A N

Fulinaanka dilka ka hor, wuxuu Taliyaha Xabsigu weydiisanayaa maxbuuska in uu doonayo in uu dardaarmo. Haddii maxbuusku doono in uu dardaarmo, waxaa laga qorayaa dardaarankaas isagoo uu goob joog ka ya nay Garsoore Maxkamadeed iyo Qareenkiisa waxaana loo guudinayaa qofka uu khuseeyo. Haddii uu ku jiro dardaarankaas wax aan Sharcigu oggoleyn, Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu ka reebo.

QAYBTA SHAN IYO TOBNAAD

Q U B A N E

Qodobka 93aad

WAAJIBAADKA XUBNAHA KA SAARAN XAB/YADA

1. Waxaa ku waajib ah xubnaha Ciidanka oo dhan in ay u gutaan shaqadooda iyo mas'uuliyaddooda la xiriirta Xabsiyada sida uu dhigayo Xeerka Aasaaska Ciidanka Asluubta iyo Xeer lam'aan 7 soona baxay 31-12-71, iyo Xeer Nidaamiyaha ama amarrada joogtada ah, tusaalooyinka rasmiga ah, amarrada guud ama gaar ee uu soo saaro Taliyuhu kuna saabsan maamulka habboon ee Xabsiyada Jam. Dim. Soomaaliya.

2. Jebintaama ku xad gudu'oka ka yimaada xubin Ciidanka ka tirsan ee la xiriirta Xeerka, Xeer Nidaamiyaha, Amarrada joogtada ama Tusaalooyinka rasmiga ah, wuxuu ahaanayaa qof galay dembi wuxuuna mutey sanayaa ciqaab sida sharcigu dhigayo.

Qodobka 94aad

WAAJIBAADKA ILAALINTA MAXAABIISTA

1. Markii loo wadayo maxaabiis xabsiga dibadiisa, hadday tahay shaqo ama siyaabo kale, Taliyaha Xabsigu ama xubinta kale ee uu wakiishay waxaa ku waajib ah in uu qaado tallaabo kasta oo looga baahan yahay daryeelka nabadgelyada.—

2. Tirada maxaabiista iyo Ciidanka ilaalinta isu

kasta ama waqti kasta waxaa lagu caddeynayaa amarrada joogtada ah, hase ahaatee meeshii uu joogo Ciidan ku filani xubin looma dhiibi karo 5 max'buus haddii mee sha shaqadu ay tahay go'doon, kana baxsan tahay Xabsiga. Marka maxaabiistu ay u shaqayneyso koox wadajir ah, tirada maxaabiista xubinta kaxayn karto waxaa goyn kara Taliyaha Xabsiga.—

Qodobka 95aad
ABUURISTA SANDUUQA ABAALGUDKA IYO G/AXA

1. Taliyuhu wlxuu abuurayaa Sanduuq lagu maga caabo Sanduuqa Abaalgudka iyo Ganaaxa.

2. Sanduuqa waxaa lagu ridayaa wax allaala wixii lacag ganaax ah iyo wax allaala wixii ka soo 'baxa alaabo mamnuuc ah oo la gaday, xabsi kasta ha laga qabtee, ganaaxa iyo alaabta mamnuuca ah ee la qabtay oo loo cuskaday Xeerka iyo Xeer nidaamiyaha ama amarrada joogtada ah,—

3. Sanduuqa Abaalgudka iyo ganaaxa waxaa lagu haynayaa Taliska Ciidanka Asluubta iyadoo lagu muujinaayo wax allaale waxa lacag ah ee ku soo dhacay, meesha ay ka yimaadeen, taariikhda lacagta la qabtay wixii Lacag ah ee Laga bixiyay TaLiyuna saddexdii bilood'ba mar buu u dirayaa nuqul Xisaabta Lacagtaas ah Xabsiyada oo dhan.—

4. Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaa[illegible] in Sanduuqa looga dhiibo siyaabaha soo socda:

b) In laga kaalmeeyo Xaaska iyo Caruurta Maxbuuska dhintay.—

t) In Abaalgud laga 'bixiyo lana xiriira tartamo ci yaareed oo dhex mara Maxaabiista.—

j) In Abaalgud laga siiyo maxbuuskii ku muteysta hawl Qaran uu qabtay.

x) In laga kaalmeeyo horumarinta waxbarashada Ciyaaraha, madadaalada, Samafalka dhaqdhaqaaqyada kale ee u ha'beysan danta maxaabiista ee sharciga ah.

5. Taliyaha oo kaliya ayaa amri kara in Sanduuqa lacag laga bixiyo.—

6. Xabsi kasta Taliyaha ka mas'uulka ah wuxuu qoraal ugu soo gudbinaya Taliyaha, Maxaabiista u qala nta abaalgud iyo meeluhuu qabo in San/qa laga kalmeyo

QAYBTA LIX IYO TOBNAAD GABAGABAYN

Qodobka 96aad
TIR TIRID

Xeer Nidaamiyaha Xabsiyada lambar 453 oo ka socday Gobollada Waqooyi waa la tirtiray.

Qodobka 97aad
DHAQAN GELID

Xeer Nidaamiyahan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada

Muqdisho, 9 Ago. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

LIFAAQA (B) CUNTADA MAXAABIISTA CUNTADA MAXAABIISTA WAXAY KA KOOBAN TAHAY SIDA HOOS KU TAXAN:

1. Hilibka 200 Garaam 3 Maalmood Todobaadkiba.
2. Caano 250 Garaam 4 Maalmood Todobaadkiiba
3. Rooti ama Canjeero 56 Garaam Maalintii,
4. Galley ama Mesegga (Haruur) 230 Garaam M/tii,
5. Khudaarta 80 Garaam Maalintii,
6. Shaah 2 Garaam Maalintii,
7. Sonkor 56 Garaam Maalintii,
8. Saliid 30 Garaam Maalintii,
9. Basal 15 Garaam Maalintii,
10. Cusbo 10 Garaam Maalintii,
11. Xaabo 1380 Garaam Maalintii,
12. Bariis/Baasto 140 Garaam Maalintii,
13. Saabuun Dhar 100 Garaam Toddobaadkii'oa,
14. Saabuun Qubeys 100 Garaam Todobaadkiiba,

FIIRO GAAR AH:

Gobollada ama Degmooyinka aan laga heli karin cuntada qaarkeed waxaa loogu beddelayaa cuntada mo wjuudka ah sida:

1. Hilibka ama Caano waxaa lagu beddeli karaa Kalluun ama Digir,

2. Rooti waxaa loogu 'belleli karaa Canjeero ama Moofo (Kidaar) ama Timir.

3. Khudaarta waa inay ahaato isku jir sida Bocor, Yaanyo, Basbaas, Kaabaj IWM.

LIFAAQA (T) HUGA IYO GOGOSHA MAXAABIISTA.

HUGA IYO GOGOSHA MAXAABIISTA MAXAY KA KOOBAN YAHAY SIDATAN:

R A G G A:

1. Shaati 2 xabo sanadkiiba.
2. Surwaal Dheer 2 xabo sanadkiiba,
3. Surwaal Dheer 1 xabo sanadkiiba.
4. Ka'bo Gocmo ah (lugo Baabuur) 2 Pair san/kiiba.

HAWEENKA:

1. Canbuur 2 xabo sanadkiiba.
2. Googorad 2 xabo sanadkiiba,
3. Surwaal Gaaban 1 xabo sanadkiiba.
4. Nigis 2 xabo sanadkiiba.
5. Shanlo 1 Lixdii Biloodba.
6. Shaambo hal Dhalo 3 biloodba.
7. Saliid Timo 5 Garaam Maalintiiba.

GOGOSHA MAXAABIISTA:

1. Dermo 2 xabo sanadkiiba.
2. Busto 2 xa'bo sanadkiiba.
3. Go'yaal (Dhiinsoole) 2 xabo sanadkiiba.

FIIRO GAAR AH,

Meeshii awood Dhaqaale ama maamul asmaxdo ama Caafimaad dartii loogu baahdo, waxaa derinta loogu beddeli karaa Sariir iyo Joodari,

MAACUUNKA IYO WIXII RAACA:

1. Gaaweeto ama saxan macdan ah 1 sanadkiiba.
2. Koob Biyaha 1 sanadkiiba.
3. Koob Shaahi 1 sanadkiiba.
4. Qaaddo 1 sanadkiiba.

LIFAAQA (X) CUNTO CIQAABEED:
CUNTO CIQAABE D WAXAY KA KOOBAN TAHAY SIDA HOOS KU XUSAN:

1. Galley ama Meseggo 200 Garaam
2. Bariis ama Baasto 100 Garaam
3. Cusbo 10 Garaam

FIIRO GAAR AH

Cunto Ciqaabeedka waxaa la siinayaa Maxbuuska 3 Maalmood oo isku xiga, maalin afraadka waxaa la siinayaa cunto caadi ah. Ilaa ay ka dhamaato muddada uu ku xukuman yahay Ciqaabta.

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdher Burco.

Ujeeddo Baafin Wareega ee Lumay
HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeega War. ee Lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka,

HADDUU ARKAY: Qod. 69 9.9. 65 N 2 Lumid Jeg. War L.489715 Sh.So. 20.000 J/W L. 489717 Sh;So; 20,000 J/L. 489723 20,000 kuna qoran Cab/laahi Aadan Naleye Maxamed.

Wuxuu Amrayaa In loo Cusbooneysiiyo Jeegagaas War. ee kor ku xusan J/le Cab/laahi Aadan Naalleye Maxamed markii ay ka soo wareegto muddo 20 maalmood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

WAXAA LAGA CODSANAYA

In Jeegaga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro J/le Cab/laahi Aadan Naleeye Maxamed iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Xaliimo X. Cabdi Aadan Tanza'nis

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdher Burco.

Maxamed X. Cab/qaadir

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 521477 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 30.000 uu iska lahaa J/le Maxamed Sulub Cawad sida ku cad warqadda Lam. 00857 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad taariikh 22.10.84

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee sharciga lam. 2 ee 9.9.84

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 521477 oo ku qoran magaca Maxamed Sulub Cawad ayna ku jirto Sh.So. 30.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u beddelo J/le Maxamed Sulub Cawad Buugga Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.10.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 442

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 1da Nofembar 1984 L. 11

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFINTA BILA SOO GAKA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba -- **RUKUNKA: Sanadki waa** Sh. 100 **Soomaaliya** gudeheeda - **dibaddedana waa** Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo **gooyey waxuu ka bilabnaa** 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku **F. R. halkii** sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 39 ee 20 Okt. 1984, Awood u siin Madaxweynaha JDS. Fidin Cafis Guud BOG. 897

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 4 ee 30 Sebt. 1984, Heshiis dhexmaray Wasaaradda Arr. Gudaha iyo Hoggaanka Dhismaha Ciidanka Asluubta » 898

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 5 12 Agoosto 1984, Beddelaadda Tariifada Telekiska Waddanka Gudihiisa, Modification of the Internal Telex Tariff. » 899

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY. & WIXII LA MID AH.

DAWLADDA H. MUQ. 4.7.83 Naado Dhul J/le Cabdulqaadir Cusmaan Maxamuud uud L. 396 » 900

DAWLADDA H. MUQ. 31.7.83, Naado dhul J/le Xaajiya Asli Sandhool L. 397 » 901

DAWLADDA H. MUQ. 31.7.83, Naado dhul J/le Cali Xaaji Muxyadin L. 398 » 902

DAWLADDA H. MUQ. 31.7.83, Naado dhul J/le Maxamed Ibraahim Hilowle L. 399 » 903

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Axmed Yoonis Shabeel L. 400 » 904

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Faarax Xaaji Cabdi L. 401 » 905

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Xalima Xasan Maxamed L. 402 » 906

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Maxamed Seyd Axmed L. 403 » 907

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Maxamed Cabdi Yuusuf L. 404 » 908

DAWLADDA H. MUQ. 3.8.83, Naado Dhul J/le Maxamed Cali Xaaji L. 405 » 909

DAWLADDA H. MUQ. 25.9.83, Naado Dhul J/leMaxamed Xaaji Jimcaale L. 406 » 910

DAWLADDA H. MUQ. 25.9.83, Naado Dhul J/le Cabdulaahi Xaaji Bashiir L. 407 » 911

DAWLADDA H. MUQ. 10.8.83, Naado Dhul J/le Cabdisamad Axmed Xaaji L. 408 » 912

DAWLADDA H. MUQ. 10.8.83, Naado Dhul J/le Axmed Saciid Samantar L. 409 » 913

DAWLADDA H. MUQ. 10.8.83, Naado Dhul J/le Xasan Jaamac Maxamed L. 410 » 914

DAWLADDA H. MUQ. 10.8.83, Naado Dhul J/le Axmed Sheekh Isaxaaq L. 411 » 915

DAWLADDA H. MUQ. 10.8.83, Naado Dhul J/le Maxamed Maclin Isaxaaq L. 412 » 916

DAWLADDA H. MUQ. 6.8.83, Bed. Naado dhul J/le Axmed Cali Maxamed L. 413 » 917

DAWLADDA H. MUQ. 26.7.83, Bed. Naado Dhul J/le Cosmaan Muuse Xersi L. 414 » 918

DAWLADDA H. MUQ. 26.7.83, Bed. Naado Dhul J/le Cosmaan Muuse Xersi L. 415 » 919

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.10.84, Lumid Buug Keyd L. 21410 ku qoran Xabiibo Xalane Xaaji L. 416 » 920

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.10.83, Lumid Buug Keyd L. 3537 ku qoran Sh. Maxamed Shire Barre L. 417 » 921

Sharci Lambar 39 taariikh 20.10.84. Awood u siin Madaxweynaha J.D.S. Fidin Cafis Guud.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey in Munaasabadda 15 Guurada Kacaanka 21ka Okt. 1969 ku bixiyo Cafis Guud. Xagga Dambiyada iyo C/ha.

2. Waxaa kale oo awood loo siiyey in uu xaddido Dambiyada cafisku uu saameyn karo, isagoo tixgelinaaya habboonaanta, Nabadgelyada iyo badbaadada B/da.

3. Cafiska waxaa ka faa'ideysan kara eedeysanayaasha iyo Xukun sanayaasha dambiga galay inta ka horeysa 13ka Oktoobar 1984.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamh riyadda.

Muqdisho, 20 Okt. 1984.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

XEER WAS/DA ARR. GUDAHA L. 4 ee 30 Sebt. 1984.
Heshiis Dhex maray Wasaaradda Arrimaha Gudaha Iyo Hoggaanka Dhismaha Ciidanka Asluubta.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S,
ISAGOO ARKAY: Sharci L. 7 ee 12,4,84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
ISAGOO ARKAY: Heshiiska ay saxiixeen labada dh'n ac. —

ISAGOO TIXGELINAAYA: Warqad L. WHS.1.84.139 ee 31.7.84 ee Wakaalada Hindisaha Soomaaliyeed ku qiimeysay kharajka dhismaha.
ISAGOO TIXGELINAAYA: Baahida loo qabo dhismaha cusub ee xarunta Wasaaradda Arrimaha gudaha

WUXUU GUDDOOSHAY Qodobka 1aad

Waxaa loo oggolaaday heshiiska dhexmaray Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Hoggaanka dhismaha Ciidanka Asl bta, kuna saabsan dhismo cusub ee Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Qodobka 2aad

Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in dhismuhu ku baxo lacag dhan Sh.So. 31.500.000 sida ay ku qiimeysay Wakaaladda Hindisaha Soomaaliyeed, iyadoo laga jarayo 10% qiimeynta Guud lana tixraacayo naqshadda ay Wakaaladdu soo diyaarisay.

Qodobka 3aad

Hoggaanka dhismaha Ciidanka Asluubta wuxuu dhismaha ku xusan qod. 1aad ku dhammeyndoonaa muddo 1 Sano haddii ayan dhicin awood aan laga fursan karin, laga bilaabo waqtiga la kala saxiixdo heshiiska.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha,waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 30. Set. 1984.—

S/Guute Axmed Suleymaan Cabdalla.
H. Siyaasadda G.Dhexe X.H.K.S.

XEER W. BOOSTADA & IISG/TA L. 5 ee 12 Ago. 1984. 1984 Beddelaadda tariifada Telekiska Waddanka Gulahiisa Molification of the Internal Telex tariff.

WASIIRKA WASAARADDA BOOSTADA IYO ISG/NTA.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ASIGOO ARKAY: Xeerka Nidaam ka Dowladda iyo Qaabka Dhismaha Dowladda gaar ahaan xubintiisa 2aad ee Qod. 3aad ee Sanadka 1961.

ISAGOO ARKAY: Qod. 9aad ee sharciga Isgaarsiinta sharci L. 1 soona baxay 22.12.1975.

ISAGOO ARKAY: Xeer soo baxay 31.7.82 kuna saabsantariifada Telekiska.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la beddelo tariifada telekiska waddanka gudihiisa.—

ISAGOO TIXGELIYEY: Wada tashiga uu la yeeshay beddelkaa tariifada, Wasiirka Wasaaradda Maal/da

WUXUU XEERAYAA
Qod. 1aad

BEDDELAAD QIIMAHA WACIDDA TELEKISKA G/ha Laga bilaabo taariikhda 12ka Agoosto 1984 Qod. 9aad ee Xeerka soo baxay 31.7.81 waa la beddelay waxaana laga dhigay sida soo socota.

1. Qiimaha Wacidda telekiska waddanka gudihiisa (Inter urbancooll) halkii daqiiqo ama jajab waa Shs 20

2. Qiimaha wacidda telekiska magaalada gudahee da (Urlban call) halkii daqiiqo ama jajab waa Sh.So. 10

3. Qofkii ku diranayaa telekiska dadweynaha (Public telex) wuxuu bixinayaa dhambaal walba khidmad go'aan (fixed charge) lacag dhan Sh.So. 20

Qodobka 2aad
DHAQAN GELIN

Xeerkani hore ayuu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 12ka Agoosto 1984,

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
S/G to Maxamed Sheekh Cusmaan

WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabduqaadir Cusmaan Maxam d u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20.5.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Ca'odulcasiis Qaabkiisuna ya hay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60X20 kuna tadhiya 1200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 3-4

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 7-2

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Caaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta tagu soo qoro Euugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 4 Lulyo 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 396

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaajiya Asli Sandhol Guure uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 2.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad leh

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Caaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 31 Lulyo 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 397

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J le Cali Xaaji Muxyidin uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/H. ee Muqdisho maalintii taarikhdu ahayd 22.6.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraann Qaa'bkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 15X24 kuna fadhiya 360 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga Dhul dad leh

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddada Banaadir

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Caaxda dhulka Rasmiga ah ee D Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga 'bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 31 Lulyo 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 398

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Hilowle Ibraahim uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 2.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retta ngolare Addimihiisuna yihiin 24X12 kuna fadhiya 288 M

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddada Kaaraan

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Caaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 31 Lulyo 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 399

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmed Yoonis Shabeel uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20.7.83 uu ku weydiistay gaɓal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 4502

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Caaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga ɓilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 400

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Faarax X. Cabdi Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees is. Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 M

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 4501

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 4500

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 4504

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 401

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaliima Xasan Maxamed & Sayid Axmed Xaaji uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.5.83 uu ku weydiistay gabal dhul Degaanka ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar Gees is. Addimihiisuna yihiin 27X27 kuna fadhiya 729 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Ciidamada Q. Sida.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 402

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Sayid Axmed uu u soo qoortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.5.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Xamar Jadiid Qaabkiisuna yahay Afar gees is. Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 403

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Wardi Yuu suf uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 9.3.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X30 kuna fadhiya 900 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 4.H.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 6 H

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 17 iyo 15 H.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 404

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Cali Xaji Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.5.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar gees is. Addimihiisuna yihiin 13,50X13,50 kuna fadhiya 182,25 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 3 Ago.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 405

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil) uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 10.2.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 40X100 kuna fadhiya 4000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo
B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 25 Set. 1983
L. 406
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHUKA EE D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdulaahi X. Bashiir Ismaaciil uu u soo oortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aha yd 26.6.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Jidka Xamar Afgooye Qaabkiisuna yahay Afar gees is. Addimihiisuna yihiin 150X150 kuna fadhiya 22.500 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddada Afgooye

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 25 Set. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 407

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdisamad Axmed X. Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmi ga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu aha yl 24.3.83 uu ku weyliistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 106 B.
Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 102 B.
Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 103 B.
B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 10 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 408

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmed Saciid Samatar Cali Maxamed Geedi uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd ——— uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Jidka Afgooye Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 120X200 kuna fadhiya 24.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 10 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 409

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xasan Jaamac Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho. Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettan polare Addmihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 M. SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 2089

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 2088

B a r i Waxaa ka xiga: Waddi

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 10 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 410

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmed Sh. Isxaaq uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 27.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 12X24 kuna fadhiya 288 MDH.—
SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa Ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 10 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 411

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Macalin Isaaq uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D. Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 20.7.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees is. Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 M SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri dad leh

Galbeed Waxaa ka xiga: Cadad dhan Gadaagta

B a r i Waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqssadda dhulka oo taal Waaxda rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 10 Ago. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 412

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J/le Axmed Cali Maxamed maalintii taariikhdu ahayd 15.12.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh.— Loona qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG/3/23.106 ee 5.2.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

2. Qaansheegtada u dhaxeysa Sh.So. 500.001 ilaa 1000.000 (hal malyan) waxay ku yeelanayaan 15%.

Qodobka 3aad

Waaxda maamulka iyo Lacagta ee Wasaaradda Macdinta iyo Biyaha marka ay u gudbinayso khasnadda Dawladda Lacagta ku xusan qodobada sare si toos ah ayey ugu reebayaan makhaasiirta iyo xuquuqda shaqaalaha ku yeeshay qaansheegasho kasta.

Qodobka 4aad

Habka iyo maamulka Shaqaalaha loogu qaybinayo Xuquuqda u bislaatay waxaa Xeer hoosaadka ku soo saaraya Wasiirka Macdinta iyo Biyaha.

Qodobka 5aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. in loo gudbiyaa Hantidhowraha Guud si loo Diiwaangeliyo.

Muqdisho, 17 Nov. 1984

G/le Sare Axmed Maxamuud Faarax

Wasiirka Macdinta iyo Biyaha

J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SAXID — QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH LAM. 6 ee 1da Juunyo 1984,

Bog. kuna soo baxay Xeer- Sharci Lam. 5 ee 18 Maajo 1984, kuna saabsanaa Mu khaddaraadka, Qod. 2aad Qaybtiisa 3aad oo si lama filaan ah looga tegay, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran.

3 . . Isla ciqaabtaas wa xa mutaysanaya qof kasta oo cuna ama isticmaalay ama lagu helo waxyaabaha maskaxda dooriya, marka uu u haysto sabab ka bax san sababaha ku tilmaa man qodobka 1aad ee Xeer-Sharcigan.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 51 ee 9 Nof. 1984

Magacaabid Garsoore.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 3 soona baxay 10ki Jannyo 1970 kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhaca.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Garsoore loo magacaabo Maxkamadda Badbaadada Dalka si awooddeeda wax qabad sare loogu qaado, la isuguna dheellitiro culeyska hawlaha ay ka xilsaaran tahay.

MARKUU TIXGELIYEY: Tala soo jeedinta Guddoomiyaha MBD tirsigeedu yahay 777/MD1/84 ee 6.11.84.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Soo Socda:—

Qodobka 1aad

J/le Dr. Cismaan Cilmi Guuleed waxaa loo magacaabay inuu Garsoore ka noqdo Max/da Bad/da Dalka.

Qodobka 2aad

Garsooruhu wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh.So. 800 Bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 Nof. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 52 ee 15 Nof. 1984 Oggolaansho Jinsiyadda Soomaaliyeed Dieudonne Basunoki.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 4aad ee Dastuurka.
MARKUU ARKAY: Qod. 12aad ee Nidaamka Dhismaha Dawladda Lr. 14 ee 3.6.62 iyo Isbedelaadii ka Dambeeysay.—

MARKUU ARKAY: Qodobada 4,13, iyo 14 ee sharciga Lr. 28 ee 22.12.62 ee ku saabsan Jinsiyadda Soomaaliyeed Siisahaan.—
MARKUU ARKAY: Qodobada 3,4,5, ee Xeer Madaxweyne lr. 129 ee 19.2.63

MARKUU ARKAY: Arjiga taariikhdiisu ahayd 20.3.84 ee uu la yimid J/le Dr. Dieudonne Bajunaki si uu u helo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

MARKUU HUBIYAY: Waafaqsanaanta Dokumentoo yinka qodobada 4aad iyo 6aad ee sharciga lr. 28 ee 22.12.62.
MARKUU ARKAY: Warqad lr. XWKL/M-141/84 ee 3.4.84 ee ka soo baxday Xafiiska Madaxweyne ku Xigeenka 2aad ee J.D.S.

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiiradda.—
MARKUU DHEGEYSTAY: Soo Jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.—

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Waxaa si sarci ah loogu oggolaaday in J/le Dr. Dieudonne Bajunaki Kanaburebenrenge la siiyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.—

Qodobka 2aad

Jinsiyadda Soomaaliyeed Waxaa ku wehliya oo kale Xaaskiisa iyo Carruurtiisa aan Qaangaarin.—

Muqdisho, 15 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER SHARCI LAM. 10 ee 18 Nov. 1984 Dib u habaynta Sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciyada lr. 2 ee 29kii Diisembar 1861 iyo beddelaadii ka dambeysay kuna saabsanaa sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda iyo Xeer Nidaamiyaha lr. 317 ee 17.12.1962 iyo beddelaadii ka dambeysay.

ISAGOO OQOONSADAY: Inay jirto baahi weyn in haw laha iyo awoodda ku tilmaaman Xeer sharciyeedka Lr. 2 ee 29.12.61 iyo Xeer Nidaamiyaha Lr. 317 ee 17.12.62 dib loogu soo celiyo Xisaabiyaha Guud ee Da/da

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda—

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Golaha Wasiir/da.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeer Sharci Soo Socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 15 Diisambar 1984 waxaa dib loogu soo celiyey Xisaabiyaha Guud ee Dawladda iyo awooda ha ku tilmaaman sharciga maamulka Xisaabaadka Dawladda lambar 2 ee 29.12.1961 iyo Xeer Nidaamiyaha lambar 317 ee 17.12.1962.

Qodobka 2aad

Waxaa la buriyey Xeerka lr. 1 ee 27.12.1971 kuna saabsanaa wax ku kordhin iyo wax ka beddelidda Xeer Sharciyeedka lambar 2 ee 29kii Diisember 1961 iyo Xeer Nidaamiye lr. 1 ee 27.12.1971.

Qodobka 3aad

1. Xeer Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana loo gudbina yaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu Rogo.

2. Xeer Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Lumay oo lambarkiisu ahaa 435235 lagana soosaaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 8.000 oo uu iska lahaa J/le Cali Ciise Xasan sida ku cad warqadda lam. 023299 taariikh 1.12.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baai'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lamb. 435235 oo ku qoran J/le Cali Ciise Xasan ayna ku Jirto Sh.So. 8.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa u bedelo J/Wareega ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah laga kenin

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 444

ISKA MA GALO

GAARINTA RASMIGA AH

الجريدة رسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 30 Dis. 1984 L. 1912

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba — **MUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddedaha waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaankii F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaankii waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Gaarinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurta ee Wasaaradda Lacagta.

KOBTA

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 44 ee 25 Nof. 1984, waxa lagu beddelid iyo ku kordhin sharciga lamb/bis ee 18 Maajo 1981, kuna saabsan Baasaboorada iyo warqadaha Dhaqdhaqaaqa ... Bog. 977

SHARCI L. 45 ee 25 Nof. 1984, Oggolaanshaha Meel marinta heshiiska maalgelinta Carbeed ee ka dhexeysa Dawladda Xubnaha ka ah Urur Jaamacadda Carbeed. » 978

SHARCI L. 46 ee 25 Nof. 1984, Oggolaanshaha Heshiiska horumarinta, badbaadinta iyo dammaanad siinta maalgelinta ee dhexeya Waddamada Xubnaha ka ay . 979

SHARCI L. 47 ee 17 Dis. 1984, U rogid sharci, Xeerka sharci lamb. 10 ee 19.11.84, Dib u habeynta Sharciga maamulka Xisaabaadka Dawladda lamb. 2 ee 29.12.81 Lamb. 317 ee 17.12.1962 iyo is beddelaadyadii ka dambeeya. » 980

SHARCI L. 48 ee 16 Dis. 1984, Oggolaansho Miisaaniyadda ku talo galka ee Dawladda Sannadka 1985. » 981

SHARCI L. 49 ee 23 Dis. 1984, Wax ka beddelid Dastuurka J.D. Soomaaliya. » 982

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 53 ee 29 Nof. 1984, Billad Dahab ah oo lagu Maamusay J/le S/guut Maxamed Xaashi Gaani. » 987

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 54 ee 29 Nof. 1984, Billad Qalin Waddaninimo ah oo lagu maamusap Jaalle Ibraahim Cabdi Nuur (Afgaab). » 988

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 29 Nof. 1984, Billad Maar ar ee hawlkarnimo. » 989

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 56 ee 25 Nof. 1984, Meel marin heshiiska maal gelinta Carbeed ee ka dhexeysa Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Jaamacadda Carabta. » 990

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٥٦ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م
للتصديق على الاتفاقية الموحدة لاستثمار رؤوس الاموال العربية
في الدول العربية » — ٩٩١ —

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 57 ee 25 Nof. 1984, Meel marin heshiiska horumarinta, badbaadinta iyo dammaanad siinta maal gelinta ee ka dhexeysa Waddamada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka » 991

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٥٧ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م
للتصديق على اتفاقية تشجيع وحماية وضمان الاستثمارات بين الدول
الأعضاء في منظمة المؤتمر الاسلامي » — ٩٩٣ —

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 58 ee 24 Nof. 1984, Magacaabid ku xigeen Xeer

Sharci lambar 44 taariikh 26 Nofembar 1984 Wax ka beddelid iyo ku kordhin Sharciga lam/Bis ee 18kii Maajo 1981, kuna saabsan Baasaboorada iyo waraaqaha dhoofinta.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 4aad, xubinta 3aad ee Sharciga tirsigiisu yahay 35/Bis, soona baxay 18kii Maajo 1981, waxaa loo beddelay sida soo socota:-

«3. Baasaboorka Dibloomaasiga ah wuxuu qofku sidan karaa ilaa iyo inta uu hayo jagada ku tilmaaman xarafka (a) ee qodobkan, wuxuuna soconayaa muddo ku siman saddex sano. Wasiirka ama cidda uu wakiisho ayaa leh awoodda cusbooneysiinta.»

Qod. 2aad

Baasaboorada Diblomaasiga iyo kuwa hawleed, bixintooda, cusbooneysiintooda, keydintooda iyo guud ahaan maamulkooda waxay si toos ah u hoos imaanayaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

Dhaqan galka Sharcigani wuxuu ka bilaabanayaa 31ka Febraayo 1984, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 45 taariikh 25 Nov. 1984, Oggolaansho meelmarinta Heshiiska maalgelinta Carbeed ee ka dhexeeya Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska Maalgelinta Carbeed ee ka dhexeeya Dawladaha Xubnaha ka ah Jaamacadda Dawladaha Carabta.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Cammaan ee Dalka Urdun taariikhdu markey ahayd 26 Nofember 1980.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Heshiiska iyo Dastuurka J.D.S.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 25.11.1984

Sharci lambar 46, taariikh 25 Nov. 1984. Oggolaansho Heshiiska horumarinta; badbaadinta iyo dammaanad siinta maalgelinta ee ka dhexeeya Waddamada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska Horumarinta, badbaadinta iyo dammaanad siinta maalgelinta ee ka dhexeeya Waddamada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Xarunta Ururka Islaamka oo ah Jeddah ee Dalka Boqortooyada Sacuudi Caraabiya.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaa nqodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Heshiiska iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25.11.1984

Sharci lambar 47, taariikh 16 Dis· 1984, U rogid Sharci, Xeerka Sharci lambar 10 ee 18·11.1984, «Dib u habaynta Sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda lambar 2 ee 29·12.1961 lam· 317 ee 17·12.1962 iyo is beddelaadyadii ka dambeeyay.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod· 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeerka Sharci lambar 10 ee 18·11·84, «Dib u habaynta Sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda lambar 2 ee 29·12.1961, lambar 317 ee 17·12.1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyay».

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda·

Muqdisho, 16 Dic· 1984

MADAXWEYNAHA J·D·S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 48, taariikh 16 Dic. 1984, Oggolaansho Miisaaniyadda ku talo galka ee Dawladda Sannadka 1985.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyay in ay soo ururiso dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran miisaaniyadda halkan ku lifaaqan ayadoo la raacayo Xeerka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka guud ee miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan madaxyada miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyey Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada madax xige walba waxaa awood loo siiyay Wasiirka Wasaaradda waliba. Kala wareejinta caynkan oo kale ee miisaaniyadda Dawladda Hoose awxaa awood loo siiyay Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobol waliba.

Qod. 3aad

Miisaaniyadda loogu talo galay mashruucyada Horumarinta iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya Mashruuc Horumarineed.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1985, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 16 Dic. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sarci lambar 49 Taariikh 23 Dis. 1984 wax ka beddelid Dastuurka Jah. Dim. Soomaaliya.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda.

Qod. 1aad

Qod. 61aad ee Dastuurka waxaa lagu kordhiyey lam 5aad oo u qormi doona sida soo sacda.

«5. Qof kasta oo noqda Madaxweynaha J.D.S. qaanuun ahaan wuxuu noqonayaa xildhibaan inta uu nool yahay, haddii ayna maxkamadi ku xukumin dambiga khiyaano qaran, wuxuuna tirada xildhibaanimada Golaha shacbiga ku noqonayaa dheeri.»

Qod. 2aad

(1) Qod. 67aad, lambarka 3aad ee Dastuurka, waxaa loo beddelay sida soo socota.

«3. Go'aan ka gaaridda Maxkamadeynta Madaxweynaha J. D. marka lagu soo caddeeyo dambiga khiyaano Qaran.»

Qod. 3aad

(1) Qod. 80aad ee Dastuurka waxaa loo beddelay sida soo socota:

Qod. 80aad Doorashada iyo mudada Xilka

1. Sharraxaadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa leh Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaana toos u dooranaya dadwe/ha

2. Doorashadu waxay dhacaysaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta ayan dhammaan mudada Madaxweynaha xilka haya.

3. Masharraxu wuxuu Madaxweyne noqonayaa mar ka uu helo Aqlabiyadda Codbixiyaasha. Haddii uu ku guuleysan waayo tiradaas, Golaha Dhexe ee Xisbigu wuxuu soo sharraxayaa qof kale. Sharraxaadda iyo doo rashada cusub waxaa loo marayaa isla habka kor ku tilmaaman, waana in ay dhacaan 30 maalmood gudahood laga billaabo maalinta lagu dhawaaqay natiijada Aftida hore.

4. Madaxweynaha Jamhuuriyadu wuxuu xilka hay nayaa Toddobo Sano laga billaabo maailnta la dhaariyo, dibna waa loo dooran karaa.

5. Marka uu hawsha billaabayo, Madaxweynaha Jamhuuriyadu wuxuu Golaha Shacbiga hortiisa ku marayaa Dhaarta ku xusan qod. 73aad ee Dastuurka.»

Qod. 4aad

Qod. 82aad eeDastuurka waxaa loo bedelay sida soo socota:

«Qod. 82aad: Awoodaha iyo hawlaha Madaxweynaha.

1. Madaxweynaha J.D.S. Awoodaha iyo hawlaha Dastuurka iyo sharciyadu siinayaan waxaa u wehliya kuwa soo socda:

a) Dhawridda ilaalinta Dastuurka iyo shuruueda Dalka, u hawlgalka habsami u socodka hawlaha Hay'ad aha Dawladda, sugidda jiritaanka Qaranka, ilaalinta madax banaanida iyo midnimada shacbiga Soomaaliyeed iyo xaqiijinta cadaaladda iyo sinnaanta bulshada dhexdeeda.

b) Dejinta Siyaasadda guud ee Dawladda, isagoo la tashanaya Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Wasiirrada iyo hubinta fulinteeda;

t) Masilaadda xiriirka Qaranku la leeyahay dibedda.

j) Masilaadda midnimada hoggaanka Siyaasadeed ee Xisbiga iyo Qaranka.

x) Meelmarinta heshiisyada caalamiga ah ee saameynaya difaaca iyo nabadda, qarannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda, kaddib marka ay oggolaadaan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbiga;

kh) Meelmarinta heshiisyada kale ee caalamiga ah;

d) Qaabilaadda iyo aqoonsiga Danjirayaasha iyo Madaxda Ergooyinka Shisheeye iyo Hay'adaha Caalamiga ah;

r) Guddoominta shirarka ay u wada jiraan Hay'adaha Xisbiga iyo kuwa Qaranku;

s) Magacaabidda iyo xil ka wareejinta Wasiirrada iyo Wasiirro ku-xigeennada iyo aqbalidda istiqaaladooda;

sh) Magacaabidda iyo xil ka wareejinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

dh) Magacaabidda iyo xil ka wareejinta Saraakiisha Sare ee Qaranka;

c) In uu bixiyo masaabax, ciqaabna dhimo;

f) Waa Taliyaha Sare ee Ciidaammada Qalabka Sida iyo Guddoomiyaha Guddiga Difaaca Qaranka;

q) Ku dhawaaqidda xaaladda dagaalka iyo nabadda, kaddib marka ay go'aamiyaan Golaha Dhexe ee Xisbiga iyo Golaha Shacbigu;

k) In uu Dadweynaha u bandhigo afti, marka ay Dalka la soo gudboonaadaan arrimo la xiriira danta guud ee Dalka;

l) Bixinta billadaha iyo aqoonsiyada mudnaanta ee kale.

2. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu , wuxuu isticmaalka awoodihiisa ku tilmaaman Dastuurka ku soo saarayaa Xeer.

3. Madaxweynaha laguma eedeyn karo falalka la xiriira gudashada xilkiisa, marka laga reebo xaaladda khiyaano qaran. Ku eedeynta Madaxweynaha dembigaas waxaa soo jeedin kara Golaha Dhexe ee Xisbiga ama ugu yaraan saddex meelood meel Xildhibaannada, Golaha Shabiguna wuxuu ku guddoonsanayaa saddex meelood laba Xildhibaannadiisa, iyadoo loo qaadayo cod furan, waxaana lagu maxkamadeyn karaa Maxkamadda dastuuriga ah horteeda oo keliya. Ciqaabtuna waxay noqoneysaa in xilka laga wareejiyo, xil dambe oo qaranna uusan qaban karin».

Qod. 5aad

(1) Qod. 84aad ee Dastuurka waxaa loo bedelay sida soo socota:

Qod. 84aad Madaxweyn Ku xigeennada.

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadu wuxuu magacaa bi karaa, isagoo dhegeystay ra'yiga Golaha dhexe ee Xisbiga, Madaxweyne ku xigeen ama madaxweyno ku xigeenno, wuxuunna u wakiilan karaa qayb ka mid ah xilalkiisa.

2. Madaxweyne ku xigeenku wuxuu Madaxweynaha hortiisa ku marayaa dhaarta ku xusan qod. 73aad ee Dastuurka.

Qod. 6aad

(1) Qod. 85aad ee Dastuurka waxaa loo bedelay sida soo socota.

Qod. 85aad Xil gudasho karid la'aan

1. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu, marka ay noqoto in uu xilka iskii uga fariisto, wuxuu qoraalka istic-

2. Madaxweyne ku xigeenka koowaad ee Jahmuuriyadda ayaa qabanaya xilka Madaxweynaha marka ay timaado sabab ka reebeysa Madaxweynaha gudashada Xilkiisa.

3. Sababta xil gudasho karid la'aantu marka ay tahay mid joogto ah iyo xaaladaha geerida iyo istiqaalada, Doorashada Madaxweynaha cusub waxaa loo qaadayaa Afti, iyadoo la raacyo tilmaamaha qod. 80aad ee Dastuurka, aftiduna waa in ay dhacdaa Lixdan maalmood gudahood.

Qod. 7aad

Qod. 86aad ee Dastuurka waxaa loo bedelay sida soo socota.

Qod. 86aad Awoodda Fulinta.

1. Awoodda fulinta ee Dalka J.D.S. Waxaa leh Madaxweynaha.

2. Madaxweynaha waxaa xilka kor ku tilmaaman la qabanaya Golaha Wasiirada oo ah hay'adda fulinta iyo maamulka ee Qaranka ugu Sareeyaa.

3. Golaha Wasiirradu wuxuu ka kooban yahay Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo Guddoomiye u ah, Madaxweyne ku xigeennada iyo Wasiirrada.

4. Xubnaha Golaha Wasiirradu waxay masuul uga yihiin Madaxweynaha Jamhuuriyadda fulinta waajibaadkooda.

Qod. 8aad

Qod. 92aad ee Dastuurka waxaa loo bedelay sida soo socota.

Qod. 92aad Wasiirro ku xigeenno.

Wasiirrada waxaa xilkooda ku kaalin kara Wasiirro ku xigeenno uu magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyaddu, waxayna xubno ka noqonayaan Golaha Was/da.

Qod. 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23 Dis. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADWEYNAHA JDS L. 53 ee 29 Nof. 1984, Billad Dahab Waddaninimo ah oo lagu maamuusay Jaalle S/Guuto Maxamed Xaashi Gaani.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;
MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo warbixinta Guddiga Kormeerka G/Dhexe XHKS, ee G/W/Galbeed iyo Togdheer;
MARKUU TIXGELIYEY: Sida waddaninimada, Kacaanimada uu si buuxda u gutey hawlihii kaga aaddanaa dhinaca sugidda Nabadgelyada Waqooyi Galbeed iyo ka qaybqaadashada hawlaha Ololayaasha kala duwan Jaalle S/Guuto Maxamed Xaashi Gaani Taliyaha Q.26aad ee XDS,
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamamaarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Niyad Sami, Waddaninimo, Kacaannimo iyo isagoo si hagar la'aanta u soo gutay waajibaadkiisa, la guddoonsiiyo aqoonga uu ka mudanayay Ummaddiisa, loogana reebo raad wax ku ool ah;
MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD DAHAB WADDANINIMO AH Jaalle S/Guuto Maxamed Xaashi Gaani oo ka tirsan Wasaaradda Gaashaandhigga.

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 29 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 54 ee 29 Nof. 1984, Billad Qalin Waddaninimo ah oo lagu maamuusay Jaalle G/Sare Ibraahim Cabdi Nuur «Afgaab».

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;
MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Guddiga Kormeerka G/Dhexe XHKS, ee G/W/Galbeed iyo Togdheer;
MARKUU TIXGELIYEY: Sida Waddaninimada, Kacaannimada uu si buuxda u gutey hawlihii kaga aaddanaa dhinaca sugidda Nabadgelyada W/Galbeed iyo ka qaybqaadashada hawlaha Ololayaasha kala duwan Jaalle G/Sare Ibraahim Cabdi Nuur «Afgaab» Xoghayaha G. Xisbiga ee G/W/Galbeed;
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamamaarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami, Waddaninimo, Kacaannimo iyo isagoo si hagar la'aanta u soo gutay waajibaadkiisa la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummaddiisa, loogana reebo raad wax ku ool ah;
MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD QALIN AH OO WADDANINIMO AH Jaalle G/Sare IBRAAHIM CABDI NUUR «Afgaab» oo ka tirsan Wasaaradda Gaashaandhigga.

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 29 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 29 Nofemoer 1984, Billad Maar ah ee Hawlkarnimo.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. yahay 1 ee 1da Luuliyo 1976 iyo Sharciga Lamb. yahay 65 ee 19ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Hawlkarnimada iyo Daacadnimada dheeraadka ah ee uu muujiyey Madaxa Wershadda Moobilka;

MARKUU TIXGELIYEY: Sida Mahadda iyo Ammaanta mudan ee uu xilka gaarka ah isaga saaray Horumarinta Wershadda; Isagoo kormeer iyo hubin aan kala go'lahayn ku hayey Shaqaalaha Wershadda;

MARKUU TIXGELIYEY: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda G/dhigga;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA 1aad

Waxaa la Guddoonsiiyey BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO G/LE DHEXE JOM. AADAN XASAN CALI;

QODOBKA 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 18.2.1984

Muqdisho, 29 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 56, taariikh 25 Nov. 1984, Meelmarinta Heshiiska maalgelinta Carbeed ee ka dhexeeya Dawladaha Xu'onaha la ah Ururka Jaamacadda Carabta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUUARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;
MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 45, taariikh 25 Nofember 1984 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;
MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskaas;

WUXUU SOO SAARAYAA
Xeerka soo socda:

QODOBKA 1aad
Waxaa la meelmariyey Heshiiska maalgelinta Carbeed ee ka dhexeeya Xubnaha Ururka Jaamacadda Dawladaha Carabta oo lagu kala saxiixday magaalada Cammaan taariikhdu markey ahayd 26ka Nofember 1980.

QODOBKA 2aad
Heshiisku wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci ah, waxaana dahaqangalkiisa loo raacayaa sida uu qabo Qod. 41aad ee Heshiisku.

QODOBKA 3aad
Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25.11.1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٥٦ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م
التصديق على الاتفاقية الموحدة لاستثمار رؤوس الاموال العربية في الدول العربية .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .
وعلى القانون رقم ٤٥ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م والذى بموجبه وافق مجلس على الاتفاقية الموحدة لاستثمار رؤوس الاموال العربية فى الدول العربية .
ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على الاتفاقية الموحدة لاستثمار رؤوس الاموال العربية فى الدول العربية المبرمة فى مدينة عمان بتاريخ ٢٦ نوفمبر ١٩٨٠م .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

يصبح هذا المرسوم ساري المفعول ابتداء من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية .
مقديشو — ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
— محمد سياد بري —

Xeerka Madaxweynaha JDS lr. 57, taariikh 25 Nov. 1984 Meelmarinta Heshiiska horumarinta, badbaadinta iyo dammaanad siinta maalgelinta ee ka dhexeeya Waddammada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 46, taariikh 25ka Nofember 1984 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meelmarinta Heshiiska ujeeddada ku tilmaamna;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskan;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

QODOBKA 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska horumarinta, badbaadinta iyo dammaanad siinta maalgelinta ee ka dhexeeya Waddammada Xubnaha ka ah Ururka Islaamka oo ay ka mid tahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

QODOBKA 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci, waxaana dhaqan galkiisa loo raacayaa sida uu qabo Qod. 21aad ee Heshiisku.

QODOBKA 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25.11.1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٥٧ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م
التصديق على اتفاقية تشجيع وحماية وضمان الاستثمارات بين الدول الاعضاء فى منظمة المؤتمر الاسلامى .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .
وعلى القانون رقم ٤٦ بتاريخ ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على اتفاقية تشجيع وحماية وضمان الاستثمارات بين الدول الاعضاء فى منظمة المؤتمر الاسلامى .
ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر ؛

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية تشجيع وحماية وضمان الاستثمارات بين الدول الاعضاء فى منظمة المؤتمر الاسلامى .

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

يصبح هذا المرسوم سارى المفعول ابتداء من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية .
مقديشو — ٢٥ نوفمبر ١٩٨٤م

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
— محمد سياد برى —

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 58 ee 24 Nof. 1984, Magacaabid ku xigeen Xeer-Ilaaliye Guud ee MBD.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Madbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhacay;

MARKUU TIXGELIYEY: Talo soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka tirsigeedu yahay 795/MD1/84 ee 18.11.1984;

WUXUU GO'AAMIYEY

Xeerka soo socda:

QODOBKA 1aad

X/LE MAXAMUUD AXMED XASAN, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa loo magacaabay Ku-Xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee MBD;

QODOBKA 2aad

Ku Xigeenka Xeer-Ilaaliyuhu wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh.So. 800/= (Siddeed Boqol) bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.;

QODOBKA 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lambar 9 bogga lambar 42
Muqdisho 4 Dic. 1984
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 24 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

FAAFIN RASMI AH

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 12aad **Muqdisho, 31 Disembar 1984** **L. 2 R. 12**

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA **جريدة شهرية**

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qor taanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCIYADA Soo baxay Sannadkii 1984 bog 996

QAYBTA LABAAD

XEERARKA Soo baxay 1984 " 1001

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharciyada soo baxay sannadkii 1984

FAAFIN RASMI AH L. 1 ee Jan. 1984

Sharci L. 1 ee 1 Jan. 1984, Oggolaansho Miisaaniyadda ku-tala galka Sannadka 1984.
" L. 2 ee 7 Jan. 1984, Isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1982.
" L. 3 ee 8 Jan. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha Dawladda, (Sharci L. 5 ee 2da Feberaayo 1980).
" L. 4 ee 9 Jan. 1984, Oggolaanshaha Xissabxirka Miisaaniyadda 1982.
" L. 5 ee 9 Jan. 1984, Oggolaansho Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maalgelinta oo dhexmaray JDS J/da Federaaliga ah ee Jarmalka.
" L. 6 ee 9 Jan. 1984, Wax ka beddelid Sharci L. 5 ee 11.12.1968 iyo Sharci L. 3 ee 10.1.68, kuna saabsan Tacriifada Furdada maamulka iyo tirada.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 1 ee Jen. 1984

" L. 7 ee 9 Jan. 1984, Sharciga Macdanta.

FAAFIN RASMI AH L. 2 ee 1 Feb. 1984

" L. 8 ee 9 Jan. 1984, Wax ka beddelid Tacriifada Canshuurta Maamulka iyo tirada.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 3 ee 18 Maar. 1984

" L. 9 ee 11 Jan. 1984, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo J. Carabta ee Yaman Wax wada qabsi xagga Ganacsiga Shaqaalaha iyo Beeraha.
" L. 10 ee 15 Jan. 1984, Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

" L. 11 ee 21 Jan. 1984, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 1 ee 1da Jan. 1984, Fasaxa qalabka ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah.

" L. 12 ee 21 Jan. 1984, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 2 ee 7da Jan. 1984, Sharciga Canshuurta Gadidda.

FAAFIN RASMI AH L. 5 ee 2da Maajo 1984

" L. 13 ee 4 Maar. 1984, Dhisid Hay'adda Horseed ee Kallumaysiga.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 5 ee Maajo 1984

" L. 14 ee 19 Abr. 1984, Oggolaansho Meel marin heshiis dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Ciraaq.

" L. 15 ee 13 Feb. 1984, Wax ka beddelid iyo ku kordhin Sharciga tirsigiisu yahay 35/bis ee 18kii Maajo 1984.

" L. 16 ee 19 Maar. 1984, Oggolansho meel-marin heshiis dhexmaray JDS iyo Ha'adda Dhaqaalaha Dibadda ee Jabaan.

" L. 17 ee 19 Maar. 1984, Oggolaansho Meel-marin heshiis dhaqaale, Ganacsi iyo Iskaashi Farsamo oo dhexmaray JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Greek.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 5 ee 30 Maajo 1984

" L. 18 ee 22 Maar. 1984, Oggolaansho heshiis ku saabsan Abuuridda Sanduuq La-Wadaago ee Badeecadaha.

" L. 19 ee 28 Maar. 1984, U rogid Shaeci-Xeer Sharciga L. 3 ee 8.3.84, kordhin muddo fasax qalab iyo badeeco.

FAAFIN RASMI AH L. 6 ee 1da Juun 1984

" L. 20 ee 9 Maajo 1984, Oggolaansho Meel-marin heshiis dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Afrika.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 6 ee 19 Juun 1984

" L. 21 ee 30 Maajo 1984, Oggolaansho Heshiis dhex-maray JDS iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 7 ee 19 Luul. 1984

" L. 22 ee 24 Juun. 1984, Abuuridda Golaha Sare ee Daryeelka Hooyada iyo Carruurta.

" L. 23 ee 24 Juun. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 4 ee 18.5.84 kuna saabsan dib u habaynta Sharci L. 4,13.4.1983 Joojinta Qaadka.

" L. 24 ee 24 Juun. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 6 ee 18.5.1984 kuna saabsanaa Baabi'inta Wakaaladda Horumarinta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

" L. 25 ee 24 Juun. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 5 ee 18.5.84, Dembiyada Mukhaadaraadka.

FAAFIN RASMI AH L. 8 ee 1 Agoos. 1984

" L. 26 ee 5 Luul. 1984, Sharciga Shaqaalaha Warshadaha Qarnaka.

" L. 27 ee 7 Luul. 1984, Oggolaansho Heshiis amaaheed oo dhex-maray JDS iyo Bankiga Maalgelinta ee Yurub, kuna saabsan Mashruuca Gaaska Afgooye.

" L. 28 ee 7 Luul. 1984, Oggolaansho Heshiis amaaheed oo dhex maray JDS iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga (IDA) oo ku saabsan Mash-ruuca Gaaska Afgooye.

FAAFIN RASMI AH L. 9 ee 1 Sebt. 1984

" L. 29 ee 9 Agoos. 1984, Oggolaansho Meel-marin heshiiska Iskaashiga Garsoorka Carabta ee Riyaad..

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 9 ee 15 Sebt. 1984

" L. 30 ee 30 Luul. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 7 ee 12 Juun 1984, Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

" L. 31 ee 31 Luul. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 8 ee 26 Juun. 1984, Kordhin muddo fasax qalab ka keenidda dibadda oo ku meel gaar ah.

" L. 32 ee 30 Luul. 1984, Oggolaansho Xisaab xirka Miisaaniyadda 1983.

" L. 33 ee 30 Luul. 1984, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1983.

FAAFIN RASMI AH L. 10 ee 1 Okt. 1984

" L. 34 ee 9 Agoos. 1984, Oggolaansho Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Dhexe ee Iskaashioga Dhaqaalaha ee Faransiiska.

" L. 36 ee 11 Sebt. 1984, Ansixinta Sharciyada la soo saaray 1. 1. 1984, ilaa 6da Luulyo 1984.

" L. 37 ee 24 Sebt. 1984, Xilka Xisbiga ee Gobolka iyo Degmooyinka.

" L. 38 ee 24 Sebt. 1984, Dhismaha Hay'adaha Daryeelka Naafada iyo Hawlgabka Ciidammada Qalabka Sida.

FAAFIN RASMI AH L. 11 ee 1da Nof. 1984

" L. 39 ee 20 Okt. 1984, Awood siin Madaxweynaha JDS Fidin Cafis Guud.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 11 ee 20 Nof. 1984

" L. 40 ee 31 Okt. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharciga L. 9 ee 1 Okt. 1984, kuna saabsan kordhin muddo fasax qalabka iyo badeecad ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah.

" L. 41 ee 31 Okt. 1984, Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1984.

FAAFIN RASMI AH L. 12 ee 1da Dis. 1984

" L. 42 ee 18 Nof. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Degaanka (Sharci Lam. 43 ee 1da Dis. 1979).

" L. 43 ee 18 Nof. 1984, Habaynta Xilka iyo Awoodda Qunsuliyadda Soomnaaliyeed.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 12, ee 28 Dis. 1984

" L. 44 ee 26 Nof. 1984, Wax ka beddelid iyo ku kordhin Sharciga Lam. bis ee 18 Maajo 1981, kuna saabsan Baasaboorrada iyo Warqadaha dhoofinta.

" L. 45 ee 25 Nof. 1984, Oggolaansho Meel-Marinta Heshiiska Maalgelinta.

" L. 46 ee 25 Nof. 1984, Oggolaansho Heshiiska Horumarinta badbaadinta iyo dammaanad siinta Maalgelinta.

" L. 47 ee 17 Dis. 1984, U rogid Sharci-Xeer Sharci L. 10 ee 18. 11. 1984, dib u habaynta Sharciga Maamulka

Xisaabaadka Dawladda.

" L. 48 ee 16 Dis. 1984, Oggolaanshaha Miisaaniyadda ku tala galka Dawladda Sannadka 1985.

" L. 49 ee 23 Dis. 1984, Wax ka beddelid Dastuurka J.D.S..

QAYBTA LABAAD

FAAFIN RASMI AH L. 1 ee 1da Jan. 1984

XEER - SHARCI

" L. 1 ee 1 Jan. 1984, Fasax Qalab ka keenid dibadda, oo ku meel gaar ah.

" L. 2 ee 7 Jan. 1984, Canshuurta Gadidda.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 5 ee 18 Maajo 1984

" L. 3 ee 8 Maarso 1984, Kordhin Fasax Qalab iyo badeeco ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah.

FAAFIN RASMI AH L. 6 ee 1da Juun. 1984

" L. 4 ee 18 Maajo 1984, Dib u habaynta Sharciga L. 4 ee 13 Abr. 1983, kuna saabsan Joojinta Qaadka.

" L. 5 ee 18 Maajo 1984, Dembiyada Mukhaadaraadka.

" L. 6 ee 18 Maajo 1984, Baabi'inta Wakaaladda Hor ta iyo Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 7 ee 31 Luulyo 1984

" L. 7 ee 12 Luul. 1984, Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

" L. 8 ee 26 Juun. 1984, Kordhin Muddo Fasax Qalab iyo Badeeco ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 10/bis ee 28.10.84

" L. 9 ee 1da Okt. 1984, Kordhin muddo fasax qalab iyo badeeco ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah.

FAAFIN RASMI AH L. 12 ee 1 Dis. 1984

" L. 10 ee 18 Nof. 1984, Dib u habaynta Sharciga Maamulka Xisaabaha Dawladda.

FAAFIN RASMI AH L. 1 ee 1 Jen. 1984

Xeer Madax. JDS L. 1 ee 9 Jan. 1984, Meel marin Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo Maalgelinta oo dhexmaray JDS iyo J/yadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

Decree N. 1 of 9 Jer. 1984, Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 2 ee 9 Jan. 1984,
Xeer - Nidaamiyaha Sharciga Macdanta.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 3 ee 18 Maar. 1984

" " " L. 3 ee 11 Luulyo 1984,
Billado Hawlkarnimo oo lagu maamusay.
" " " L. 4 ee 11 Jannayo 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo J. Carabta ee Yaman.
" " " L. 5 ee 5 Feb. 1984,
Cawilcelin Marxuum Jaamac Kediye.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 5 ee 18.5.1984

" " " L. 6 ee 12 Maarso 1984,
Dhul ku yaal Magaalada Baydhabo.
" " " L. 7 ee 13 Febrayo 1984,
Meel-marin Heshiis.
Decree N. 7 of 13 Feb. 1984, Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 8 ee 19 Maar. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo J. yadda Ciraaq.
" " " L. 9 ee 19 Maar. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Dhaqaalaha Dibadda ee Jaban.
Decree N. 9 of 19 Mar. 1984, Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 10 ee 19 Maar. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Dawladda J. yadda Greek.
Decree N. 10 of 19 Mar. 1984, Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 11 ee 21 Feb. 1984,
Gunnada Shaqaalaha Waaxda Duulista iyo Hawada.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 5 ee 30 Maajo 1984

" " " L. 12 ee 25 Jan. 1984,
Meel-marin Wadiiqadaha kalfadhigga Shirka Guud ee Boos. Caalamiga (UPU).
Decree N. 12 of 25 Jan. 1984, Instrument of Ratification of the (UPU).
Xeer Madax. JDS L. 13 ee 25 Jan. 1984,
Meel-marin Heshiiska Ururka Isg/ta Caalamiga ah (ITU).

Decree N. 13 of 25 Jan. 1984, Instrument of Ratification of the (ITU).
Xeer Madax. JDS L. 14 ee 25 Jan. 1984,
Meel-marin Wadiiqadaha Kalfadhiga Ururka Boos/da Carbeed.
" " " L. 15 ee 25 Jan. 1984,
Meel-marin Heshiiska Ururka Isg/ta carbeed Shirka Tuunis.
" " " L. 16 ee 25 Jan. 1984,
Meel-marin Wadiiqadaha Heshiiska Ururka Boostada Afrikaanka (PAPU).
Decree N. 16 of 25 Jan. 1984, Instrument of Ratification of the P.A.P.U.

Xeer Madax. JDS L. 17 ee 25 Jen. 1984,
Meel-marin iyo ku biirid Wadiiqadaha Heshiiska Ururka Isg/ta Af/ka (P.A.TU).
Decree N. 17 of 25 Maar. 1984 Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 18 ee 22 Maar. 1984,
Meel-marin heshiis ku saabsan Abuurid sanduuq La-wadaago ee Bad/ha.
Decree N. 18 of 22 Mar. 1984 Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 19 ee 1 Maajo 1984,
Ku wareejin waaxda isku duwidda Qorsheynta Qaranka.

FAAFIN RASMI AH L. 6 ee 1 Juun 1984

" " " L. 20 ee 9 Maajo 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Bankiga Horumarinta Afrika.
Decree N. 20 of 9 May 1984, Instrument of Ratification.
Xeer Madax. JDS L. 21 ee 3 Maajo 1984,
Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Kharajka Miisaaniyadda Sannadka 1984.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 6 ee 19 Jun. 1984

" " " L. 22 ee 31 Maajo 1984,
Billad Maar ah oo Hawlkarnimo ah lagu maamusay.
" " " L. 23 ee 31 Maajo 1984,

Meel-marin Heshiis dhex-maray JDS iyo sanduuqa Carabta ee H. Dhaqaalaha.

" " " L. 24 ee 1 Juun 1984,
Isku shaandheynta Golaha Wasiirada.

FAAFIN RASMI AH L. 7 ee 2 Luul. 1984

" " " L. 25 ee 2 Luul. 1984,
Aqoonsiga Qaxootiga.

FAAFIN RASMI AH L. 8 ee 1 Agoos. 1984

" " " L. 26 ee 15 Maajo 1984,
Meel-marin Heshiis.

Decree N. 26 of 15 May 1984, Instrument of Ratification.

Xeer Madax. JDS L. 27 ee 7 Luul. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Bankiga Maalgelinta Yurub.

Decree N. 27 of 7 July 1984, Instrument of Ratification.

Xeer Madax. JDS L. 28 ee 7 Luul. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah (IDA).

Decree N. 28 of 7 July 1984, Instrument of Ratification.

Xeer Madax. JDS L. 29 ee 17 Luul. 1984,
Magacaabid ku sime Xeer-Ilaaliye.

" " " L. 30 ee 18 Juunyo 1984,
Magacaabid Garsoore (La Taliye).

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 8 ee 20 Agoos. 1984

" " " L. 31 ee 31 Luul. 1984,
Billad Maar ah Wadanninimo.

Xeer Madax. JDS L. 32 ee 29 Luul. 1984,
Xeer Nidaamiyaha Kuliyadda Culuunta, Siyaasadda.

FAAFIN RASMI AH L. 9 1 Sebt. 1984

" " " L. 33 ee 9 Agoos. 1984,
Meel-Marin Heshiiska Iskaashiga Garsoorka Carbeed ee Riyaad.

" " " L. 34 ee 5 Agoos. 1984,
Magacaabid Garsoore.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 9 ee 15 Sebt. 1984

" " " L. 35 ee 8 Luul. 1984,
Magacaabidda Guddoomiye M. B. Gobolka Sh. Hoose Marka.

" " " L. 36 ee 8 Luul. 1984,
Magacaabid Ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 9 ee 30 Sebt. 1984

" " " L. 37 ee 9 Agoos. 1984,
Magacaabid Xubnaha Dacwooyinka Shaqaalaha iyo Dadweynaha.

" " " L. 38 ee 26 Agoos. 1984,
Eedeyn loo soo jeediyey 2 Sarkaal.

" " " L. 39 ee 26 Agoos. 1984,
Eedeyn Guddiga Golaha Sh. Degaanka Degmada Caluula.

" " " L. 40 ee 26 Agoos. 1984,
Kontrabaan Faleen.

" " " L. 41 ee 20 Luul. 1984,
Magacaabid Ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud.

" " " L. 42 ee 31 Luul. 1984,
Magacaabid Xeer Ilaaliye Guud.

" " " L. 43 ee 9 Agoos. 1984,
Guddiga Qaranka ee Doorashada.

" " " L. 44 ee 9 Agoos. 1984,
Magacaabid Xubnaha Guddiga Qaranka ee Doorashada.

" " " L. 45 ee 15 Agoos. 1984,
Xaddidaadda Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Sh. ee Degaanka.

FAAFIN RASMI AH L. 10 ee 10 Okt. 1984

" " " L. 46 ee 9 Sebt. 1984,
Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa dhexe Isk/shiga Dhaqaalaha Faransiiska.

" " " L. 47 ee 11 Sebt. 1984,
Magacaabid J. L. Axmed Daahir Xas..

FAAFIN RASMI AH L. 10 bis, 28.10.84

" " " L. 48 ee 22 Sebt. 1984,

Meel-marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa H/ta Caalamiga ah.

Decree N. 48 of 22 Sebt. 1984, Instrument of Ratification.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 10 ee 25.10.84

847-891

Xeer Madax. JDS L. 49 ee 9 Agoos. 1984,
Xeer-Nidaamiyaha Xabsiyada Dalka.

FAAFIN RASMI AH L. 12 ee Disember 1984

Xeer Madax. JDS L. 50 ee 17 Nof. 1984,
Oggolaansho Gunno Dhiirrigelin

FAAFIN RASMI AH L. 12 ee 1 Dis. 1984

" " " L. 51 ee 9 Nof. 1984,
Magacaabid Garsoore.

" " " L. 52 ee 15 Nof. 1984,
Oggolaansho Jinsiyad.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 12 ee 20.12.84

" " " L. 53 ee 29 Nof. 1984,
Billad Dahab Waddaninimo ah lagu Maamusay S/Guuto Maxamed Xaashi Gaani.

" " " L. 54 ee 29 Nof. 1984,
Billad Qalin Waddaninimo ah.

" " " L. 55 ee 29 Nof. 1984,
Billad Maar ah ee Hawlkarnimo.

" " " L. 56 ee 25 Nof. 1984,
Meel-marin Heshiiska Maalgelinta Carbeed.

" " " L. 57 ee 25 Nof. 1984,
Meel-marinta Heshiiska H/ta Badbaadinta iyo Damaanadda.

" " " L. 58 ee 24 Nof. 1984,
Magacaabid ku Xigeen-Xeer Ilaaliye Guud ee MBD.

FAAFIN RASMI AH L. 2 ee 1 Feb. 1984

Xeer Was.G. Badda & De/ha L. 1 ee 1 Feb. 1983,
Xeer Nidaamiye Tariifada Dekedda.

FAAFIN RASMI AH L. 1 r 3 ee 18.3.84

" W. Gaashaandhigga L 2 ee 23 Jan. 1984,
Magacaabid Kaaliye Garsoore.

FAAFIN RASMI AH L. 2 r 5 ee 30.5.84

" W. H. & Tacliinta S. L. 2/bis 4 Maar. 84,
Abuuritaanka Kulliyadda.

" W. Gaashaandhigga L.3 ee 4 Juun. 84,
Magacaabid Kaaliye M.C.Q.S.

FAAFIN RASMI AH L. 11 ee 1.11.84

" W. Arr/ha Gudaha L 4 ee 30 Sebt. 84,
Heshiis dhexmaray Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Hoggaanka Dhismaha C. Asluubta.

" W. Boosta & Isg/ta L. 5 ee 12 Agoos. 84,
Beddelaad Tariifada Telekiska.

TIRADA FAAFINTA RASMIGA AH EE SOO BAXDAY SANNADKII 1984

1. JANNAAYO

Faafin Rasmi ah	L. 1	Taar	1 Jannaayo	1984
" " "	L. 1 r 1	"	30 Jannaayo	1984
" " "	L. 2 r 1	"	31 Jannaayo	1984

2. FEBERAAYO Faafin

Rasmi ah	L. 2	"	1 Feberaayo	1984
" " "	L. 1 r 2	"	29 Feberaayo	1984

3. MAARSO

Faafin Rasmi ah	L. 1	"	1 Maarso	1984
" " "	L. 1 r 3	"	18 Maarso	1984
" " "	L. 2 r 3	"	22 Maarso	1984

4. ABRIILE

Faafin Rasmi ah	L. 4	"	1 Abriile	1984

5. MAAJO

Faafin Rasmi ah	L. 5	"	2 Maajo	1984
" " "	L. 1 r 5	"	18 Maajo	1984
" " "	L. 2 r 5	"	30 Maajo	1984

6. JUUNYO

Faafin Rasmi ah	L. 6	"	1 Juunyo	1984
" " "	L. 1 r 6	"	19 Juunyo	1984

7 LUULYO

Faafin Rasmi ah	L. 7	"	2 Luulyo	1984
" " "	L. 1 r 7	"	19 Luulyo	1984
" " "	L. 2 r 7	"	31 Luulyo	1984

8. AGOOSTO

Faafin Rasmi ah	L. 8	"	1 Agoosto	1984
" " "	L. 1 r 8	"	20 Agoosto	1984

9. SEBTEMBER

Faafin Rasmi ah	L. 9	"	1 Sebtember	1984
" " "	L. 1 r 9	"	15 Sebtember	1984
" " "	L. 2 r 9	"	30 Sebtember	1984

10. OKTOOBER

" " "	L. 10	"	1 Oktoober	1984
" " "	L. 1 r 10	"	15 Oktoober 1984	
" " "	L. 1 r 10	"	28 Oktoober	1984

11. NOFEMBER

Faafin Rasmi ah	L. 11	"	1 Nofeember	1984
" " "	L. 1 r 11	"	20 Nofeember	1984

12. DISEMBER

" " "	L. 12	"	Disember	1984
" " "	L. 1 r 12	"	28 Disember	1984
" " "	L. 2 r 12	"	30 Disember	1984